# Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan

## Bilowgii 1-11

**Michael Eaton**

Hawlaha buugan waxaa lagala xidhiidhaya
Sovereign World

Sovereign World
PO Box 777
Tonbridge
Kent, TN11 0ZS
England

Waxaa xaq kasta u leh [C] 1997 Michael Eaton

Xaq kasta waa la dhawray. Ma jirto qayb buugan katirsan e dib loo daabici karo, ama lagu keedsan karo hab kale ama lagu baafin karo habkaleeto ey ahaataba sida qalabka isgaarsinta, koobi, rekoor ama hab kaleba, iyadoo aan rusqa laga helin xaqdhawrka daabacadda. Qayba yar yar waa laga istecmaali kara sida xigasho oo laakiin la aqoonsanayo halka qoraalkaas laga soo xigtay.

***Isla qoraaga buugan wuxuu haddana qoray buugag kale sida:***

*Wacdiyaha* (Faahfaahinta Baybalka e Tyndale) – IVP

*Kunoolanshaha Nolol Alla ka cabsasho leh* – Sovereign World

*Ku raynraynta Kiniisadda Ilaah e adduunka oo dhan ka jirta* – Sovereign World

*Kunoolanshaha Nimcada* (Rooma 6–7) – Paternoster

*Baridda ku saabsan Dhiirigelinta* – Paternoster

*Saamu'eelka 1aad* (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World

*Saamu'eelka 2aad* (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World

*Yooxanaha 1aad, 2aad, 3aad* (Shiishka ku taagan Baybalka) – Christian Focus

Calaamadda buugan adduunka looga aqoosan yahay - ISBN: 1-85240-179 6

Hab dhismeedka Buugan waxaa laga soo xigtay ururka la yidhaahdo CRB Associates, Reepham, Norfolk.

Turjumaadda buugan waxaa loo fasaxay Codka Wadada Nabada (CWN). Waxaa qaas ahaan buugga turjumay oo iskudabariday Sharmaarke.

## Waxyaalaha buugan ku jira

Horudhaca guud ................................................ 6
Horudhaca Qoraaga ........................................... 9
Maabyaal........................................................ 11
Horudhaca Buugga Bilowgii............................ 12
Bilowgii.......................................................... 18
Diyaarinta adduunya baniaadmiga u habboon.. 25
Sharafta Ilaah e uunka ku jirta .......................... 31
Aragga Ilaah.................................................... 40
Wakiil u noqoshada Ilaah.................................. 46
Nasashada Ilaah ................................................ 52
Dabbiicadda baniaadmiga................................. 59
Jannada........................................................... 65
Tijaabinta iin la’aanta ...................................... 72
Nin iyo Naag.................................................... 79
Guur ................................................................ 86
Maska.............................................................. 92
Ibliiska iyo habkuu ku shaqeeyo....................... 97
Khiyaanada Ibliiska iyo sida looga guuleysan karo ............................................................... 105
Hababka uu Ibliiska nagu weeraro.................. 111
Jannadii la gefay ............................................ 117
Eebbe ku caasinta........................................... 124
Midhta naagta................................................. 130
Iimaanka Aadan .............................................. 136
Sharafta la daahiyey........................................ 142
Baybalka iyo taarikhdii hore........................... 148
Qaabiil iyo Haabiil......................................... 157
Laba hab oo Ilaah Lagula kulmo .................... 163
‘Ilbaxnimo’ .................................................... 170
Nimca caadi ah iyo Nimca qaas ah................. 178

Noolol ay dhimasho ku hareersan tahay ......... 185
Wiilasha Ilaah iyo Gabdhaha dadka ............... 191
Daadka ............................................................ 197
Gogoldhigga ‘Axdiga’ ..................................... 203
Waxaa loo badbaadiyey duni cuseb................ 209
Qaansa roobbeedka cirka ku taala................... 215
Sheem, Xaam iyo Yaafet ................................. 221
Liiska quruumaha............................................ 227
Dabaqii Baabel................................................ 233
Agtagga Ibraahim............................................ 239

# Horudhaca guud

Waxaa jirta baahi ah in fahfaahinta Baybalka lagu fasiraa habka ugu sahlan e maanta inta badan lagu dhaqmo [si ay kuwa afka Soomaaliga ku hadlo si sahlan ugu fahmaan farriinta Baybalka]. Fahfaahinta noocaas ah waxey saldhig u yeleysa wax ka barashada Baybalka si ay kuwa akhristaan uga faa'idaan qoraaladan (haddii ay wacdiyayaal yihiin) si ay markay wax sharaxayaan hab wanaagsan wax u fahansiyaan. Waxey u baahan yihiin in ay ka leexdaan erayada culus ama aan la fahmaynin iyo weliba hab dhismeydka jumladda qoraalka. Waa in ay ka leexdaan tusalooyinka aan laga garanaynin dhaqanka aad wax baraysid. *Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan* waxyaalahaas ayey xoogga saraysa. Meela badan oo adduunka ka tirsan ayaa laga istecmaali kara qoraaladan.

Fasiraadan waxey ku salaysanyihiin qoraalada Cibraaniga iyo kuwa Griigga. Inta badan Baybalka keliya e halkan lagaga istecmaalay turjumaanka iyo fasiraadda waa Baybalka afka Soomaaliga.

Qoraalkan ma ahan mid loogutalagalay in doodo looga jawaabo ama waxyaalaha yar yar e doodda ay ka taagan tahay. Saa ay tahayna qofka qoraalkan istecmaali doono waa inuu xor u ahaado inuu fasiraaddiisa oo aan Baybalka iyo dhaqanka ka baxsanayn ku fasiraa wax bariddiisa. Laakiin isla sida ay hooyada guriga u jacayshahay in ay cuntada tan ugu macaan

reerkeeda u bixiso oo ay laakiin welka ay ku karisay u tusineysin, isla sidaas annaga waxaan u dan leenahay 'cuntada wanaagsan' e qoraalka Eebbe, e laakiin ma ahan erayada culculus e khamuuska ku jira iyo waxyaalaha ay doodaha ka taagan yihiin iyo wiixi la midka ah. Marar dhif ah ayaa waxyaalaha noocaas ah looga hadla qoraaladan. Aqoonyahanka Baybalka e looga hadlaya Cutubka 5aad  waa J.J Stamm iyo qoraalkiisa la yidhaahdo 'Die Imago-Lehre Von Karl Barth und die alttestamentliche Wissenschaft',  e ku jirta *Artwort: Festscrift Karl Barth, (ed E Wold iyo kuwa kale,  sida Evangelischer Verlag, 1956), baalasha 84-98.* Waxyaalaha inta badan qoraalada laga soo xigtay kuwaa ayaa ka mid ah! Saa ay tahayna qoraalkan laguma cabirin waxyaalaha buugagtaas taarikhda ku jiraan. Isla sidaana erayada horudhaca inta badan ma ahan in ay dooda wada hadal u baahan laga soo saaro laakiin qaar yar oo u wanaagsan uun in lagu fahmo mawduuca guud. Maraha qaarkood waxaa dhici karta in horudhac yar oo fahfaahin leh lagu daro qoraalka guud laakiin haddii si guud loo eego cutubka ugu horeya e buugan wuxuu toos u bilabaya mawduuca laga hadlaya. Markii kor laga eego waxaa caddanaysa in waxyaalaha halkan looga hadlaya ay yihiin kuwa cilmi sare looga fikiray laakiin mawduuca si sahlan oo qof kasta uu sahal ku fahmi karo ayaa looga shaqeyey. Saa ay tahayna, sahlanaanta hab dhismeydka qoraalka ma ahan isla sidaa markii loo kaco qoraalka iyo micnihiisa guud.

Erayga Ilaah waa in si taxadir leh loo dhiga loona fasira laakiin luuqadda waa in aynan ka duwanaanin ujeedada mawduuca e uu qof kasta si sahlan ku fahmi karo. Waxyaalahan oo dhan waa lagaga shaqeyey qoraalka buugan.

# Horudhaca Qoraaga

Waxaa jiraan saddex dhacdo oo aan Buugga Bilowgii si deggan ku wacdiyey. Marka ugu horeysay waxaan cutubka 1-11 ka wacdiyey idaacadda Trans-World Radio sanada la soo dhaafay. Dabadeedna waxaan wacdiyey qayba ka tirsan Buugga Bilowgii (anoo ka bilaabaya cutubka 12aad) kaa oo aan ka wacdiyey Kiniisadda Rouxville ku taala e la yidhaahdo Baptist. Dabaddeedna waxaan duubay barnaamijya wax ka baraya cutubka 12aad ilaa 50aad e buugga Bilowgii. Madaama wax bariddeydi hore dib hawada looga sii dayey, buugga oo dhan ayaa hawada lagaga maqlay dhinacyada kofureyd e qaaradda Afrika.

Dhawaan waxaan fursad u helay inaan qayba kale e buugga Bilowgii ka tirsan aan kaga wacdiyo magaalada Nayroobi. Buugani waa natiijada wax bariddii aan galab kasta ka bixin ayey skool ay leedahay Kiniisad la yidhahdo Krisko oo ogolaatay in ay waxbaridda Bilowgii 1-11 ka dhigato qayb waxbaridda skoolka Kiniisaddaasi ka mid ah. Wax bariddan waxey bilaabatay dhamaadka sanadka 1995 oo waxey idlaatay bilowgga sanadka 1996. Aad ayaan Rabbiga ugu mahadinaya sida uu Ilaah wakhtigaasi oo dhan uga dhigay midda waxbarashadan laga faa'ido. Waxaa dhaqan inoo aheyd inaan toddobaadkiba afar maalmood waxbarashada iskuugu wada imaano. Isniinta iyo Khamiista waxey aheyd maalin wax barid; Talaada iyo Jimcana waxey

aheyd maalin xidhiidhka aan Ilaah la leenahay dib u cusbooneysineynay. Maalmahan oo dhan dad badan ayaa soo buuxsamayey guriga kulanka e la yidhaahdo city hall e ku yaala bartamaha magaalada Nayroobi kaa oo ay dadka ilaa irdaha tubnayeen. Qaybaha buugan waxaa ku jiraan waxbariddii maalmaha Isniinta ay dadka baranayeen.

Aad ayaan ugu faraxsanahay Jenny Eaton, iyo Tina Gysling, gabadheyda, oo qoraaladeyda ka shaqaynaysay; wiilkeyga Calvin oo si joogta ah macaawina iiga ahaa xagga dhibatooyinka kombyutarada; iyo weliba Chris Mungean kaa oo xagga iimaanka iyo xidhiidhka aan Ciise la leeyahay iga caawin ayey.

# Maabyaal

1. Faafinta jiinsiga baniaadmiga ………149
2. Baniaadmiga oo ku butaacay Ameerika iyo Australiya… 150
3. Lixda tallabooyin e ugu horeyey hormarka adduunka…………………170

# Horudhaca Buugga Bilowgii

***Qaybta 1aad***

Buugagta qaarkood e ka tirsan Kitaabka waxaa loo malayn karaa in ay ka qiima weyn yihiin kuwa kale. Ma ahan inaan leeyahay Ilaah halkaasuu waxyaala wanaagsan uga hadlay ka badan waxa buugagta kale ku jira, laakiin waxey u egyihiin in ay kuwa kale ka qiima badan yihiin. Runtii Buugga Bilowgii waa mid aad ugu muhimsan baalka Baybalka. Inta badan waxaa loogu yeedha ‘Buugga bilowyada’ maxaa yeelay wuxuu noo sheegaya aasaaska waxyaala badan oo aan qiimayno. Waxaan akhrin ayna aasaaska adduunka, aasaaska guurka, aasaaska dembiga, aasaaska bulshooyinka iyo luuqadaha. Cutubka 12aad – 50aad waxaan ka akhrin aynaa aasaaska dadka Ilaah.

Wax kastoo la doonaya in la fahmo way wanaagsan tahay in ay asalkooda iyo meeshay ka soo farcameen la ogaado. Markay masiibooyin adduunka ka dhacaan waxaan isweydinaa ‘sidee bey taa ku dhacday?’ ‘Marxaladdaasi sidee bey ku soo askunmatay?’ haddii ay kuwa caarruurteena ka mid ah skoolka ku dhibtoodaan, waxaan weydin aynaa, ‘maxaa dhacay?’ ‘dhibaatadan intee bey ka bilaabatay. Haddii ay noqoto wax xaaska ku saabsan, wax gaariga ku saabsan dhibaata adduun weynaha haysata ama dagaal, waxaan doonaynaa inaan jawaab u helno su’aasha ah, ‘sidee bey ku bilaabatay?’ Waxaan

weydin aynaa ‘intee buu qofkan, marxaladdan ama mashiintan – ama wax alla waxey ahaataba ka yimadeen? Waxey aheyd sheekadooda intaanay aniga I soo gaarin?’ Kuma qanacsanin aqoonta aan shey u leenahay ilaa aan ka ogaano askunka ama aasaaska sheyga.

Bilowgii su’aaladan ayuu si wada saamayn leh ku weydinaya. Wuxuu ka hadlaya su’aalada sida, ‘adduunka intee buu ka yimid?’ ‘jiinsiyadda baniaadmigu halkee bey ka soo askunmay?’ ‘waa maxay aasaaska guurka?’ ‘Quruumaha sidee bey ku yimadeen?’ Runtii markii loogu yeedhaya buugga aasaaska sabab weyn ayaa ku jirta.

**Bilowgii 1-11 waa taarikh masaal maskax carruureyd camal lagu qoray** (ama waxaa loo qoray sida masaal). Saddexda cutub e ugu horeya waa sida sheekooyinka aan carruurta u sheegno. Waxaan halkaa ka akhrin aynaa dhacdo laga yaaba inuusan jiri karin qof ka marqaati furi kara. Waxey ka bilaabanaysaa abuurista adduunyada iyo qoraxda, bisha iyo xiddigaha. Waxaan akhrin aynaa abuurista badaha iyo xayawaanada iyo Aadanka ugu horeyey. Dhacdooyinka ugu horeya waxaa loo sheegay hab aanay jiri karin wax qaloocan ama calaama su’aal ay ku jirto. Ilaah wuxuu shaqeyey lix maalmood oo maalinta toddobaadna fasax buu qaatay si uu u eego uguna stareexo waxyaalihii uu abuuray. Labta waxaa laga abuuray laf, abeesadana way hadleysay, mustaqbalka jiinsiyada dadkana waxey ku

xirnayd geed, Ilaah wuxuu dhex socday beer, waxaa jiray geed Aadan ku deeqi lahaa noolol weligeed ah. Runtii waxa halkaa ku jira oo dhan waa sheeko aan caadi ahayn haddaan si gaaban uga hadalno!

Cutubka afraad hab qoraalka sheekadu in yar ayey isbedeleysa oo waxey iisu bedeleysa sheeko caadi ah. Waxaan geleyna sheeko aan ka fahmi karno hab nooleydkeena. Waxaan arkayna sheekooyin ku saabsan dilka, naago badan guursashada iyo masayr ka dhex dhacay laba wiil oo walaalo ah. Waxaan arkeyna sheeko ku saabsan beerfale iyo tumaal, heeso iyo gabayo. Waxyaalahan waxey u soo dhowaaneyaan adduunyada aan ku noolnahay. Ilawse Abeesada hadleysa waa wax maskaxdeena ka weyn, laakiin waan ognahay wax ku saabsan walaalo degaalaya, iyo nimano jacayl in ay guursadaan hal naag ka badan!

Hase ahaatee, weli waxaa jiraan sheekooyin la yaab leh iyo dhacdooyin soo jiidasho leh. Dumarka waxey bilabeen in ay guursadaan malaa’igo hamaan leh waxeyna keentay noolol Ilaah uusan jaclaysanin taa oo sababtay inuu biyo ku laayo kuwa Qaabiil iyo Haabiil ka soo farcamay si uu dib u bilaabo jiinsiga baniaadmiga. Nuux reerkiisuu ku badbaadiyey dooni loo dhisay habka sanduuqa maydka la geliyo. Xayawaanada kuwa ka mid ahna way kula hoyddeen doonida reer Nuux. Farcankii

Nuuxna wuu badbaaday. Weli waxey noola egtahay sheeko carruureyd! Markay ummadda bilaabaneysay hal af ayaa lagu wada hadlayey, waxeyna bilabeen in ay dabaq ay Ilaah ku gaaraan dhistaan taa oo ay wagaasi u qabeen inuu Ilaah meel iyaga ka fog oo cirka ah ku noolyahay. Ilaah ayaa soo degay si uu u ogaado waxyaalaha dhulka ka socda. Wuxuu arkay uunkii cusbaa e baniaadmeed waxey noqdeen kuwa aad u hawlaysan taa oo sababtay in ay afaf kala duwan ku hadlaan. Waxey aheyd fikirad wacan oo lagu joojin karo hawshoodi dhismada.

Habkan sheekada loo qoray waa hab noocee?

Markaan eegno dhamaadka Bilowgii 11aad sheekadu way yara bedelmaysaa oo waxaan arkeyna iyadoo iisu bedeshay waxyaala aan wax ka fahmi karno. Wixii Bilowgii 12aad ka bilaabato dhacdooyinka waxey noqonayaan waxyaala maskax gal ah. Waxaa jira hal qoys uu Ilaah u istecmaalay inuu reer binu Israa'iil iyo adduunyada oo dhan badbaado ku siiyo. Waxaa kale oo jiraan Isxaaq oo ka dhashay hooyadiis sagaaltameeya jirta, iyo riyada malaa'igaha uu Yacquub ku riyooday isagoo ka soo degaya jaraanjar, laakiin kuwani waa muucjisooyin caadi ah markaan la barbar dhigno waxyaalaha aan Bilowgii 1-11 ka soo akhrinay! Muucjisooyinka caadiga ah waan la qabsan karnaa laakiin waxyaalaha Bilowgii 1-11 ku jiraan waa dhacdooyin habkooda leh!

Sidaa daraaddeed ayaan u leeyahay sheekooyinka Bilowgii 1-11 waxaa lagu qoray masaal maskax carruureed leh. Qoraalkan labadiisa dhinacba xoog baan ka saaraya.

(1) Waxyaalahan waa sheeko – Qaybaha kale e Kitaabka ka tirsan waxyaalaha Bilowgii 1-11 waxey ku tirin ayaan in ay yihiin dhacdooyin taarikh ah. Sheekooyinka Mesabotamiya e hadda ah Masar waa sidaa oo kale. Waxaa laga sheegaya sheekooyin la yaab leh laakiin waxyaalaha laga sheekeynaya waa wax taarikhi ah! Isla sidaa ayey u tahay sheekooyinka Bilowgii 1-11 ku jira. Waxaa la istecmaalaya isla habka sheekooyinka Mesabotamiya loo qoray. Habka sheekada loo sheegay waa hab masaal laakiin waxyaalaha laga sheekeynaya waa wax jiray. Eraygan uu Ilaah barakadeyey waxaa noogula sheegaya isla habka sheekooyinka Mesobotamiya loo sheegay.

(2) Waa sheeko lagu qoray **hab masaal maskax carruureed leh.** Abeesada ma hadasho, waxaan tan ka cadayn karnaa Axdiga Cuseb in Abeesada Bilowgii 3aad ay tahay Masaal. Buugga Muujinta waxaa nooga cadaanaysa in Abeesada ay tahay Sheeddaan! Haba ahaatee, Sheeddaanka meelna loogama sheegin buugga Bilowgii. Bilowgii 3:1 si fiican ayey uga cadayneysa iney Abeesadu aheyd mid ka tirsaneyd xayawaanada kale.

Kow iyo tobbanka cutub e ugu horeyaan Buugga Bilowgii waxey ka sheekeynayan abuuris (1:2-2:3) iyo habka ugu horeyey oo jiinsiga baniaadmiga lagu daahiriyey (2:4-25). Haddana waxaa jirta sheekada gefka la galay (3:1-6) iyo dhimashada degdegta aheyd oo jiinsiga baniaadmiga soo gashay (3:7-24). Sheekada haddana waxey na tusineysa dhibaatada guud uu gefka baniaadmiga u geestay. Wasakhnimada gefka ayaa si daran u faaftay. Bulsha dhan ayaa la baabi'iyey (Cutubka 4aad); dhimasho ayaa meel kasta guumeysatay (Cutubka 5aad). Jiinsiga baniaadmiga wuxuu noqday mid awoodda jiniyada ku adeega (6:1-8) isla markaana baniaadmiga uu sii burburey, Ilaah ayaa iyaga ku xanaaqay oo go'aan ku gaaray inuu baabi'iyo farcanka Qaabiil iyo Haabiil si uu dib ugu bilaabo marxalad kale oo cuseb. Daadkii ayaa dadka ku soo reebay in ay noqdaan guruf (6:9-7:24). Ilaah wuxuu daadkii ka soo dhaliyey adduun cuseb (8:1-19) wuxuuna ku dhaartay inuusan mar dambe adduunyada saa ku baabi'in doonin wuxuuna adduunyada ku bilaabay xaalado cuseb (8:20-9:17). Durbaba gefka iyo dhimashada dib bey u soo noqdeen.

# Bilowgii

***Cutubka 1aad***

(Bilowgii 1:1)

Sheyga ugu horeya oo ay nagu waajib tahay inaan askunkeena ka ogaano waa tan ah ineynan su’aal ku jirin in Ilaah uu jiro, Ilaah waa dhab, Ilaah waa Rabbiga iyo Sayidka wax kasta. Waxyaalahan oo dhan waxaan ka baraneynaa aayadda ugu horeysa Baybalka.

Habka uu qoraalka Baybalka ku bilowday ma ahan wax iska dhacay laakiin waa ku talagal. Dhabta ah inuu Ilaah jiro abuureyna wax kasta waa aasaas wanaagsan oo suurtagal ah. Waana aasaaska alla caabudka dhabta ah waana aasaaska ugu wanaagsan in wax kasta Ilaah laga hor mariyo.

Bilowgii 1:1-2:3 waa taarikh ku saabsan abuurista adduunka. Ilaah waxaa lagu masaalay qof shaqaala ah oo lix maalmood shaqeyey maalinta toddobaadna nastay. Bilowgii 1:1 ma ahan madaxa qaybtan, laakiin waa furaha Bilowgii 1-5.

Bilowgii 1:1 waa inaan qumaati u eegna, waana inaan ka fekerno sida ay erayada iskuugu xiriirsan yihiin waayo, wax baan ka baranaynaa waana wax noolosheena quseeya.

1. **Aad uga fiirso erayada Bilowgii 1:1**
**‘***Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray.’*

***Bilowgii…***Kama hadleyso aayadda bilow wax horey loo soo bilaabay. Waxey ka hadleysa 'Bilowgii'. Waa Bilaw aanay jirin wax ka horeyey. Isla qoraalkan wuxuu haddana ku soo noqonaya Yooxanaa 1:1 *'Bilowgii waxaa jiray hadalka…'* Aayadda waxey ka hadleysa Bilowgii wax kasta ka horeyey, taarikh kastana ka horeyey, si alla sidii aad maskaxdaada gadaal ugu noqon kartidba.

***Ilaah…*** Waa marka ugu horaysa oo erayga 'Ilaah' Baybalka laga istecmaalay. Waa inaad fahamtid in inta badan magacda Ilaah si taxadir leh loo istecmaalo. Erayga 'Ilaah' waa mid caalami ah oo xataa kuwa aanan Ilaah addeecin way istecmalaan. Macnaha eraygaasi ayaa halkani laga macneynaya. Erayga 'Ilaah' waxaa Baybalka loogu macneyey 'Ilaaha wax kasta abuuray'. Kan abuuray samada iyo dhulka. Waxaan arki doonna markuu Ilaah xiriir la yeesho labka iyo dhaddigga in magac kale loo istecmaalayo, erayga 'Yahweh' ama 'Rabbiga'. Laakiin 'Ilaah' waa erayga cid kasta u dhexeeya aadna loo istecmaalo, kaa uu micnahiisa yahay kan ina uuntay. Erayga 'Ilaah' waa mid xoog siinaya awoodda Ilaah. Wuxuuna macnihiisa ka helay cutubkan.

Habka ugu horeyey oo magaca Ilaah lagu qaaday waxaa loogu sheekeynayey wuxuu sameeyo. Baybalka nama siinaya magac qarsoon ama fikirad filosoofiyiin oo Ilaah ku saabsan. Ilaah

laguma garan karo wax aanan ka ahayn wuxuu sameyey iyo wuxuu yidhi. Ilaaha keliya oo jira waa kan Baybalka, Ilaaha wax kasta abuuray, Ilaaha Ibraahim, Ilaaha Ciise Masiix noogu yimid. Wixii Bilowgii 1:1 ka bilaabato, Eraygan 'Ilaah' waxaa lagu macneynaya 'Ilaaha weyn e wax kasta abuuray oo Israa'iil isku muujiyey'. Waxaa imaan doontaa mar erayga 'Yahweh' aad loogu istecmaali doono inuu macneyo badbaado. Micnahiisu waa 'Ilaaha ku badbaadinaya dhiig wan laga daadiyey'. Laakiin halkan Bilowgii 1:1 waxaan hordhac ku helnay Ilaah inuu yahay Ilaaha wax abuuray.

***Abuuray…*** Baybalka wuxuu erayga 'abuuray' u istecmaalaya hab uu Ilaah yahay abuuraha wax kasta. Baybalka uma xilsaarin abuurista qof kale. Baybalka ma sheegayo in qof kale uu wax abuuray. Maalmahan waxaan ka hadalnaa dad mutacalimiin ah oo waxyaala hagaajiyaan. Ma xumo inaan saas ku fekerno laakiin waa inaan ogaano in erayga abuuris uu yahay mid si qaas ah ugu kooban waxyaalaha uu Ilaah keliya abuuri karo.

Sidaa daraaddeed erayga waxaa inta badan loo istecmaala waxyaala dhacay oo aan caadi ahayn. Waxaa kale oo aan fahmayna in abuurista eraygan lagu sheegayo uusan ahayn mid ay jiraan waxyaala jiray oo abuurista laga abuuraya. Ilaah wuxuu abuurayo kama abuurin wax sii jiray. 'Abuuris' micnaheedu waa 'hagaajinta la

hagaajinaya wax aanan laga hagaajinin wax horey u jiray'. Erayga waxaa loo istecmalaya wax kale oo ka gooni ah abuurista adduunyada. Waxaa kale oo loo istecmaalaya hawsha badbaadinta uu Ilaah na badbaadin ayo (2 Korintos 5:17). Noolol cuseb ayaa bilaabaneysa markuu qofka Ciise rumeysanayo.

***Samada iyo dhulka.*** Tani waa hab kale oo lagu macneynayo erayada 'wax kasta'. Markaad aragtid erayada isla socdaan sida 'samada iyo dhulka', waa hab ay Cibraaniyiinta ku macneyaan wax dhan. Tusaale kale erayada 'Daan iyo xataa Bi'ir Shebac' (Xaakinnada 20:1) waxey ka macna tahay 'Israa'iil oo dhan ka bilaabato Woqoyi ilaa Koofur'. Is barbar dhiggan labada shey oo aan is lahayn waa hab lagu macneynayo 'wax katoo jira wax ka maqanna ay jirin', samada waa waxa aan arkayno markaan cirka fiirino dhulkana waa waxa aan arkayno markaan hoos fiirino iyo wax alaate wixii u dhexeeya labadaas.

2. **Wax baridda Bilowgii 1:1**

Waxaan fahansannahay in jiritaanka Ilaah uu noqday mid sahal loo qaatay. Baybalka weligiis iskuma deyin inuu caddayn u yeelo jiritaanka Ilaah. Baniaadmiga oo dhan way ogyihiin inuu Ilaah jiro. Baybalka wuxuu ku bilaabanaya inuu Ilaah toos uga hadlo. '*Bilowgii Ilaah…*'.

Bilowgii 1:1 gacan ma siineyso fikiradda ah in waxyaalaha wax sii jiray laga hagaajiyey ay yihiin wax abadan jiri doona. Waxyaalaha uu adduunka ka sameysan yahay ma ahan wax weligood jiray. Waxyaalaha la taaban karo uu adduunka ka samaysan yahay ma ahan wax weligood jiray laakiin Ilaah baas aasaasay.

Waxey bareysa in Ilaah uu wax kasta ka hagaajiyey wax aanan horey u jirin. Wax alla waxa jira oo dhan Ilaah baa abuuray.

Fikiraddaan waxey baabi'ineysa tan kaloo la yidhaahdo *pantheism* oo ah in wax kasta ay Ilaah yihiin, oo aaminsan in adduunka uu karaamo leeyahay. Fikiradda pantheism waa mid been ah. Ma ahan inaan adduunyada caabudno. *'Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray…'*. Kala duwanaansho weyn ayaa u dhexeysa Ilaah iyo waxyaalaha uu adduunka ka samaysan yahay. Bilowgii Ilaah wuu jiray, laakiin samada iyo dhulka ma jiri jirin. Ilaah baa abuuray iyaga.

Ilaah waa filnaasho dhan. Waxaa jiray waa uu Ilaah wax kale haysan oo uu Isaga oo keliya ahaa. 24 *'Ilaaha sameeyey dunida iyo waxyaalaha ku jira oo dhanba, oo ah Rabbiga samada iyo dhulka, ma deggana macbudyo gacmo lagu sameeyey, 25 gacmo dadna looguma adeego sidii isagoo wax u baahan, maxaa yeelay. dhammaan isagaa siiya nolosha iyo neefta iyo wax walbaba'* (Faalimaha Rasuullada 17:24, 25).

Ilaah waxba uga ma baahno adduunyada kale Isaga ayaa isku filan. Isagu qofka wax kama fisho laakiin adduunayada oo dhan Isagay wax ka suganeysa.

3. **Sida balaaran e Bilowgii 1:1 loo eegi karo.** Aayaddan waxey na siineysa salddigga qaybaha kale e Baybalka. Tani waa salddigga wax alla wixii aan dooneyno inaan ka ogaano gefka, badbaadada, taarikhda, mustaqbalka.

Ilaah ayaa na abuuray. Madaama uu na abuuray, Isagaan addoomo u nahay xaq kastana wuu u leeyahay inuu na xukumo. Sababta uu gefka gef u yahay waa sababtoo ah Ilaah ayaa na uuntay. Xaq kastuu u leeyahay inuu adduunyada siduu rabba ku maamulo. Mid alla kii kan abuuray xiriir ka goosta wuxuu xiriir ka goostay kan wax kasta yaqaana oo wax alla wuxuu doono ku sameyn karo adduunyada uu abuuray.

Tani waa saldhiga awoodda uu Ilaah ku xukumaya adduunyada. Sababta uu Ilaah adduunyada u xukumaya waxey tahay Isaga ayaa abuuray marka horeba. Wuu ogyahay sida ay dunida ku shaqayn laheyd. Sharciyada caadiga ah e aan ku dhaqanno waa sharciyadiisa. Aayaddan waxey na siineysa asalka badbaadada. Badbaadada waa Ilaah oo wax ku sameynaya dunidiisa uu abuuray. Markay adduunyada Ilaah ku dembaabtay oo mugddiga gashay, Ilaah inaba

ma jaclaysan in ay sii baaba'do. Ilaah wuxuu badbaadinaya adduunyada uu bilowgi abuuray.

Aayaddaan waxey sheegeysa in Ilaah uu awood dhan u leeyahay inuu noolosheena wuxuu doono ku sameeyo. Bal ka waran mashiin aad leedahay oo halawday. Maxaad ku sameyneysa? Ugu dambeysta waxaa laga yaaba inaad tidhaahdid, 'aan ku celino kii sameeyey. Ku celi kan sameeyey!' laakiin isla sidaan ayey nala tahay annaguna. Ilaah ayaa na abuuray. Hase yeeshee, waan habaabnay. Ma jirtaa wax toosin ah? Haah, jawaabtu 'waa inaan ku noqona abuuraheena!' Isaga ayaa yaqaana sida aan ku shaqeyno. Wuu ogyahay waxa inoo wanaagsan. Wuu ogyahay waxyaalaha noo daran. Haddii aan dooneyno inaan si sax ah adduunkan ku noolaano waa inaan addeecno sida uu abuuraheena nala rabo, sida uu adduunyada ku abuuray, sida uu noo abuuray. Markuu Ilaah Ciise soo dirayey wuxuu adduunyadiisa u hagaajin ayey hab ay Isaga ugu soo noqon laheyd. Isla adduunyadii uu abuuray oo halawday ayuu doonaya inuu dib u cusbooneysiso (2 Korintos 5:17). Cusbooneysinta abuurka waa habkiisa si uusan u deyrinin abuurkii hore. Madaama uu Ilaah yahay abuuraha, wuu awooda inuu ahaado badbaadiye.

# Diyaarinta adduunya baniaadmiga u habboon

***Cutubka 2aad***

(Bilowgii 1:2-3)

Isla marka Bilowgii 1:1 laga baxo Baybalka wuu soo yaraanaya. Qaybaha kale oo dhan waxey xoogga saarayaan adduunyada. Luuqadda Cibraaniga waxey aad xoogga u saareysa erayga ‘dhul’ waxaana hadda lagu turjumi karaya ‘Dhulkuna – qaab ma lahayn’ (Bilowgii 1:2). Bilowgii diyaar uma ahan inuu wax nooga sheego waxyaalaha kale e adduunyada ku jira sida loogu sheegay Bilowgii 1:1. Ma jirto meel uu ilaa hadda nooga sheegayo wax ku saabsan malaa’igaha. Wuxuu xoogga saaraya qaybtan sbeeshelka ah oo ku saabsan – dhulka. Sawirkan dunida nagala tusay wuxuu u kala baxaya laba tallaabo. Tan ugu horeysa ‘waxyaalihii ugu muhimsanaa’ ayaa la hagaajiyey, laakiin taasi waxey dunida ka dhigtay mid aan qaab lahayn. Haddana waxaan arkaynaa Bilowgii 1:3-31 oo noo sheegeysa inuu Ilaah dhulka habeyey uuna qaab u yeelay.

Arinta muhimka ah e halkan ku jirta ayaa waxey tahay inuu Ilaah dunida u diyaarin ayey baniaadmiga. Aayadda 2aad kama sheekeyneyso dhibaato laakiin qaab darro ama eber ah, mana ahan laba shey oo iisu eg. Suurtagal ma ahan in aayadda labaad loo turjumo *‘dhulkuna **wuxuu noqday** mid aan qaab lahayn wuuna*

*madhnaa…'*. Luuqadda Cibraaniga macnahan wuu kala duwanaanaya. 'Wuxuu noqday' waa turjumaan aan caadi ahayn.

Macnaha guud e aayaddaan labaad ku jira ayaa wuxuu yahay in dunidu aheyd mid u baahneyd in qaab loo yeelo. Ujeeddada qaabayntana waxey aheyd mid loo diyaarin ayo jiinsiga baniaadmiga. '*dhulkuna qaab ma lahayn'* macnaheedu wuxuu ahaa dhulku lama hormarinin, wuxuu la mid ahaa sida waraaq aanan waxba lagu dhigin. '*Madhnaa'* macnaheedu waxey aheyd inuusan dhulku wax dad ah ku jirin. '*waayo, Rabbiga samooyinka uumay oo ah Ilaaha dhulka uumay, oo sameeyey, oo dhisay, oo aan si aan waxba tarayn u uumin, laakiinse u uumay in la degganaado wuxuu leeyahay, Anigaa Rabbiga ah mid kalena ma jiro.'* Qaab ma lahayn marka hore laakiin Ilaah ayaa ka shaqeyey oo ka dhigay mid lagu dhex noolyahay. Farriinta ku jirta Bilowgii 1:2 waa ineynan dunidu diyaar u ahayn in lagu dhex noolaado.

Bilowgii wuu sii socda '*…gudcurna moolkuu dul joogay oo Ruuxa Ilaah wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayay biyaha.'* Sawirka aan halkan ka heleyno waa mid dunida u sharaxayo mid ay biyo ka buuxeen. Runtii suurtagal uma ahayn inuu baniaadmi ku noolaado. Waxey aheyd mid aan la diyaarinin oo uu gudcur ka buuxay. Dadka waxey u baahan yihiin oo ay ku dul noolaan

karaan dhul engegan oo adag. Dadka waxey u baahan yihiin iftiin.

Arinta aayadda labaad ka jirta waxey saldhig u tahay Bilowgii 1:3-31 taa oo aan ka arki karno Ilaah oo adduunyada baniaadmiga u habeynaya. Bilowgii 1:3-31 waxey noqoneysa sheeko ku saabsan sida uu Ilaah dhulka u habeyey si ay baniaadmiga ugu noqoto meel uu ku noolaan karo. Cibraaniyada 2:5-6 ayaa sheegeysa marxaladdaas oo kale '*Waayo, dunida iman doonta oo aynu ka hadalno malaa'igaha kama uu hoosaysiin. Laakiin mid baa meesho ka maragfuray isagoo leh, Bal waa maxay dadku oo aad u xusuusataa isaga…?'* Dunida malaa'igaha iskama lahayn; waxaa iska lahaa jiinsiga baniaadmiga. Iftiinka waxaa u baahan baniaadmiga. Dhul engegan ayaa loo baahnaa bedelkii badaha. Waa inuu jiro roob. Wax roobka soo dhaliya waa in ay jiraan – cirka. Wax kasta waxaa lagu macnaynaya luuqad iyo erayo ay baniaadmiga fahmi karaan. Bilowgii 1:29 qudaarta waxaa qaas ahaan loogu talagalay baniaadmiga. Qoraxda iyo bisha waxaa loogu talagalay inuu baniaadmiga wakhtiga ku ogaado. Duunyada waxey aheyd inuu baniaadmiga ka faa'idaysto (Bilowgii 1:26) aad bayna baniaadmiga ugu ag noolyihiin (1:25-26). Qaybta ka hartay Bilowgii 2:1-3 waxey kala saaraysa sida uu baniaadmiga ugu noolaan lahaa daahirnaan.

Sidee bey ku hagaagtay arinta hagaajinta dunida si ay u noqoto mid baniaadmiga u habboon inuu ku noolaado? Ruuxa Qoduuska ah e Ilaah, ‘neefta’ Ilaah ayaa ku jirtay hagaajintaasi. Bilawga wuu sii socda: ‘*oo Ruuxa Ilaah wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayay biyaha’*. Ilaah wuxuu istecmaalay Ruuxiisa qoduuska ah si uu dunida uga dhigo meel uu baniaadmiga ku hooyan karo. Soo xigashada ugu horeysa e Ruuxa Qoduuska ah sida aan Kitaabka uga akhrineyno waxey na siin aysa fikiradda waxa uu Ruuxa Qoduuska ah mar kasta sameeyo. Waa Isaga kan noolosha laga helo, waa Isaga kan habbaynaya toosin ayana noolosheena. Waa Isaga kan habbaynaya uunka oo dhan, waa adeegaha loo adeegsaday aasaaska abuurista uunka oo dhan. Wuxuu ahaa sida shimbir ku dul buubeysa buulkeeda, oo sugeysa in ay ukumaheeda buqaan oo ay noolol ka soo baxdo.

Qurxinta iyo habbeynta uunkana waxey ku noqdeen hadalka Ilaah. ‘*Ilaahna wuxuu yidhi, iftiin ha ahaado: Iftiin baana ahaaday.’* Uunka oo dhan wuxuu ku noqday hadalka Ilaah. Wuu hadlaa waxna way noqdaan. ‘*Samooyinka waxaa lagu sameeyey Rabbiga eraygiisa, oo guutooyinkooda oo dhanna waxaa lagu uumay neefta afkiisa’ (Sabuurrada 33:6).*

Waa wax la yaab leh oo badbaadadana isla sidaa ayey ku noqotay sida aan arkaynaba. Marka ugu horeysa uu Ilaah noo yimaaday wuxuu arkay

noolosheena oo eber ah oo aan wax rajo ah lahayn. Bacdigeedna wuxuu ka shaqeyey noolosheena. Ruuxan Ilaah ayaa nagu dul socda. Eraygiisa ayaa noo imaanaya. Tani ma ahan uun sharaxaad laga bixinaya shaqada ruuxiyanka laakiin waa sida ay wax u jiraan waayo, Bawlos wuxuu leeyahay, '*Waayo, waa Ilaah kan yidhi, "Iftiin ha ka ifo gudcur", kan qalbiyadeenna uga ifay inuu iftiinka aqoonta ammaanta Ilaah inaga siiyo Ciise Masiix wejigiisa'* (2 Korintos 4:6).

Sida uu Ilaah uga shaqeeyey uunka iyo badbaadaduba way iisu egyihiin. Badbaadada waa dib u soo celintiisa uunka habaabay, Isagoo istecmaalaya isla sida uu ku uumay uunka. Ilaah wuxuu noogu yimid qalbiyadeena eberka ah oo aan wax rajo ah laheyn. Wuxuu noogu dhex yimid gudcurka sharka, waan maydhnayn oo wax Ilaahnima ah naguma jirin wax rajo ahna ma aanan lahayn. Eraygiisa wax uuma ayaa noolol na siiyey. Hadduu qof Masiixa ku jiro waa uun cuseb, wuxuuna noqonaya uun cuseb sida ku dhigan 2 Korintos 5:17. Isla habkii uu wax kasta wax aanan jirin uga uumay ayuu badabaadaduna nagu siinaya. '…*Kan nooleeya kuwii dhintay oo u yeedha waxyaalaha aan jirin sida iyagoo jira'* (Rooma 4:17). Ilaah wuxuu ku shaqeya Ruuxiisa Qoduuska ah. Isla wixii uu horey u sameeyey ayuu kumaan hab oo cuseb ku samayn kara. Haddal oo keliya ayuu ku hadlaya oo ma jiraan wax aan amarkiisa qaadan doonin oo aan noqon doonin. Iftiinada waxey noqdeen mugdiyo, meel

aanay waxba ku jirinna wuxuu ka dhigaya in ay rajo lahaato. Ilaah wuu ficiltamay. Markuu ficil sameeyo cusbboonaan ayaa dhallaneysa, iftiin ayaa dhallanaya, iyo weliba waxaa aasaasmaya dhul adag – habbab badan ayey wax ku noqonayaan.

# Sharafta Ilaah e uunka ku jirta

***Cutubka 3aad***

(Bilowgii 1:3-31)

Qaybtan Bilowgii 1:3-31 waxey sharaxeysa sida uu Ilaah lix maalmood adduunka u uumay una habeeyey. Ma ahan waxyaalaha sida adduunka loo uumay ku saabsan ma ahan sheeko baraalay. Waa dhacdo dhab ah. Abbuurista uunka waa shey uu Axdiga cuseb aad u rumeynayo (Cibraaniyada 11:3; 2 Butros 3:5; 2 Korinthians 4:6; Faalimaha Rasuullada 17:2:4). Waxyaalahan ma ahan gabay. Kuma jiraan waxyaala badan oo hab gabay loo sharaxay.

Maalmaha la uumay maalinta kowaad ilaa tan saddexaad waxey ahayeen intaanan qoraxda la uumin ka hore, tanna waxey noo macneyneysaa inaan helno sawirka sida saddexdaas maalmood ay u ekayeen. Yooxanaa 5:17 iyo Cibraaniyada 4:10-11 waxey noo sheegayaan in ay maalinta toddobaad weli socotay, marka waxey u egtahay in maalinta toddobaad ay jirtay 24 saacadood! Bilowgii 2aadna wuxuu noo sheegaya sheeko dhan oo ku saabsan uumista baniaadmiga. Qaybtan cutubka labaad waxey sheekada u sheegeysa hab loo malayn karo in waxyaalaha cutubka 1aad ka dheceen ay yihiin waxyaala iska sheeko ah oo aan dhicin. Waxyaalaha maalinta lixaad dheceen sida aan uga arkayno Cutubka labaad waxey u egtahay in ay maalin ka badan qaadatay dhameystirkooda. Bilowgii 1:30 waxey na siineysa Ilaahiyannimo ka dhex shaqeynayso

waxyaalaha aan muucjisada ahayn. Waxyaalahan oo dhan waxey nagu baraarujin ayaan inaanan maalmaha halkan laga sheegaya u qaadanin maalmaha aan naqaana e ku dhamaada afar iyo labaatanka (24aad)saacadood.

Qaar ayaa jiraan sida ninka la odhan jiray 'Auliyo Augustine' wuxuu maalmaha Bilawgi laga sheegaya ku macneyey in ay yihiin sanadooyin. Qaarna waxey aaminsanyihiin in ay maalmaha yihiin kuwa caadiga ah e aan naqaanno laakiin uu wakhti u dhexeeyey. Qaarna waxey qabaan in maalmahan ay yihiin maalmaha ay muujinta dhacday e ma ahan maalmaha ay uumista dhaceysay. Waxey ahaayeen maalmaha uu Ilaah Muuse kula hadlay wixii dhacay (laakiin haba yaraate e ma jiraan wax buuggan ku jira oo fikiraddaan xoojin ayo, markii la eego Baxniintii 20:11 way ka soo horjeedda fikiraddan).

Ujeeddadeyda waa inaan barro waxyaalaha uu Bilowgii na barayo e ma ahan inaan is barbardhigno waxyaalaha Bilowgii iyo saayniska. Waan ku raacsannahay ninka John Calvin la yidhaahdo markuu leeyahay, 'qofkii doonayo inuu barto wax  xiddigaha ku saabsan ama aqoomaha kale ha raadsado meela kale uu ku soo barto!'

Bilowgii wuxuu noo sharaxaya dhacdooyin dhaceen laakiin wuxuu istecmaalaya erayo noolol maalmeedka baniaadmiga ku jira oo la fahmi

karo. Aad baa loo sahalsiiyey oo xataa carruurta ayaa fahmi kartaa oo dad badanna way fahmeen. Sheekadan waxey Ilaah la barbardhigtay sida qof shaqaala ah, habka aan ku shaqayn lahayn (Baxniintii 20:11). Waxey u egtahay inuu Ilaah adduunyada ku uumay lix wakhti oo kala duwanaa waxaanna noogula sharaxay Ilaah oo u shaqaynaya sida qof shaqaala ah.

Ma ahan in ay 100% tahay maalmo isku xiggay. Waxaan arkayna qoraagga oo wax kasta sida ay iskuugu egyihiin iskuugu xiriirinaya laakiin ma ahan in ay aheyd sida ay maalmaha la uumay iskuugu xigeen. Xiddigaha waxaa laga sheegaya meela ku habboon, laakiin taarikhda la abbuuray kama saari karno Bilowgii. Ma ahan inaan ka welwelno isku dhaca ay dadka saayniska sheegayaan. Waxyaalah uunka Ilaah looguma tallagelin in loogu fikiro sida uu saayniska wax ku macnayo. Bal eeg Bilowgii 1:1-31 hab la yaab leh ayaa loo habayay.

Waxoo dhan (Bilowgii 1:1-2)

| | |
|---|---|
| **Maalinta 1aad: Iftiin (1:3-5).** | **Maalinta 4aad: Waxyaalaha iftiinka dhalliya (1:14-19)** |
| **Maalinta 2aad: Qaybinta biyaha (1:6-8).** | Maalinta 5aad: Shimbiraha iyo waxyaalaha badda ku nool (1:20-23) |
| **Maalinta 3aad: Dhulka iyo biyaha (1:9-10); cagaarada (1:11-13).** | Maalinta 6aad: Xayawaanada dhulka ku nool iyo kuwa biyaha iyo dhulkaba ku noolan karaan (1:24-25); baniaadmi (1:26-31). |

Waxyaalaha kale (2:1-4)

Ilaah nooguma tallagelin inaan waxyaalaha Bilowgii ku jiraan aan la barbardhigo ama aan saayniska ku fahamno. Bilowgii 1 waa sida muujin. Waxaa lagayaaba in ay tahay laakiin ma ahan wax aan hubno – qof ayaa lo o muujiyey waxyaalahaani. Arintoo dhan dhinac baan uga dhacaynaa haddii aan isku deyno inaan sida kuwa xiddiga baaro ahaan ku fasirno buugga Bilowgii. Runtii habka wakhtiga oo Bilowgii lagu qoray ma ahan mid loogu tallagalay in Saaynisk ahaan lagu fikiro.

Bilowgii 1:3-31 waa hab la yaableh oo sharafta Ilaah lagu muujinaya. Bal aan isku deyo inaan caddeeyo waxyaalaha aayadahan ku jira.

1. **Ilaaheena na uuntay waa Ilaaha keliya.** Waxyaalaha kale oo dhan Isagaa uumay. Ilaah wuxuu uumay samada iyo dhulka. Dadkii hore waxyaalaha cutubkan ku jira oo dhan waxey u xilsareen inuu Ilaah iska leeyahay. Waxaa jiray waxyaalah Ilaah cadaw ku noqday, haadees wuxuu ahaa cadawga Ilaah, meela kalena waxaa laga sheegaya in iftiinka iyo gudcurka ay ilaahyo ahaayeen. Meela kalena waxaa laga sheegaya in ay badda ilaah aheyd. Hase yeeshee, waa Ilaah ka uumay badda oo ka soocay dhulka engegan oo weliba ilaahya badan ayaa jiri jireen oo loo istecmaali jiray xagga dhalmada sida taarikhda dadkii hore aan uga akhrin ayno. Laakiin Ilaaha adduunyada uumay ayaa ah kan xataa dhalmada ku shaqa leh (eg Bilowgii 1:22) Kuwa dadkii hore ka mid ah waxey caabudi jireen qoraxda, ama bisha amaba xiddigaha. Kuwa tacliinta xiddigaha barta ayaa jira oo ilaa maantadan aaminsan in ay xiddigaha garasho ke helayaan! Laakiin waxyaalahan oo dhan Ilaah ayaa wada uumay. Ma jiraan ilaahyo; waxyaalahaas oo dhan waa wax uu Ilaah uumay. Quruuma badan ayaa jiraan oo xayawaanada u haysta in ay ilaahyahooda yihiin. Qaar ayaa jiraan oo lo'da ama dibida amaba xayawaanada kale caabuday (eeg Rooma 1:22, 23). Taarikhda Bilowgii 1 ku jirta way iska saartay xaalad kastoo Ilaah wax kale lagu qaldami karo.

2. **Umaha keliya waa Ilaah.** Luuqadda Cibraaniga waxyaala lays barbardhigay waxey macnaynayaa

wax idil oo aan jirin wax ka maqan: iftiin iyo gudcur; dhulka iyo badda; biyaha cirka korkiisa iyo cirka hoostiisaba; qoraxda iyo bisha; qashinka iyo geedaha. Ma jiraan wax uunka ka tirsan oo is uumay. Wax kastaba waxey ka yimideen xagga Ilaah. Waa Isaga oo keliya kan weligiis jiray jirana. Uumaha ayaa ah Ilaaha keliya; Isaga oo keliya ayaa ah kan wax uumay.

**3. Uunka wuu wanaagsan yahay.** Cutubka wuxuu noo sheegaya wanaagga uunka Ilaah. Marar badan ayaa lagu soo celcelinaya sida uu uunka u wanaagsan yahay (Bilowgii 1:4, 10,12, 18, 21, 25, 31). Meel kastoo uu sharka ka yimidba, kama uusan mid ahayn waxyaalihii uu Ilaah marka hore uumay. Waa uun inuu ahaa wax wanaagsan oo qaloocmay. Kuwa filosofiyiinta ka mid ah waxey aaminsan yihiin in waxyaalaha ay wax ka samaysan yihiin oo dhan ay shar yihiin; macnaha waxyaalaha aan u jeedno oo addunyada laga hagaajiyey waa yara shar oo waa uun waxyaalaha ruuxiyanka waxa aanan sharka ahayn. Maraha qaarkood waxaa dhacday in Kiniisadda laga mid dhigo waxyaalaha fasiraaddaas aan alla aaminka lahayn lagu hoos magacaabay. Fikiraddaan waxaala badan ayay Kiniisadda ka dhex dhalisay oo ay ka mid yihiin in ay jiraan kuwa iska xiro guurka oo doonaya in ay guur la’aan Ilaah ugu adeegaan (1 Timoteyos 4). Laakiin gefku kuma jiro waxyaalaha la taaban karo; lala ma soo aasaasin uunka kale.

**4. Uunka wuxuu noo muujinaya xigmadda Ilaah iyo inuu Ilaah dan ka lahaa uunka.**

Uunka waxaa loo uumay dumarka iyo ragga. Iftiinka waxaa u baahan baniaadmiga. Dadka waxey u baahan yihiin in ay kala ogadaan wakhtiyada iyo cimilada. Qoraxda iyo bisha waxaa loo uumay in ay baniaadmiga xagaas ka caawiyaan. Baniaadmigu wuxuu u baahan yahay roob, dhul iyo cunto. Wax kasta baniaadmigaa loo uumay inuu ku dhaqmo.

Madaama uu uunka xagga Ilaah ka yimid, adduunyada waa laysku halayn kara. Maalinta iyo habbeenka sid caadi ah ayay u shaqaynayaan. Wax kastaba si taxadir leh oo habaysan ayay ku shaqaynayaan. Cimilada ayaan ku ogaan karnaa in ay wax kastaba habaysan yihiin. Waxyaalahan ayaa saayniska saldhig u ah. Geedaha iyo xayawaanaduba wakhtiyadooda ayay isku dhallaan**.** Waxyaalahan ayaa saldhig u ah sharciga beeraha iyo dhallinta xayawaanada. Bal ka waran haddii aanay xayawaanadu wakhtiyadooda ku dhalli lahayn.

Uunka waxaan ka arkaynaa waxyaala badan oo kala duwan. Xayawaanada dhexdooda, noolosha cagaarka, dadka dhexdiisa, si kastoo loo eegaba waxaa jirta kala duwanaansho farabadan. Ma jiro qof baniaadmig ah oo boqolkiiba boqol mid kale u eg. Ma jiro geed boqolkiiba boqol geed kale u eg. Marxalad kastaba waxaad arkaysaa mid yar

iyo mid weyn. Kalluunka baddaa loo uumay, shimbirahana in ay hawada dhex duullaan, xayawaanada noocyada kalena waxaa loo uumay in ay dhulka engegan ku noolladaan. Waa yaab noocyada iyo habka la yaabka leh uu Ilaah wax u uumay.

Qurux ayaa ku jirta uunka Ilaah. Ilaah waa sawiraha ugu weyn. Ilaah naftiisa ayaa ka helaa quruxsanaanta uunkiisa (Sabuurrada 104; Maahmaayadii 3:19; 8:22).

**5. Uunka Ilaah wuxuu noo muujinaya dabeecadda Ilaah iyo inuu Ilaah nimcoola yahay.** Tan waxey na siin aysa sawir ah inuu Ilaah yahay qof; Ilaah waa 'Isaga' e ma ahan 'wax'. Waxey na tusin aysa jacaylka uu Ilaah baniaadmiga u qabo. Wax kastoo la uumay waxaa loo uumay jiiniyadda baniaadmiga e ma ahan malaa'igaha, oo waxyaalahan oo dhan waxey na tusin ayaan nimcada Ilaah. Runtii Ilaah kuma uusan qasbanayn inuu waxyaalahan oo dhan sameeyo. Isagu nooma baahno sida aan annagu Isaga ugu baahannahay (Falimaha Rasuullada 17:24, 25). Waxyaalahan oo dhan waxey na tusayaan sida uu Ilaah awooddiisa jacaylka ugu shaqaynaya. Waxyaalahan oo dhan waxey ku noqdeen doonistiisa. Wuxuu yidhi, '*Ha noqoto…*' sidaasayna ahaatay. Erayga '*sidaasayna ahaatay'* ayaa dhex socota cutubkan (1:3, 7, 9, 11, 15, 24, 30).

Haddaba sidee baan ku macnayn karnaa uunka Ilaah? Masiixi kasta waa inuu ku farxaa kuna rayraya uunka Ilaah. Haddii ay kuwa aan Ilaah aqoonsanayn uunkiisa caabudayaan, annagga Ilaah naqaana waa inaan Ilaah ku caabudna shaqada la yaabka leh uu sameeyey. Waa aasaaska xigmadda inaan aqoonsano uunka Ilaah. Xigmadda nebi Suleyman waxey ka soo dhallatay uunka Ilaah uu fiiriyey uuna la yaabay qurxda uunka Ilaah ka muuqata (Boqoradii 1aad 4:33). Suleymaan aad buu xigmadda u badsatay markuu awoodda Ilaah ka aqoonsaday uunkiisa (eeg Maahmaahyadii 1:27; 5:17; 6:5, 6-11). Wuxuu dersi ka bartay xataa waxyaalaha uunka ugu yar oo ay ka mid tahay quraanjada (Maahmaahyadii 7:22, 23; 25:13; 26:1-3, 9, 11; 27:8; 28:1, 15; 30:15, 19, 31). Waa inaan nimcaysannaa oo aan sharafnaa Ilaaha wax kasta uumay. Samooyinka ayaa caddaynayaan sharafta Ilaah.

# Aragga Ilaah

***Cutubka 4aad***

(Bilowgii 1:26-27)

Bilowgii 1:26 Sheekada way tartiibsan tahay. Wax kastoo ku jira Bilowgii cutubka 1aad halkaanay ku soo hoobanayaan sheekaduna waxey noqonaysa mid aanay degdegsiinyo ku jirin oo waxyaala waweyn oo fara badan taabanaysa. Waxaa noo muuqata in markii baniaadmiga la uumayay oo keliya aan maqlayno wax ku saabsan lataliyaasha Ilaah. Tan waxey caddaynaysaa in Ilaah uu dan ka weyn tan uu uunka kale ka lahaa uu baniaadmiga ka leeyahay.

**Bacdigeedna Ilaah wuxuu yidhi, *'Aan nin inoo eg ka samayno araggeenna'*** (Bilowgii 1:26)**.** Waa maxay 'Aragga Ilaah'? Da' kasta waxey isku deyeysa in ay fikiraddeeda ku tafsiirto 'Aragga Ilaah'. Qarnigii 5aad waxaa jiray mid ka mid ah 'aabbayaasha Kiniisadda' oo la odhan jiray Athanasius kaa oo aad u xiisaynayay fikiradda ah inuu Ciise yahay 'Logos' (Erayga, aqliga baniaadmiga). Wuxuu yidhi aragtida Ilaah waa awooddeena aan ku fikirayno. Augustine mid la odhan jirayna wuxuu aad xoogga u saarayay fikiradda saddexnimada Ilaah sida, Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Qoduuska ah. Wuxuu yidhi, aragga Ilaah waa 'saddexnimada' baniaadmiga ku jirta taa oo ay ka mid yihiin, xusuusta, kalgacal iyo doonis. Qarnigii 16aad kuwa uu Ilaah u adeegsaday in ay Kiniisadda isbedel ka dhalliyaan waxey aaminsanayeen in uu

qofka ku xaq ku noqon karo iimaan oo keliya. Waxey leeyihiin aragga Ilaah wuxuu ahaa xaqnimada baniaadmiga intuusan Aadan gefka gelin. Wakhtigii indhafurka oo loo yaqaanay *'enlightenment'*, waxey aheyd wakhti taarikhda Yurub si qaas ah looga eegayay awoodda baniaadmiga. Dadka mutacalamiinta ahaa waxey aamineen in 'aragga Ilaah' uu ahaa indhafurka ay baniaadmiga helleen. Nin la yidhaahdo Karl Barth, oo ka midka ahaa kuwa tacliinta Baybalka ku dheereya waagi qarniga 20aad, wuxuu noolaa wakhti uu isdhaxgalka dadka  ahaa mid aad loo xiisaynayay. Wuxuuna aragga Ilaah ku macnayay inuu yahay xiriirka u dhexeeya dumarka iyo ragga. Da' kasta waxey 'aragga' ku tafsiiraysa habka arimaha ay ku dhaqmayaan gacan siin aysa!

Nus qarni oo la soo dhaafay ayuu nin mutacalamiin ah gebagebayay arinta fikiradaha ku saabsan aragga Ilaah. Fikiradaha oo dhan wuxuu u kala bixiyey afar qaybbood.

a) Qollo waxey aaminsantahay in aragga Ilaah uu yahay noolol xaqnimo oo qof ku jirta, sida qofka oo dareenkiisa og, fahamka noolosha weligeed ah, habka fikirka oo cabiran, dabeecadda, xayinimo.

b) Waxaa jirtay qollo kale oo iyaduna u haysatay in aragga Ilaah uu yahay xiriirka uu Ilaah la leeyahay uunkiisa.

c) Qolloda saddexaad waxey iyaduna xoogga saaraysa in aragga Ilaah uu yahay xiriirka Ilaah toos loola leeyahay.

d) Qolloda afraad waxey xoogga saaraysa in aragga Ilaah uu yahay xagga muuqaalka.

Waxaa iska cad in arinta ku saabsan aragga Ilaah ay tahay mid fikirado fara badan laga haysto. Haddaba sidee baan arintaan ku xalin karnaa? Waxaan soo jeedin lahaa inaan afar hab uga hor tagno:

- Waa inaan tixgelino Axdiga Cuseb inaan la akhrino tafsiraaddeena Bilowgii 1:26, 27.
- Waa inaanan ilawbin inaan tixgelino macnaynta Ilaah loogu macnayay Bilowgii 1:1-24.
- Waa inaan erayada Bilowgii 1:26-27 si taxadir leh u qaadano.
- Ugu dambaysta waa inaan tixgelino sida aragtida looga istecmaali jiray dhaqamada waayaha qoraalka la suubin ayay jiray.

1. **Sida ugu habboon oo aan aragga Ilaah ku tixgelin karno waa uun annagoo is xusuusiya sida arintan looga istecmaalaya Axdiga Cuseb.** Markaan eegno aayadaha Axdiga Cuseb, sidee bey ku macnaynayaan aragga Ilaah? Haddii aan ku macnayno sida ku dhigan Axdiga Cuseb, aragga Ilaah waa aqoonta dhabta ah oo Ilaah laga leeyahay; waa xaqnimo iyo qoduusnimo. Tani waa arinta ku dhigan Kolosay 3:10 iyo Efesos 4:24. Waa aqiiddada ku saabsan

xiriirka uu shaqsiga Ilaah la leeyahay. Yacquub 3:9-10 (Isagoo soo qabsanaya Bilowgii 9:6) wuxuu gefka qof kale laga galo ku macnaynaya kan ugu xun maxaa yeelay, waxey wax u dhimaysaa aragga Ilaah. Rooma 8:29 waxey sheegeysaa in ay Masixiinta ay u wejahan yihiin in ay aragga Masiixa lahadaan. 2 Korintos 3:18 waxey sheegeysa in isla sida aan Ilaah Ciise Masiix ugu aqoonsanayno aan ku sii bedelmayno oo aan marba wakhtigii ku xigga aan Ciise u sii ekaanayno. Rooma 12:1-2 ayaa sheegeysa wax tan la mid ah. Isla sidaana, sida aan uga akhrisanayno Axdiga Cuseb, aragga Ilaah waa awoodda loo leeyahay in la xukumo adduunka Ilaah. Waa sababtaas waxa uu 1 Korintos cutubka 11aad oo haysa hab kastoo amar ah, uu uga hadlaya arinta aragga Ilaah.

2. **Sida kaloo aan ku tixgelin karno aragga Ilaah waa annagoo xusuusanna sida Ilaah looga macnayay Bilowgii 1:1-25.** Markuu Bilowgii 1:26 ka hadlaya aragga Ilaah, runtii wuu ka soo hadlayay Ilaah labbaatan iyo shanta kale e aayadaha. Waa yahay e waa maxay sheyga looga soo hadlayay aayadaha 1-25aad taa oo run ah markii loo kaco xagga Ilaah oona ah dabeecadaha dumarka iyo ragga?

Bilowgii cutubka 1aad, Ilaah go’aankiisuu gaara. Wuxuu go’aan ka gaaraya waxyaalaha uunka oo dhan. Fikiradahiisa ayuu ku shaqaynaya. Ilaah horay ayuu uga fiirsaday wax alla wuxuu samaynaya oo dhan. Baniaadmiga

dabeecaddiisana waxyaalahan waa laga helaya. Ragga iyo dumarkuba intaanay wax samaynin wey ka fiirsadaan natiijada. Dadku way isdhex galaan oo way wada tashtaan. Dadku way leeyahay awood ay fikirad ku dhiibtaan oo ay isku wargeliyaan waxyaalaha ay go’aansadeen. Way awoodaan in ay xiriir shaqsiyan ah lahadaan. Ragga iyo dumarka way awoodaa in ay tixgeliyaan adduunyada ku wareegsan. Ilaah magac buu wada siiyey wax kastoo uu uumay. Bilowgii 2:20 Aadan ayaa waxyaala magacaabaya. Ragga iyo dumarka waa aragga Ilaah wayna awoodaan in ay fikiraan oo ay arimaha si dheraad ah uga fiirsadaan.

Bilowgii 1aad, waxaan arkayna in Ilaah uu yahay daahir iyo weliba xaq. Waxyaala wanaagsan ayuu uuma. Waxyaalaha ka tirsan aragga Ilaah waa wanaaggii hore uu baniaadmiga ku uumay (eeg Kolosay 3:10; Efesos 4:24). Qoduusnimada iyo xaqnimada waa wax ka mid ah aragga Ilaah. Ilaah wuxuu weligiis ahaa qoduus iyo weliba xaq. Markuu uumay dumarka iyo ragga wuxuu uumay dad haddii si loo eego isla sida uu Ilaah ahaa ah. Waxey ahaayeen uun wanaagsan. Bilowgii 1aad waxaan ka arkaynaa inuu Ilaah yahay xukumaha iyo boqorka. Sababta dadka loo uumay waxey aheyd in ay iyaguna ka qayb qataan aragga Ilaah ama wax alla wixii ka mid ah aragga Ilaah. Bilowgii 1:28 ayaa ku xigta Bilowgii 1:25, 26. Xukumidda uunka waa amarka la siiyey baniaadmiga (eeg Sabuurrada

8:6). Tani ma ahan micnaha inuu baniaadmiga ku xadgudbo amarkaas la siiyey oo uu uunka si xun ula dhaqmo. Haddaan Baybalka ka eegno ‘xukumidda’ iyo ‘adhijirka’ aad bey iskuugu macna dhawyihiin. Baniaadmiga waa inuu uunka u xukuma isagoo ah adhijir aamin ah.

Bilowgii 1aad waxaan aragnay inuu Ilaah yahay uumaha. Isla sidaasna wax wanaagsan samaynta waa dabeecadda baniaadmiga. Baniaadmiga waa inuu dhurtaa awoodda caadiga ah uu Ilaah bixiyo. Baniaadmigu waxey leeyihiin awood ay sida ay doonaan u istecmalaan oo ay u qurxiyaan waxyaala adduunka Ilaah ku jira. Aragtida sharafta Ilaah oo ku jirta Bilowgii 1:1-25 iyo weliba 1:28-2:3 waxey na tusin ayaan waxa laga wado markii la leeyahay baniaadmigu waxey leeyihiin u ekaanta Ilaah, taa oo lagu uumay aragga Ilaah.

Dumarka iyo raggu waa sida Ilaah oo xaq bey u leeyihiin in ay iyaguna ‘*nastaan*’, laakiin tan waxaan kaga hadli doonnaa mawduuca dambe.

# Wakiil u noqoshada Ilaah

***Cutubka 5aad***

Bilowgii 1:26-31)

3. **Waa inaan qumaati u baranaa Bilowgii 1:26 inta aan awoodno oo dhan.** Ilaah wuxuu leeyahay, '***Aan nin inoo eg ka samayno araggeenna'.*** Midda ugu horaysa waa inaanan ka hadlin in ay baniaadmigu 'ku jiraan' aragga Ilaah. Ilaah wuxuu baniaadmiga u uumay 'sida' araggiisa.[1] Tani waa muhim. Waa qofka oo dhan kan ah aragga Ilaah. Ma ahan in ay dumarka iyo ragga wax 'ku jiraan'. Waxey xoogga saaraysa waxa ay **yihiin**. Iyagu waa aragga Ilaah.

Erayga 'aragga' waxaa ka tirsan xataa 'muuqaalka' jidhka. Waxey u ekaan kartaa mid aanan la qaadan karin inaan nidhaahno dumarka iyo ragga waxey leeyahihiin muuqaalka Ilaah! Laakiin erayga 'aragga' waxaa kale uu macnaynaya muqaal! Erayga 'aragga' wuxuu leeyahay macna ah wax nafas buuxinaya markii loo kaco sida looga istecmaali jiray xagga Axdiga Hore waxaana ku jirta macnaha ah wax muuqaal leh oo ay isha arki karto..

Waan ognahay '*Ilaah waa Ruux*'. Isagu ma qabo jidh; Isagu il laguma arki karo lamana taaban karo. Hase ahaatee, waan ognahay in ay jireen

[1] Waxey istecmaalaysa shey ay mutaclamiinta Baybalka ugu yereen ***beth essentiae,*** waa hadal macnaynaya erayga 'sida'.

marar uu Ilaah nagula yimid hab muuqaal leh. Isgaa sababayay inuu ku muuqdo wax Isaga metelaya inaan aragno. Ma ahan in ay dadku Ilaah arkayeen, laakiin waxey arkayeen wax Ilaah metelaya. Markuu Ilaah tan yeelay uu muuqday, waayihii Axdiga Hore, mar kastaba wuxuu qaadanayay muuqaalka dadka eeg Xaakiinada 13:21, 22; Yexesqeel 1:26, 28). Markuu Baybalka leeyahay baniaadmiga waa muuqaalka Ilaah macnaha kale e ku jira waa xataa jidhka baniaadmiga. ‘Aragga’ waa muqaal. Ilaah ma lahan jidh (eeg Sharciga Kunoqoshadiisa 4:12; Ishacyaah 40:18) laakiin waxaa jira muuqaal Ilaah lagu macnayn karo (Yexesqeel 1:26). ‘Muuqaalkeena’ waa ‘muuqaalka’ ugu horayay uu Ilaah na siiyey. Ma ahan macnaha inuu Ilaah jidh leeyahay, laakiin waxey arintaan noo sheegeysaa inuu jiray uu Ilaah doortay inuu istecmaalo. Qofka oo dhan waa aragga Ilaah; xataa jidhka qofka waa aragga Ilaah!

Bilowgii 1:26 waxey ka hadlaysaa in baniaadmigu uu yahay aragga Ilaah. Kama hadlayso in qayb ka tirsan baniaadmiga ay tahay aragga Ilaah. Kamana hadlayso in nafta ay tahay tan haysata aragga Ilaah. Oo weliba aragga Ilaah ma ahan ‘weligeed noolaansada nafta’.

4. **Xusuuso sida ay dadkii hore u istecmaali jireen ‘aragga’.** Sida ay dadka qalbeeka u dhaw ku fikiri jireen waxey aheyd in aragga uu ahaan jiray metelidda boqor ama ilaah.

Waxaa jiri jirtay inuu boqor hagaajisto sanam uuna dhexdhigo macbudka si uu isaga u metelo ama ay u noqoto inuu weligiisba macbudka joogo uu ilaah caabudaya in kastoo uu jidh ahaan maqanyahay. Maraha qaarkood waxaa loo malayn jiray inuu sanamka boqorka yahay aragga nool e ilaaha uu boqorka caabudaya. Fikirkaan aad buu caan uga ahaan kuwa ugu horayay e akhriyey Bilowgii. Halkan waxa annaga noo muhimka ah waxey tahay naan nahay kuwa Ilaah wakiilo u ah, waxaan nahay araggiisa nool e adduunyada u jooga. Bal haddana aan u guda galno wax baridda noogula talagalay e ku jirta mawduucan 'aragga Ilaah' ama macnaha uu noo leeyahay maanta.

**Waxey nagu caawin aysaa inaan fahanno amarka labaad.** Sababta reer binu Israa'iil looga mamnuucay in ay sanam samaystaan waxey ahay in ay ogadaan inuu jiinsiga baniaadmigu uu yahay aragga Ilaah e adduunyada jooga.

**Waxey na fahansin aysa gefka wuxuu yahay.** Gefka waa ka leexashada sharafta Ilaah. Waa burburinta xaqnimadii hore uu Ilaah ku uumay jiinsiga baniaadmiga. Markuu baniaadmiga gefay araggii wuu burburay. Baniaadmigii cusbaa wuxuu yeeshay aragga Aadan bedelkii kii Ilaah (Bilowgii 5:3). Haba ahaatee, aragga Ilaah oo dhan kama lumin (eeg Yacquub 3:9 taa oo sheegeysa inuu baniaadmiga weli yahay aragga Ilaah).

**Waxey nagu caawin aysaa inaan ogaano sababta ay noolosha wax barakaysan u tahay.** Madaama uu baniaadmiga aragga Ilaah yahay dilka wuxuu noqonaya dembi aad u xun (eeg Bilowgii 9:6). Edbin culus ayaa lagu edbin jiray qofka dil geysta.

**Waa inaan xusuusanaa in ay dumarka iyo ragguba ay aragga Ilaah yihiin.** Bilowgii wuxuu leeyahay *'ha xukumeen…'*. Dhulka waxaa loo xilsaaray baniaadmiga inuu dhaqaleeyo. Bilowgii 1:28 waxey ka waramaysa lab iyo dhadigba (in kastoo ay 1 Korintos 11 leedahay waxyaalaha amarka ku saabsan wax kasta waxey ku hoos shaqaynayan aragga ninka).

**Ciise ayaa ah aragga asliga ah e Ilaah.** Isaga oo keliya ayaa ah ninka daahirka ah. Isagu waxba kama dhinno oo si dhan buu aragga Ilaah u yahay (eeg Yooxanaa 12:45; 14:9; 2 Korintos 4:4; Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3).

**Mar unbaa imaan doontaa oo aragga dhabta ah lagu soo celin doona baniaadmiga.** Baniaadmiga waa lagu soo celin doonaa aragga dhan e Ilaah (eeg 1 Korintos 15:49). Wuxuu lahaan doonaan amar aan laga saraynin. Farinta Sabuurrada 8aad way noqon doontaa. Oo weliba 1 Korintos 6:3aadna farinteeda way buuxsami doontaa.

Hadda ayay bilaabanaysaa. Baniaadmiga waa inuu ahaado aragga dhabta ah e Ilaah. Ilaah waa la suurtagal inuu baniaadmiga ka dhigo uun dib loo cusboonaysiyey. Habka aan mar labaad ku

noqonayno kuwa Ilaah wakiil u ah wuxuu bilaabanaya markaan jaalnimo la bilowna Ciise Masiix (2 Korintos 3:18). Si tallaaba tallaaba ah ayaan sida Ciise u noqonayna.

Kaddib markuu noo sheegay aragga Ilaah (Bilowgii 1:26), Bilowgii 1:28-31 wuxuu noo sii sheegaya sida baniaadmiga loo siiyey amarka ay ku tarmaan waxna ku xukumaan (1:28). Cunto waa la siiyey (1:29; hilibna gadaal dambe ayaa laga siin doona). Cunto cagaar ahna xayawaanada waa la siiyey (1:30). Waxaa la sheegay in uunka oo dhan uu wanaagsanaa.

Way wanaagsan tahay in la ogaado sida ay u kala duwan yihiin baniaadmiga iyo xayawaanada. Waxyaala badan oo ay ka siman yihiinna way jiraan. Baniaadmiga iyo xayawaanada,

- Isku maalin ayay wada leeyihiin
- Waxaa laga wada uumay busta dhulka (Bilowgii 1:24; 2:7; 3:19).
- Hab noolaydkooda waxaa jiraan waxyaala badan oo ay ka wada siman yihiin sida aan uga akhrin ayno Bilowgii 1:22 iyo 28. Kala duwanaanshaha keliya waa erayada, *'wuxuu iyaga ku yidhi'*. Ilaah wuu la hadlaa jiinsiga baniaadmiga; xayawaankase lama hadlo!
- Xagga caloosha way ka siman yihiin, habka ay wax u cunaan way ka siman yihiin. Kulligoodba cunto la'aan ma noolan karaan (Bilowgii 1:28, 30; 2:7).

- Mid kastana wuxuu dhalaa ceenkiisa. Arintaan aad looguma hadlin laakiin waa wax jira.
- Kulligoodba way noolyihiin.

Baniaadmiga waxyaa jiraan waxyaala kale uu kala siman yahya uunka kale. Waxaa laga uumay busta dhulka. Waxaa kaloo jiraan waxyaala kale uu kaga egyahay xayawaanada. Haddaba waa maxay labka iyo dhaddiga ka dhigaya kuwa qaas ah? Waxaa lagu uumay aragga Ilaah.

# Nasashada Ilaah

***Cutubka 6aad***

(Bilowgii 2:1-3)

Kaddib markuu toddoba maalmood shaqayay, waxaa loo arkay inuu Ilaah 'nastay'. Marka ugu horaysa waxaan tixgelin aynaa **nasashada maalinta toddobaad macnaha ay Ilaah u laheyd.** Waxey aheyd mar uu Ilaah ku farxayay waxa uu samayay. Nasashada Ilaah ma ahan cidlanomo ama mid aanan waxba la qabanaynin. Tallaaba kastoo uu Ilaah qaaday markuu wax uumayay dib inuu u eego ayuu u eegayay wuxuu uumay, '*Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay*' (Bilowgii 1:4, 10, 12, 18, 21, 25). Bacddigeedna maalinta lixaad dabadeed Ilaah wuxuu arkay in ay wax kastoo uu uumay ay aad u wanaagsanayeen. Nasashada Ilaah waa hawl ka bilaabanaysa Bilowgii 1:31. Waa natiijada shaqadii uu lix maalmood shaqaynayay. Nasashada Ilaah waa 'hadiyadda' Ilaah wuxuu sameeyey daraaddeed.

Nasashada Ilaah way socotaa weli. Waa suurtagal inaan haatanba galna (Cibraaniyada 4:11). Bilowgii wuxuu noo sheegay sida maalin kastoo lixda maalmood ka midka aheyd ay ku dhamaatay ilawse nalooma sheegin sida ay maalinta toddobaad ku dhamaatay. Maba aanay dhamaanin!

Nasashada Ilaah ma ahan cidloonaan. Waxaa jirtay maalin uu Ciise qof bukay boogsiyey

maalin Sabdi ah oo Yahuuddina way ka qunuunacday maalinta uu ficilkaas sameeyey. Iyagu waxey aaminsanayeen in ay maalinta Sabdida ay tahay maalin aanan waxba la qabanaynin! Ciise wuxuu iyaga ugu jawaabay '*Aabbahay tan iyo imminka ayuu **shaqeeyaa**…'* (Yooxanaa 5:17). Waxaa idlaaday uun maalmihii uumista uu Ilaah adduunyada uumayay; hadda Ilaah wuxuu ku jira nasashadiisii ugu weynayd e Sabdida. Laakiinse ma ahan inuu waxba qabanaynin uu cidla yahay. Ilaah weli wuu shaqaynaya. Wuu boogsin kara qof buka. Sabddida Ilaah waa farxadda uu ku farxayo wuxuu uumay. Wuxuu goosanaya midhihii wuxuu beertay ama uu horay u sameeyey. Waa habka uu ku gelaya barakada uu ka helay shaqadii uu lixda maalmood qabtay.

Midda kale oo aan eegeyno waxey tahay inaan ogaano **waxyaalaha ruuxiyanka ah oo nasashada ku jira.** Baybalka wuxuu noo sheegaya in ay suurtagal tahay '*inaan galno'* nasashada Ilaah. Waa maxay macnaheedu *'gelidda nasashada'* e habkan lagu samaynaya?

Waxaa jiraan waxyaala ruuxiyan ah oo ku jira nasashada Ilaah amaba Sabddida. Markuu Ilaah adduunyada uumay uuna ku farxayay wuxuu sameeyey, qorshahiisa wuxuu ahaa in baniaadmiga madaama la uumay maalinta ugu dambaysa, uu '*gallo'* wuxuu Ilaah sameeyey. Ilaah wuxuu sameeyey uumista oo dhan.

Baniaadmigana waxey aheyd inuu uunka dhex gallo kuna dhex noolaado. Jiinsiga baniaadmiga waxaa loogu tallagalay inuu *'inuu gallo nasashada Ilaah'* macnaha waxey aheyd inuu wax alla wixii faa'ido ah oo ku jira adduunyada daahirka aheyd uu Ilaah uumay.

*'Gelidda nasashada'* waa hadiyadda ay Masixiinta adduunyada ku nool ay helayaan taa oo ah natiijo ka soo baxaysa iimaanka saxda ah oo ay ku noolyihiin. Waa farxadda addiyada la dhaxlaya. Waa dareemidda axdiga Ilaah, markuu dhaaranaya inuu na barakayn doono. Waa markaan sanooyin ka bacday aan iimaanka ku dulqaadano markaan heleyno xaqiiqda wixii aan muddo dheer suggaynay uu Ilaah horay noogaballanqaaday.

Hadduu baniaadmiga addeecista Ilaah ku sii jiri lahaa, hadiyadda addeecistaa waxey ahaan laheyd farxad dhab ah oo uu ku farxaya wax alla wuxuu Ilaah u uumay. Laakiin baniaadmigu wuu lumiyey fursaddii uu ku geli lahaa nasashadan Ilaah. Ilaah buu ku caasiyey. Wuxuu noqday mid gefay, oo suurtagalkii jiri inuu ku farxyo wax alla wuxuu Ilaah isaga u uumay wuu baaba'ay. Sida keliya oo rajadaas luntay lagu soo celin karo waa uun in si joogta ah iimaan joogta ah lagu yeesho Ciise Masiix.

'*Gellidda nasashada'* waa tan uu helay Ibraahim kaddib markuu sanada dabadood ku guulaystay

imtixaankii iimaankiisa lagu tijaabin ayay, oo Ilaah wuxuu isaga ku yidhi, '*hadda waan arkaa inaad iga cabsanaysid…*' halkaasi **Ilaah wuxuu qaaday ballan.** Wixii ka bilaabata halkaasi Ibraahim wuxuu galay nasashada Ilaah. Halkaasi ballanta waa la xajiyey. Dhacdadaan ka hore suurtagal bey aheyd in ballanta laga baxo.

*'Gellidda nasashada'* waxey aheyd mid xataa Daa'uud qabsatay markuu sanado badan kaddib ku jiray jarrabaad iyo rafaad farabadan, wuxuu ugu dambaysti gaaray heer uu Ilaah ballan u qaaday isaga oo ka noqosha la'aan ayuu Daa'uud waxaa loo sheegay nay midhtiisa weligeed waari doonto. Ilaah baa ku dhaartay (2 Samu'eel 7 iyo Sabuurrada 89). Ilaah halkani wuu ku dhaartay. Xagga Daa'uudna sanada kaddib wuu ka nastay cadawyadiisi dhibi jiray oo Ilaah ayaa nasasha ka siiyey dhinac walbaba (2 Samu'eel 7:1). Xagga reerkiisana Ilaah nasashuu ka siiyey Daa'uud maxaa yeelay, wuxuu ugu dhaartay ballan aan la dhaqaajin karin oo aheyd in farcankiisa uu noqon doono mid weligii jiri doono.

Markuu qofka Masiixiga ah rumaysadkiisa iyo addeecista Ilaah ku adkaysto, waa nasashada Ilaah oo qalbigiisa soo galaysa. Qofkaasi wuu ka nasanaya waxyaalihii uu isku mushquulin ayay oo wuxuu bilaabaya inuu ka midho goosto waxyaalihii uu Ilaah sameeyey, wakhtigii uumista adduunka wixii ka bilaabata, Ilaah shaqada uumista oo dhan ayuu sameeyey oo

baniaadmiga wuu uun ku dhex dhaqmay wuxuu Ilaah abbuuray.

Midda kale waxaan tixgelin aynaa **macnaha ay Sabtida u laheyd reer binu Israa'iil.** 'Sabti' macnaheedu waa joojin ama dhamaadka shey ama wax aan dhaqaaq dambe lahayn. Wakhti yar inta aanay reer binu Israa'iil Buurtii Siinay aadin, Ilaah wuxuu iyaga siiyey tababar ku saabsan sida Sabtida loo dhawri lahaa (Baxniintii 16:22-30). Sabtida wakhtigan ka hore weligeed lama dhawrin. Bilowgii 2:1-3 waxey ka hadlaysa uun **sida sabtida loo dhawri lahaa** oo ma jiraan wax kale oo ay xoogga saarayso. Bilooyin bacdigood Ilaah wuxuu qurunta reer binu Israa'iil siiyey amar kaloo ay maalinta Sabtida uga dhigaan maalin qoduus ah oo la nasto (Baniintii 20:8-11). Waxaa jirtay sabab kale oo maalintan looga dhigay in ay noqoto maalin qoduus ah oo la nasto – waxey noqotay maalin ay bulshada iisu timaaddo (Baxniintii 23:12). Waxey aheyd **calaamad** caddaynaysa inuu Ilaah reer binu Israa'iil la jiray. Qofkii Sabtida dhawri waaya waxaa lagu iqaabi jiray dhimasho (Baxniintii 31:12-17). Si joogta ah ayaa dadka loo xusuusin jiray muhimadda ay maalinta Sabtida leedahay (Baxniintii 34:21; 35:2, 3; Laawiyiintii 19:3, 30; 23:3; 26:2).
Danta ugu weyn oo Sabtida loogu tallagalay waxey u egtahay inaan ku ogaano inuu **Ilaah qorshayn leeyahay.** Wuxuu baniaadmiga u uumay inuu qof kasta ku noolaado farxadda ku

jiratay uunkiisa. Gefka baniaadmiga ayaa qorshaha Ilaah qarniyooyin daahiyey. Laakiin wuxuu leeyahay qorsha uu dib noogu soo hunuuniyo si aan uga qayb qaadano farxadda nasashadiisa ku jirta. Qorshahaasi kama baxsano reer binu Israa'iil. Reer binu Israa'iil waxey aheyd in ay qorshahan xajiyaan waayo, waxey u ahay callaamad lagu ogaanaya in ay qorshaha Ilaah ka tirsan yihiin oo ay yihiin kuwa xiriirka Ilaah e lumay dib loogu soo celin doono adduunyada. Sharciga ayaa xukumay in la tixgeliyo maalintaasi oo kii dhawri waayana uu dil ku xumanyahay madaama uu addeec la'aan sameeyey.

Markuu Ciise yimid fikiraddii sharci ahaanta aheyd waa la riday. Masixiinta ma hoos jooggaan sharciga reer binu Israa'iil. Ilaa hadda waa mid ay cid kasta aragtay muhimmaddeeda ay leedahay in toddobaadkiba hal maalin e nasasho ah laqaato balse ma jiro sharci dadka ku xukumaya in ay lahadaan maalin ay nasanayaan. Shaqsida maalmaha toddobaadka waxey noqonayaa isku kaaya mid hadduu doono (Rooma 14:5). Sheyga muhimka ah 'ma ahan inaan dhawrno sharciga Muuse' laakiin waa inaan ku dhex noolaano farxadda Ilaah e ku jirta wuxuu samaynaya. Haddii aan iimaan dhab ah leenahay waan heleynaa nasashada Ilaah annagoo gaarayna heer uu Ilaah ku farxo noolosheena si uu noogu dhaarto Inuu na barakayn doono.

Ugu dambaysta, waxaa laga yaaba in ay wanaagsan tahay inaan tixgellino **Axadda iyo sida ay xiriir ula leedahay Sabtida.** Masixiinta waxey dhawraan maalinta Axadda ah si ay adduunyada u tusiyaan inaanay dhawraynin maalintii Sabtida aheyd oo maalin qoduus ah aheyd oo laga amray sharciga Muuse. Qofka Masiixiga ah xor buu ka yahay sharciga Muuse; laakiin waxaa sharcigaas lagu dhawraya hogaaminta Ruuxa Qoduuska ah.

Axadda waa maalin suurtagal ah. Waagii Axdiga Cuseb suurtagal ayay aheyd in maalinta Axadda layskuugu yimaado allabari. Waxey aheyd maalintqa uu Ciise dhimashada ka sarakacay waxaana suurtagal aheyd in loogu yeedho, ‘maalinta Rabbiga’. Maalmaha la dhawraya waa uun wixii suurtagal ah oo ka imaan karo dhaqan wax dhis leh. Ma ahan sharci daraaddeed. Sida Sabtida loo dhawraya ma ahan in ay ahaato mid aan ku buunbuunin ayno waxyaalaha Axadda. Sida Sabtida loo dhawri karo waa annagoo si daacad ah u addeecno Ilaah si aan uga tirsanaano kuwa ka qayqaatay nasashadiisa.

# Dabbiicadda baniaadmiga

***Cutubka 7aad***

(Bilowgii 2:4-7

Qayb weyn e cuseb oo ka tirsan buugga Bilowgii waxey ku bilaabanaysa '*Kuwanu waa Bilowgii samada iyo dhulka kolkii la abuuray iyaga, maalintii Rabbiga Ilaah ahu sameeyey dhulka iyo samada'*. Halkan waxaad ka fahmaysa in hal shey laba jeer si kala duwan lagu sheegaya; habkana waa la bedelay.

Samada – Dhulka – Uumay
(1) (2) (3)

(3) (2) (1)
Hagaajiyey – Dhulka - Samadaha

Habkan hal arin laba nooc oo kala duwan lagu sharaxaya waa hab ay dadkii hore ku tilmaami jireen mawduuca sheegada la haya ku jira. Qaybta waxey ka bilaabanaysa bilowga aayadda 4aad, saa kuma ahan Bilowgii 2:4 qaybta labaad.

Erayga farcan waa mid aad muhim u ah. Wuxuu tilmaamaya natiija shey kale ka dhallatay. Qaybtan Bilowgii waxey xoogga saaraysa natiijadii ka soo baxday uunka Ilaah. Haddaba Bilowgii 2:4 ilaa 4:26 waxaan arkayna waxyaala isla markiiba ku xigga, ama ka soo baxay samada iyo dhulka.

Waxaa buugga Bilawgga tobban meelood uga jiraan aayado ka warama erayga farcan isagoo loo istecmaalay sida mawduuca arinta laga waramaya sida, Bilowgii 2:4; 5:1; 6:9; 10:1; 11:10; 11:27; 25:12; 25:19; 36:1; 37:2. Waa sida cutubka buugagta mawduuca looga dhigay. Erayga naftiisa wuxuu macnaynaya wax dhashay ama wax ay wax kale sababbeen. Farcanka samada iyo dhulka waa waxa iyaga ka soo baxa. Sheekada Ibraahim waxaa loogu magac daray ‘Farcankii Terax’.

Sheekadu way soo gaabanaysa markii la gaaro Bilowgii 1:2 ka bacdi markaan aragnay tan Bilowgii 1:1. Sheekadu way ka soo tagtay samada iyo dhulka oo waxey ku soo koobantay dhulka oo keliya. Haddana sheekadu way sii yaranaysa. Marka hore waxaan wada aragnay adduunyada oo dhan (1:1). Dabadeedna waxaan maqalnay wax dhulka ku saabsan (1:2-2:3). Hadda Bilowgii 2:4-25 waxey noo sheegeysa mid sheekadu hore oo dhan ka sii yar oo ku soo kooban oo keliya abniaaddanka. Waxaa si kooban noogula sheegay Bilowgii1:26-27; ilawse hadda sheekada sida ninka iyo naagta loo uumay ayaan si dhan u arkayna.

Laba shey oo aad u weyn ayaa halkan ka soo jeeda.

1. **Adduunyada Ilaah waxaa loogu talagalay baniaadmiga.** Bal dey Bilowgii 2:5, 6. markii hore dhulka ma ahayn meel ninka iyo

naagta u roon in ay ku nooladaan. Aayadahan waxey la mid yihiin kuwa Bilowgii 1:2 taa oo na tusin aysa in adduunyada si qaas ah loogu tallagalay baniaadmiga. Aayadda shanaad (5aad) waxey sheegeysa inuu dhulka u habboonayn baniaadmiga maxaa yeelay, ma jirin wax cagaar ah, roob ma jirin, oo beer falasho ma jirin. Aayadda lixaad (6aad)waxey tusaysa sida uu Ilaah dhulka ugu diyaariyey baniaadmiga. Wuxuu soo amray nooc daad ah si ay dhulka u waraabiyaan si uu dhulka u noqdo mid u qalma in la fasho.

2. **Qofka baniaadmiga ah wuxuu ka samaysan yahay laba shey.** Waxaa leenahay qaybta jidhka e la arki karo. Waxaa kale oo aan leenahay qaybta jidhka oo ah mid qarsoon oo dabbiicadda qofka lagu muujin karo.

Bal eeg Bilowgii 2:7. Ninka waxaa laga uumay waxa la arki karo oo dhulka ka tirsanaa. Baniaadmiga xiriir qaas ah ayuu la leeyahay waxyaalaha hareerahiisa joogga oo dhan oo adduunka ka tirsan. Xayawaanaduna wax baan la wadaagnaa. Madaama nagala uumay aragga Ilaah, wax ayaa noo dhexeeya Ilaah.

Sidaan horay u sheegeyba baniaadmiga wuxuu ka samaysan yahay laba shey. Shey la arki karo iyo mid aanan la arki karin uu Ilaah nagu neefsaday. Dabbiicaddan ama neeftan Ilaah e nagu jirta waxaa inta badan loogu yeedha ‘Naf’haddaan ka eegno Baybalka. Waxaan tusaaleh wacan oo

luuqaddan ku saabsan ka heli karnaa qoraalka ku dhigan Matayos 10:28. laakiin waa in mid la ogaado in sida ku dhigan Bilowgii 2:7 ay macnaha 'Naf' tahay **qofka oo dhan,** e ma ahan qayb qofka ka tirsan. (Luuqadda Baybalka ma ahan waxyaala laysku dhex qasay ama erayo cuseb e aan la fahmi Karin. Erayga 'Naf' haddaan Baybalka ka eegno waxaa jiraan habab badan oo loo istecmaalay. Waxey xaata ahaan karta qof dhintay ama meyd sida ku dhigan Tirintii 19:11 taa oo macnaynayso. Annagoo aan erayo culus istecmaalinba Baybalka wuxuu baraya inuu baniaadmiga ka samaysanyahay jidh iyo dabiicad (eeg Wacdintii 12:7; Matayos 10:28 ; 26:41; 27:50; Luukos 8:55; Faalimaha Rasuullada 2:26, 27, 31; Rooma 7:22-25; 8:10, 13; 12:1, 2; 1 Korintos 4:16; 5:5; 7:34; 9:27; 13:3; 2 Korintos 5:1-8; 2 Korintos 7:1; 12:2, 3; Efesos 2:3; Yacquub 2:26 iyo aayado kaleba). Wax bariddan si dhan ayay ku imanaysa oo ma ahan mid ku imaatay erayo culus oo wareer nagu dhalin ayaan. Sidaan horay u soo sheegayba qofka wuxuu ka samaysan yahay laba shey. Bawlos wuxuu sheegaya inuu aad u jecayl yahay inuu tago uu Ciise la noolaado laakiin waxey u badantahay inuu weli jidhkan caadiga ah ku jiri doono sida ku dhigan Filiboy 1:22. Qayb naga tirsan waxey ka timid aabbaheena reer adduun qaybta kalena waxey ka timid xagga Ilaaheena na uumay, 'aabbaha ruuxyada' (Cibraaniyada 12:9). Baybalka inta badan wuu kala saaraya nafta iyo ruuxa (1 Tesaloniika 5:23 iyo Cibraaniyada 4:12

ayaa inta badan fikiraddan laga soo xigtaa), laakiin kuwani ma ahan qaybbo ka tirsan qofka. Waa habab kala duwan oo loo arko dabiicadda qofka.

Markos 12:33 waxey leedahay, '…qalbiga…caqliga…nafta…xoogga' laakiin kuwani ma ahan afar qaybood oo qofka ku jira. Weliba ma jiraan saddex qaybood sida ku dhigan 1 Tesaloniika 5:23. Bilowgii 2:7 caddayn weyn ayuu na siiyey. Waxaa un jiraan laba shey uu qofka baniaadmiga ah uu ka samaynsan yahay. Inta badanna labadan shey lama kala qaadi karo. Qofka markuu meyd noqdo, jidhka iyo dabiicadda way kala baxayaan. Marba haddii ay neefta noolosha uu Ilaah bixiyo qofka ku jirto, qofka wuxuu noqonaya mid ay dabiicaddiisa iyo jidhkiisaba ay hal yihiin. Arinta xoogga la saaraya ma ahan labada shey uu qofka ka samaysan yahay ilawse waa qofka oo dhan. Ma ahan fikirad Masiixi in jidhka iyo nafta la kala saaro. Injiilka kama soo hor jeedo jidhka. Ugu dambaysta rajada ugu weyn uu qofka filanayo waa sarakaca jidhka.

Bilowgii 2:7 ayaa ah aayadda saxda ah oo lagu fami karo dabeecadda baniaadmiga. 1 Tesaloniika 5:23 iyo Cibraaniyada 4:12 kuma baabi'in karno macnayta Bilowgii 2:7.

Waxaa jiraan waxyaala jidhka ku saabsan oo ay waajib nagu tahay inaan fahanno. Jidhka naftiisu

ma ahan shar. Laakiin weli dembiga aad buu aad buu u burburiya jidhka maxaa yeelay lama daahirinin weli (Rooma 8:23). Jidhka waxaa istecmalaa dembiga, laakiin waxaa nagula soo sara kicin doonaa Ciise Masiix. Sidaa daraaddeed jidhka waa laga siibay awoodda oo waxaan addoon u noqonay dembiga. Jidhkeena waa inaan u xilsaarno Ilaah (Rooma 6:15-23; 12:1, 2). Maalin ayaa imaan doonta uu Ciise jidhkeena sara kicin doono. Intaan noolnahay waxaan muujin ayna midnimada baniaadminimo, e ma ahan inaan qayb keliya aan muujin ayno. Qofka markuu dhinto ayuu qaybo u kala baxaya. Intaan noolyahay ayaan Ilaah jidhkeena ku sharfayna sida ku dhigan 1 Korintos 6:19-20).

# Jannada

***Cutubka 8aad***

(Bilowgii 2:8-25)

Ilaah wuxuu baniaadmiga dejiyey meel la odhan jiray Ceden, taa oo beer aheyd. Sheekada waxey noo tilmaamaysa sababta uu Ilaah u baniaadmiga u uumay, wuxuu baniaadmiga lumiyey **iyo wuxuu Ilaah doonaya inuu noogu soo celiyo Ciise.**

Ilaah wuxuu beer ku beeray barigga, meeshaasi waxey ku taalay barigga Isra'iil. Sida aan uga fahmayno sawirka sheekada Bilowgii beertan waxey aheyd mid aad u qurux badan, meel aad loo waraabiyey oo nafaqa badan leh, meel aad isha u roon oo geeda dhedheer leh sida ku dhigan Yexesqeel 31:9, 16, 18 waxaana halkaa ku yaalay geed lagu magacaabay 'geedka noolosha' (Bilowgii 2:9). Aayadda tobnaad waxey noo sheegeysa inuu jiray webi ka aasaasmay Ceeden oo ku qulqulayay beerta. Webigaasi beerta waraabin ayay wuxuu u kala qaybsamay afar webi afartaasna waxey noqdeen aasaaska webiyo waweyn oo ka sii baxayay beerta oo waxey ku hoobanayeen adduun weynaha ka e xagga ka sii jiray Ceeden.

Erayga Ceeden wuxuu macnahiisa yahay farxad ama meel ay farxad joogta ah ka jirto. Aayadda 8aad e Sabuurrada 36 waxey eraygan istecmaalaysa markaan macnaynayso webiga farxaddaada. Yaanan inaba isku deyin inaan

inaan ogaano joqraafi ahaan halka ay beerta Ceeden ku taalay. Sheekada waa wax dhab ah oo dhacay laakiin waxaa noogula sheegaya hab sida annagoo akhrin ayno buug sawiro leh. Waxa aan ka baranayno ayaan ka muhimsan inaan joqraafiga beertan ka shaqayno.

Beertasi waa meel udug badan oo la jeclaysanaya. Erayga ‘*paradeisos*’ waa luuqadda Griigta kaa uu macnahiisu yahay ‘beer’ ayaa la istecmaalaayay wakhtiyadii hore ka dib. Erayga janno wuxuu ka soo askunmay paradeisos oo maanta luuqadaha adduunka oo dhan laga ogyahay. Luuqadda ingiriiskana erayga janno waxaa lagu yidhaahdaa ‘paradise’ waana isla asalkaas. Beertaasi waxey laheyd muqaal iyo dareen janno. Waxey aheyd beer qaas ah oo qurux badan taa oo ay ka buuxeen daahirnaan iyo xaqnimo. Webiyada beertaas ka soo aasaasmay kana baxayay waxey ina tusin ayaan meeshaasi in ay aheyd meel ay noonol iyo taran ka jireen. Qudaar fara badan ayaa ku baxayeen agagaarka webiga. Webiyadaasi magacay lahaayeen sida ku dhigan Bilowgii 2:11-14. laguma tilmaami karo in ay ahaayeen afar webi oo la yaqaano. Xiddeqel iyo Yufraat ayaa ahaayeen laba webi oo aad caan uga ahaa taarikhdii hore e Barigga dhexe. Qoraagga Bilowgii wuxuu magacda labadan webi ugu waweynaa u istecmaalay, wuxuu ogaa in ay labadaasi caan ahaayeen kuwa ugu waweynaa oo ay ummaddaasi way u caddeed sida ay webiyadaas u ekaayeen. Dhab ahaan haddii loo

kaco labadan webi (Yufraat iyo Xiddiqel) isku meel kama soo aasaasmaan. Ilawse qoraagga wuxuu magacooday u istecmaalay laba webi oo ka soo aasaasmy Beerta Ceeden. Labada magac e kale (Fishoon iyo Giixoon) waa magacya la sheegay uun e ma ahan wax jira. Fishoon waa eray ka soo askunmay luuqadda Griigta oo micnahiisuna waa ‘ka soo bax’. Erayga Giixoon wuxuu isna ka soo askunmay xaaladda ‘ka soo butaacidda.  Magacdan waxey na nagu dhallin ayaan in ay fikiradda ah in ay jireen illo ay biyo ka soo butaacayeen si ay noolol u keenaan (eeg Yooxanaa 4:14 si aad wax la barbardhig ah u heshid).

Webiyadaas waxey waraabin ayeen waddamo fara badan. Kuush (taa oo gadaal magaceeda laga bedelay oo maanta loo yaqaano Itoobiya ama Suudan) iyo Asiriya waxaa waraabin ayay webiyadan. Qoraagga wuxuu istecmaalay magacda waddamada wagaas caanka ahaa.

Meesha beertaasi lagu sheegay in ay ku taalay waxaa la yidhi waxey aheyd meel dhereg badan oo ay ka buuxeen birooyin qiima badad iyo macdan.

Sawirkan nagala tusay beerta Ceeden wuxuu na tusinaya waxa uu Ilaah baniaadmiga la jecayl yahay. Ilaah wuxuu doonaya inuu baniaadmiga ku noolaado meel aan haba yaraate e ay jirin wax laga wayni karo. Intuusan Ilaah xirrirka ka

goosanin baniaadmiga si la yaab leh oo joogta ah ayuu wax kasta u helayay.

Halkan waxaa jiraan waxyaala uu Ilaah jecayl yahay, waana waxyaala ka tirsan qorshaha uu Ilaah baniaadmiga u leeyahay.

1. **Ilaah wuxuu jecayl yahay quruxda wuxuuna doonaya inuu baniaadmiga qurux ku noolaado.** Beerta ku taalay Ceeden waxey aheyd meel aad u qurux badan. Waxey aheyd meel aanan loo quurin in isha laga qaado (2:9). Masixiinta waa in ay quruxsanadaan adduunyadana ay ka shaqayaan si ay u noqoto meel quuxsan. Jannada waxey ahaan doontaa meel aad u qurux badan. Samada cuseb iyo dhulka cuseb oo nagula sharfi doono waxey ahaan doonaan meel aad u quruxsan.
2. **Ilaah wuu jecayl yahay inuu maal na siiyo oo weliba aad buu u jecayl yahay inuu baniaadmiga helo wax alla wuxuu jecayl yahay oo naftiisa u roon.** Beerta Ceeden ma jirin wax ka maqnaa uu Eebbe uuntay. Cunto fara badan ayaa jirtay (2:9), biyo la'aanna lama sheegin, waxaa jireen dahab iyo macdan. '*Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaa'*, ayuu yidhi Ilaah (2:16). Ilaah wuxuu jecayl yahay in nala siiyo wax alla waxaan u baahannahay oo dhan. Inaan wax alla waxaan u baahannahay aan haysano way way wanaagsan tahay waana xaq. Dembiga ayaa baniaadmiga abaar iyo wax la'aan soo geliyay. Anigu waxba

kuma darsan kari diin xunguri weyn, ama diin ay dadka ku jira mooqufkoodu yaay uun in ay taajiraan. Barakada waxey la socotaa addecista aan Ilaah addeeceyno ama samaynta doonistiisa. Ma jiro qaynuun ay Masixiinta raaci karaa si ay ku tajiraan – sheekada Yacquub ayaa tan noo caddaynaysa. Noolosha oo si daacad ah loogu noolaado oo doonista Ilaah oo keliya la yeelo, waxaa noo soo raacaya barakada Ilaah oo dhan. Sara kaca markii la gaaro jannaduna way soo noqon doontaa; barakadii naga dhuntay oo dhan ayaan dib u heli doonaa. Hase ahaatee, wax alla wixii aan samaynaynaba waa doonista Ilaah inaan helno qontulyoonkeena.

3. **Ilaah wuxuu doonaya inaan lahaano inaan noolosheena oo dhan ka dhigno mid uu Ilaah raali ka yahay.** Beerta Ceeden waxaa ku dhex yaalay '*geedkii nooloshaa nolosha'* (2:9). Waxey aheyd inuu baniaadmiga geedkan ka cuno si uu weligiisba u noolaado (eeg 3:22). Ninka iyo naagta ma ahayn caadi in ay helaan noolol weligeed ah. Weligood noolaanshaha waxey aheyd in ay ku imaato addeecista ay Ilaah addeecayaan. Haba ahaatee, doonista Ilaah waxey aheyd inuu baniaadmiga noolol aan dhamaad lahayn ku noolaado nooloshaasi oo aheyd mid xagga Ilaah ka imaanaysa oo weliba waxey aheyd inuu ku farxo xiriirka wanaagsan uu Ilaah la leeyahay (eeg 3:8) oo weligiisba jiri doono. Waad odhan karta ninka iyo naagta durbaba way haysteen 'nooc noolosha weligeed ah'.

4. **Ilaah wuxuu jecayl yahay in xagga maankana lagaga qanco noolosha.**

Baniaadmiga wuxuu lahaa dan Ilaah u uumay markuu dhex jooggay beerta Ilaah. Waxaa jirtay shaqo uu Ilaah u qaban lahaa (2:15). Waxey aheyd shaqa farxad leh, shaqo fudud wayna qancin laheyd qalbiga baniaadmiga. Bilowgii 3:17 waxey noo sheegeysa sida ay arintaa u qaloocatay, laakiin waxey aheyd inuu baniaadmiga helo shaqo qiimaynaysa nooloshiisa jahana ku toosin aysa.

5. **Ilaah wuxuu jecayl yahay wadajirka.**

(Bilowgii 2:18-25) Ninka looguma talagelin inuu keligiis ahaado. Ugu horaynti wax baa nooloshiisa ka maqnaa. Qofka waxaa loo uumay inuu ahaado mid aan keligiis ahaani karin. Waxaa loo uumay inuu la farxo dadka kale. Ilaah wuxuu baniaadmiga ka doonaya saaxibtinimo iyo jaalnimo qalbiga qancisa. Ninkuu Ilaah uumay wuxuu isku deyey inuu jaalnimadaasi xayawaanada ka helo. Laakiin ma aanay noqonin e waxaa la siiyey wax ka qiima badan xayawaanada. Sidaa daraaddeed Ilaah wuxuu ninkii u uumay naag. Ninka iyo naagta way iisu wada baahan yihiin, qofba qofka kale waa u baahan yahay bulshaba bulshada kale way u baahan tahay. Ninka waxaa loo uumay inuu ahaado mid xiriir yeelan karo, e ma ahan mid gooni loo soocay. Tan ayaa aheyd kutalagalka uu Ilaah baniaadmiga u lahaa. Ilawse ninkii iyo naagti way lumiyey barakadan, laakiin

waxyaalahaasi lumay oo dhan waxaa ku heleynaa Ciise Masiix.

# Tijaabinta iin la'aanta

***Cutubka 9aad***

(Bilowgii 2:16-17)

Baniaadmiga ma ahayn mid dhedhexaad joogga markuu beerta Ceeden ku jiray. Uma dhaxaynin dembiga iyo xaqnimada si uu dhinacuu doorto u aado. Maya! Jannadaasi baniaadmiga xaq buu ku ahaa. Ma jiraan wax uu Ilaah uuntay oo shar ahaa. Qofka waxaa lagu uumay u ekaanta Ilaah isagoo haysta xaqnimo iyo daahirnaan.

Laakiinse xaqnimadiisa waxey aheyd mid aanan la tijaabinin. Jiinsiga baniaadmiga waxey aheyd in la tijaabiyo si loo ogaado inuu xajin doono xaqnimadii uu Ilaah ku uumay. Iin la'aan bey ahaayeen laakiin lama xaqiijinin in ay xaqnimadooda tahay mid joogta ah. Aadan waxaa lagu amray inuu xaq ahaado (2:16, 17). Ma jirin hab kale uu Ilaah hortiisa xaq ku noqon lahaa. Hase ahaatee, suurtagal bey u aheyd inuu Ilaah ku caasin doono. Hadduu ku gefay cunista uu cunnay geedkii garashada wanaagga iyo xumaanta, runtii waa la xukumi doona.

Aadan wuxuu ahaa hogaamiyaha jiinsiga baniaadmiga. Wuxuu ahaa kan u doodaya una qaabilsan danaha jiinsiyada baniaadmiga oo dhan. Erayga caanka ah micnihiisu waa qof. Bilowgii ayaan ka akhrin aynaa wax ku saabsan qofka marka ugu horaysa kaas oo ahaa 'aadanka'. Eraygaasi wuxuu noqday magac, Aadan. Wax alla wixii Aadan qabsado way qabsanaysa qof

kasta. Marka ugu horaysa uu erayga magac noqday waxey ahaan kartaa sida aan uga akhrin ayno Bilowgii 3:17 or 3:21. Runtii way caddahay inuu eraygaasi magac yahay sida aan uga akhrin aynaba Bilowgii 4:25. Baniaadmiga oo dhan wuxuu ku jira Aadan (eeg 1 Korintos 15:21; Rooma 5:12-21). Aadmiga oo dhan ayaa ka qayb qaatay gefka uu Aadan galay. Adanaha oo dhan ayaa gefay markuu qofkii ugu xaqa badnaa uu Ilaah addeeci waayay uu lumiyey xaqnimadii lagu uumay. Wixii Aadan qabsaday waa wax midkeena walbaba qabsan karta.

Habka uu Ilaah badbaadada ku bixiyana waa isla sidaas. Masiixa ayaan dib ugu soo noqonayna wixii aan xaqdarrada ku luminay oo dhan. Isla sida uu Aadan annaga wakiil noogga ahaa nooloshaas hore ayuu Masiixa hadda wakiil nooga yahay xagga Ilaah. Masiixa noolol Ilaahiyan ah ayuu daraaddeen u noolaa. Masiixa wuxuu dusha iska saaray gefkeeni oo dhan.

Geedkii aqoonta wanaagga iyo sharka waxa magacaas loo siiyey waxey aheyd Aadan ayaa la tijaabin ayay. Wuxuu wanaag dareemi doona uun hadduu amarada Ilaah caddeeco ilawse hadduu amarada Ilaah addeeci waayo wuxuu dareemi doona culayska sharka.

Taagerada ugu horaysa e aan nooc kastoo cadaab ah Baybalka kaga taageri karno waa Bilowgii 2:17 taa oo aheyd markii Aadan lagu amray

inuusan midhta geedka aqoonta wanaaga iyo sharka wax ka cunin. '*maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa'*. Bilawga Baybalka ayaan ka arkaynaa in mushaarka gefka Ilaah loo gefaya uu yahay dhimasho.

Ma ahan uun dhishada caadiga ah oo ay qofka nafta ka baxaysa. Aadan wuxuu noolaa 930 sano! Ma ahayn uun lumista noolosha aan ku noolnahay. Aadan wuxuu noolosha weligeed ah ku heli lahaa geedka haddii uu Ilaah addeeci lahaa. Noolosha waa wax uu Ilaah markii horeba ugu talagalay markii la uumayay (eeg 3:24). Bilowgii 2:17 waxey noo caddaynaysa in ay dhimashada Aadan u imaan laheyd isla markii uu gefayba.

a) Wax bariddan waxaa ku jirta **xiriirka Ilaah lala lahaa oo burburay.** Markuu gefka galay aadanaha wuxuu noqday mid wejiga Ilaah ka cararo oo dareensan inuu wax sax ah samaynin (3:8-10). Wakhtigaas uu Aadan dembaabay ka bacdi wax alla wixii dhasha waxey ku dhallanayaan xiriirka Ilaah oo aan sax ahayn. Wuxuu ku dhallanaya dhimasho xagga ruuxa ah.

b) Waxaa kale oo halkan ku jira **xiriirka baniaadmiga dhexdiisa ah oo burburay**. Markuu gefay ka bacday isla ninkii ku faraxsanaa naagtiisa (2:23) hadda wuxuu bilaabay inuu edeyo iyada uu qaladaad ka sheego (3:12). Tan waxaan haddana durbaba ka arkayna sheekada ku saabsan gefka uu baniaadmiga galay. Arinta tan

ku xigta waxaan ka arkayna inuu dil uu soo galay jiinsiga baniaadmiga. Walaal ayaa walaalkiis ka horjeesanaya (4:8). Sheekadan socota e ka sheekeynaysa jiinisga baniaadmiga waxaan ka arkayna in ay wax kasta si joogta ah u sii baaba'ayaan. Naaga badan guursasho ayaa jiinsiga baniaadmiga ka dhex bilaabatay sida ku dhigan Bilowgii 4:19. Dilka wuxuu noqday wax lagu faano sida aan uga arkayno noolosha Lamek (Bilowgii 4:23-24).

c) **Xiriirkii Ilaah iyo uunka kale u dhaxayay ayaa burburay.** Uunkii Aadan markii hore loo xilsaaray inuu xukumo hadda mar dambe ma addeeci doonaan isaga. Dhulkiina wuu habaarmay (3:17). Shaqa adag iyo rafaad ayaa la soo dersay Aadan (3:17). Waxaa kale uu Baybalka sheegaya in ay qodxan iyo yamaruugna kaga soo bixi doonaan dhulka (3:18). Xiriirkan habaaran oo dhulka la habaaray wuxuu ku sii ballaartay sheekada Qaabiil, markii isaga laga habaaray dhulka oo ma lahaan doono qayb dhulka ka tirsan uu ugu yeedhi doono dhulkiisa wuxuuna noqon doonaa mid aan nasan doonin.

d) **Waxaa bilaabatay inuu maska noqon doono mid nooloshiisa ay khatar ku sugan tahay.** Gefkii Aadan ka bacdi waxaa timid in ay laba fac weligood col noqdaan (3:15). Bilowgii 6:1-8 waa aayado aan runtii la fahmi karin micnaynteeda laakiin waxaa loo macnayn karaya in jiinsiga baniaadmiga uu sii burburaya ayuu afka su sii galaya awoodaha sharka. Bilowgii 6:1-8 waxey ka hadlayaan gef daran oo aan mar

dambe la samayn doonin. Gefkan wuxuu ahaa kan Aadanaha u keenay burburkii ugu weynaa adduunka. Gefkan wuxuu amray inuu Ilaah adduunka ku baabi'iyo daad.

e) **Halkan waxaa soo galay in si caadi ah loo baaba'o oo weliba si caadi ah loo dhinto.** Ugu dambaystii sharaxaadii Bilowgii 2:7 dib ayaa loogu soo celin doonaa noolosha Aadan oo wuxuu ku noqon doonaa busta (3:19). Arintaa waxaa xoogga laga saari doonaa Cutubka shanaad, taa oo qarni kastaba looga sheekeysan doono oo la leeyahay 'oo wuu dhintay'.

f) **Dhimashada Aadan waxey keentay inuusan mar dambe Ilaah hor joogsan doonin,** xataa halkuu jooggay ayuu bedeshay. Waa laga raray jannadii Ilaah. Sida uu Ilaah dib xiriir ula yeelan lahaa waa la deday (3:22-24).

Markii la leeyahay dadka waxey ku dhinteen gefkooda, fikiradda way ka weyntahay dhimashada caadiga ah sida erayga waagii hore loo istecmaali jiray. Waxey tixgelin ku samaynaysaa sheydaanka oo xukunka haya (Efesos 2:2), hoos joogidda inkaarta Ilaah iyo xiriir la'aan oo aan Ilaah mar dambe xiriir lala yeelanaynin (Efesos 2:3). Qofka oo ku noolaado noolosha Ilaah la'aanteed. Qaybaha kale e Baybalka waxey dhimashada ku macnaynaya way ka weyntahay qofkoo ay nafta ka baxdo ama adduunka ku noolaan doonin.

Dhimashada aan ka arkayno Bilowgii 2:17 miyey tahay mid arkaysa in ay noolol jirto qabriga ka dib? Runtii Bilowgii oo keliya haddaan akhrino ma jirto sheeko ka sheekeynaysa in ay noolol jirto qabriga dabadiisa. Markay qaybaha kale Baybalka ay sheegayaan in dhimashada gefka ku timid ay tahay mid sii jiri doonto qabriga dabadiis waxey sii cuslaynaysa Bilowgii cutubka 2aad. Markay saa noqonayso waxaa macna dheeraad ah yeelanaya Bilowgii 2:17. Bilowgii 2:17 waxba kama sheegeyso waxa dhimashadan ay keeni doonto ka dib markuu Aadan dhintay. Sida halkan ku dhigan waa uun fikiradda ku dhimashada adduunka oo keliya. Qaybaha kale e Baybalka ayaa tillaabo dheeraad ah arintan dhimashada nag siinaya.

Muujintii 2:7 waxey noo sheegeysa in jannada aan hawaysannahay ay u ekaan doonto beerta Ceeden – in kastoo ay uun jiri doonaan waxyaala siyaada ah oo ay ka sii weynaan doonto! Beerta Ceeden ayaa uun si lagu soo celin doona, dadka Ilaahna waxaa la wada keeni doonaa jannada. Halkan aan ku dambayn doono ama rajadeena waa beer iyo magaala madax (Muujintii 21:2). Sawirada kale e aan Baybalka kaga fahmayno jannada waa sida in ay jiri doonto il ay noolosha ka soo qulquli doonto, iyo biyaha noolosha (Muujintii 22:1). Inkaartii gefkii hore naga soo gaaray waa la baabi'in doona. Oo haddaba ma hoos joogno inkaartaas. '*Waxaa jira webi durdurradiisu ay ka farxiyaan magaalada Ilaah,*

*taasoo ah meesha qoduuska ah e Ilaaha ugu sarreeya taambuugyadiisa'* (Sabuurrada 46:4). Jannada waxaa laga garan karaya noolosha Kiniisadda looga nool ama ay Masixiinta ku noolyihiin. Kiniisadda Ciise Masiix waa sida tambuuga ama webiga ay noolosha adduunka u soo maraysa, waa in laga dareemo tallaaba kasta iyo wakhti kasta (Yexesqeel 47:1-12). Jannada waxaa dib noogu soo celinaya Masiixa. Haddaba Ciise daraaddiis ayaa durbaba loogu istareexaya laakiin ugu dambaysta si buuxda ayaa loogu istareexi doona markaan galno samada cuseb iyo dhulka cuseb.

# Nin iyo Naag

***Cutubka 10aad***

(Bilowgii 2:18-25)

Ninka looguma talagelin inuu keligii ahaado, laakiin waxey aheyd inuu ahaado mid xiriir yeesha. Ma jiro qof ay ku habboontahay inuu keligii ahaado.

**1. Ninka kaami ma ahan naagta la'aanteed.** Kaddib markii mar labaad lagu soo celiyo isla farintii Bilowgii 1aad oo aheyd in ay wax kasta wanaagsanayeen, Bilowgii 2:18 waxey ku imaanaysa si la yaab leh. '*Ma wanaagsana in ninku keligiis ahaado*'. Ma ahan inuu Ilaah wax shar leh uumay, laakiin maalintii lixaad waxaa caddayd in ay hawsha kaamilmin. Ninka looguma talagelin inuu ahaado keligiis; naag ayaa ka maqnayd. Waxaan aaminsannahay in ay arintan naga dhaadhicin ayso in ninka haddii si guud loo hadlo loo uumay inuu guursado. Nimanka badidood waa u run oo naag xiriir naageed la'aanteed noolosha wey ku adagtahay. Halkan waxaa kale oo aan ka arkayna in micna kale uu ku jiro kaa oo ah wax wada qabashada in ay muhim tahay. Ninka iyo naagta ma ahan in aad loo kala saaro. Markay niman oo keliya meel ku tuurtaan wax unbaa ka maqnaanaya. Oo isla sidaana markay naaga keliya meel ku tuurtaan iyaguna wax baa ka maqan. Markay jiraan ururo naagood oo uu qof ragga ah ku jirin halkaasi wax baad si ka ah waayo, allabariga wada jirka lagu sameeyo ayaa aad u wanaagsan. Ururada

nimanka iyo kuwa naagahuba mar kasta wax unbaa ka maqnaanaya. Qofba si unbuu kan kale ugu baahan yahay. Ilaa halkan Aadan kaamil ma uusan ahayn sida aan sheekada uga arkayno 2:23. Si daran ayay nooloshiisa u xumeyd naag la'aanteed.

**2.** Dhinaca kale haddii laga eegana **naagna kaamil ma ahanayso nin la'aantiis.** Sida aan sheekada uga arkayno Bilowgii 2aad labadoodu waxey samaynayaan midnimo uu horayba Ilaah ugu tallagalay oo si kasta u shaqaynayso. Xaawa waxey ka soo baxday feerta Aadan. Labadoodu markii hore hal bey ahaayeen; wayna isku dhegayaan markii haddana laysku soo celiyo. Naagtu kaami ma ahan hadduuna nin garab taagnayn. Iyaduna waxey uun samayn karta wixii doonista Aadan ah ilaa halkan.

**3. Muhimad weyn ayaa ku jirta sida ay arimahan iskuugu xigsan yihiin.** Ninka waxaa la siiyey shaqo uu qabto (2:15). Markii loo xilsaaray xukumaadda adduunyada, keligii buu ahaa. Ninka naagta kama uusan soo bixin ilawse waa naagta tan ninka ka soo baxday (1 Korintos 11:8). Naagta waxey ku timid ninka, iyagoo ah kuwa si siman uu xiriir uga dhexeeyo si ay uga caawiso hawsha loo dhiibay inuu sameeyo. Halkan way ku wada jiraan sinnaasho iyo madaxddinimaba. Madaxddinimo way jirtaa madaama ninka loo dhiibay hawl uu qabto wakhti ay naagta adduunka joogin. Waxaa kaloo jirta kala sarayn la'aan, madaama ay naagta ka samaysantahay u ekaanta Ilaah isla sida uu

ninkuba yahay (eeg 1:26) oo wax weyn bey ku darsan kartaa xiriirkooda isla sida uu ninkuba wax ugu kordhin karo xiriirkooda. Ilawse markii la eego sida ay wax kasta iskuugu xigeen markay adduunka ku aasaasmayeen, ninka wuxuu ahaa xoggeeyaha wadajirkaasi u dhexeeyey ninka iyo naagta. Waxaa laga yabaa in ay jiraan waxyaala u dhexeeya ninka iyo naagta oo aan sharcigaan raacaynin laakiin waa waxyaala laga maarmi karo. Habka ay dhacdooyinka iskuugu xigeen aad bey muhim u tahay. Rasuul Bawlos wuxuu sheegaya in Aadan uu ku horayay uumista oo dabadeedna Xaawa (1 Timoteyos 2:13). Sababtaan daraaddeed ayaa dumarka loo siin aynin jagooyinka ugu sareeya haddii aan si guud u hadalno. Sidaas daraaddeed ninka ayaa ah madaxa qoyska markay labadoodu isguursadaan (Efesos 5:22-24). Madaxddinimada ninka waa hawsha uu qabanaya, tan ah guddoomiyeynimada ururka dhexdiisa. Ma ahan in fikiraddaan loo fahmo ama lagu fasiro inuu mid kan kale ka liito. Ninka iyo naagta way wada siman yihiin laakiin sinnaashadoodu dhexdeeda waxaa jirta fikiradda ah guddoomiyeynimada. Ma ahan in ay naagta isaga ka liidato laakiin xiriirkaasi u dhexeeya labka iyo dhaddigga waxaa loo baahan yahay inuu jiro mid kor meydha ah ama guddoomiye. Waa in layska jira laakiin si aanay u jirin isla weynin ama kibir. Markuu urur wada shaqaynaya ma ahan macnaha inuu guddoomiyaha yahay kan kuligood ka aqli badan, laakiin si uu nimaad u jiro daraaddeed unbuu guddoomiyaha

hogaamiyey u yahay. Kan ayaa ah saldhigga uu Baybalka siinaya guurka.

**Guurka waa caadi waana wax muhim u ah dadka badidood.** Aadan wax baa ka maqan markuu keligii yahay. Wuxuu u baahan yahay caawiye ku habboon isaga (2:18). Ilaah wuxuu Aadan ku caasumay inuu tacliinta xayawaanada barto (2:19). Markuu Aadan xayawaanada magac siin ayay waxey aheyd inuu horta dabiicadda nooca xayawaanka uu barto. Magacda waayihii hore waxey tilmaami jireen dabiicad. Waxey u egtahay inuu Aadan dabiicadda xayawaanada oo dhan uu eegayay si uu ku helo in ay jiraan kuwa ay isaga isku dabiicad noqon karaan si ay iisulu saftaan oo ay urur u samaystaan (2:20). Ninka markuu keliygii yahay ma wanaagsana, hase yeeshee, inuu xayawaanada urur la yeeshana kuma filno inuu baahidiisa guud dherjiyo.

Guurka waa caadi waana wax muhim ah. *'Ku alla kii afo helaa wuxuu helaa wax wanaagsan, oo Rabbigana raallinimuu ka helaa'* (Maahmaayadii 18:22; haddana eeg Maahmaayadii 5:18; 19:22; Maahmaayadii 31:10-31; Wacdiyaha 9:9; 1 Timoteyos 4:1-3; 5:14; Cibraaniyada 13:4). Matayos 19:3-12 Ciise wuxuu noo sheegaya waxyaala aanan sharcigan aan sheegnay lagu lifaaqi karin. Xertii waxey soo jeediyeen in ay suurtagal tahay inuu qofka guur la'aan ahaado. Ciise wuxuu leeyahay waa uun

saddex urur oo kala duwan kuwa guur la'aan ku dhaqmi karaan,

1. Kuwa aan lahayn dareenka guurka( kuwa koronimada uurka hooyadood kala soo baxay).
2. Waxaa jiraan kuwa aanan awoodin guurka (kuwa koronka ah oo ay edbin ahaan dadka raayaha uga tumeen ama uga sibeen).
3. Waxaa jira kuwa uu Ilaah siiyey hadiyadda guur la'aanta oo saasay Ilaah ugu adegaan. Laakiin halkan Ciise wuxuu ka sheegay uun kuwa laga yaaba in ay guur la'aan noqon karaan waayo, waxaa jiran kuwa aanan koron ahayn oo goosan karaan in ay uun iska guur la'aadaan.

Aayadahaasi waxey leeyihiin,

"3 Markaasaa Farrisiintii u timid. iyagoo jirrabaya, oo waxey ku yidhaahdeen, Ma xalaal baa in nin sabab kasta naagtiisa ku furo? 4 Wuxuu u jawaabay oo ku yidhi. Miyaydnaan akhriyin, Kii bilowgii uumay iyaga wuxuu ka dhigay lab iyo dhaddig, 5 oo wuxuu yidhi, Sababtaas aawadeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa, oo labaduba waxey noqonayaan isku jidh? 6 Sidaa darteed haatan iyagu laba ma aha, laakiin waa isku jidh. Haddaba wixii Ilaah isku xidhay, ninna yaanu kala furin. 7 Markaasay waxey ku yidhaahdeen. Haddaba Muuse muxuu u amray in warqaddii furniinta iyada la siiyo oo la furo? 8 Wuxuu ku yidhi, Maxaa yeelay, Muuse

wuxuu idiinku fasaxay inaad naagihiinna furtaan qalbi engegnaantiinna aawa deed, laakiin bilowgii sidaas ma ahayn. 9 Waxaan idinku leeyahay, Ku alla kii naagtiisa ku fura wax aan sino ahayn, oo mid kale guursadaa, wuu sin aystaa. Oo kii guursada tii la furay wuu sin aystaa. 10 Xertiisii waxey ku yidhaahdeen, Haddii nin xaal kiisu sidan yahay xagga naagtiisa, in la guursadaaba ma wanaag-sana. 11 Laakiin wuxuu ku yidhi, Dadka oo dhammu hadalkan ma wada aqbali karaan, kuwii la siiyey mooyaane. 12 Waayo,
waxaa jira bohommo sidaas kaga dhashay uurkii hooyadood, oo waxaa jira bohommo dadku dhufaanay, oo waxaa jira bohommo isaga dhigay bohommo boqortooyada jannada aawadeed. Kii hadalkan aqbali karaa, ha aqbalo."

Kiniisaddii hore arimahan way ku cuslayeen oo waxey isku deyeen in ayba ka leexdaan. Nimanka sida Augustine, Jerome iyo Tertullian, oo ahayeen mutaclimiinta kiniisaddii hore, fikirad xun ayay ka qabeen guurka. Fikiraddooda waxaa sal u ahaa fikrad uu nin Griig ah oo filosofiga ku dhereeyey uu guurka ka haystay. Sidaa daraaddeed kulligoodba way ka soo hor jedeen wax guurka ama galmada ku saabsan. Kiniisaddii hore waxey qabbi jirtay ma *monasterires* la oo ay dadka ku dhaartay intaanay guursan doonin ay degaan. Tertullian ninka la yidhaahdo wuxuu naagtiisa ku amray intaanay guursanin nin kale hadduu iyada ka hor dhinto. Wuxuu u arkay in ay

taasi tahay mid Ilaahnimada ka soo horjeedda. Isla fikiraddaas ayaa kiniisadda soo gashay oo waxaa la go'aamiyey in ay kuwa doonaya in ay wacdiyaan oo ay wadaadda noqdaan doonaya aanay guursanin – waana fikiradda maanta ay mid ka mid ah madhabyada adduunka mid ugu weyn ay hasytaan oo la yidhaado *celibacy of the clergy* taa oo 'guur la'aanta wadaaddada' lagu fasiri karo. Laakiin waxyaalahan oo dhan waxey ahayeen wax uusan Baybalka inaba taageraynin. Bawlos wuxuu sheegay in ka reebidda dadka guurka laga reebaya ay la mid tahay wax baridda jinniyada sida ku dhiga 1 Timoteyos 4:1-3. Uma wanaagsana inuu ninka guur la'aan ahaado.

# Guur

***Cutubka 11aad***

(Bilowgii 2:18-25)

1. Sida aan horay u idhayba **guurku waa caadi waana shey u wanaagsan dadka intooda badan**. Markii naagta loo keenay ninkii farxad buu la baroortay. Ninkiina wuxuu yidhi, '*Tanu hadda…'* waxey aheyd wax uu aad u sugayay! Oo wuxuu haddana ku daray uu yidhi, '*Waa laf ka mid ah lafahayga, iyo hilib ka mid ah hilibkayga'* (2:23). Markuu xayawaanada oo dhan eegay wuxuu fahmay inuu ugu dambaysta uu helay wuxuu muddo dheer hawaysna.

Waxaan arkayna inaanan nin kale la uumin (2:23)! Ninka wuxuu u baahnaa naag. Aadankan aan dembaabin ma ahayn qaniis.

1 Korintos cutubka 7aad waa wax ay muhim tahay inaan ka fikirno waayo, maraha qaarkood waxey u egtahay in ay macnayn kale leedahay. Runtii Bawlos wuu qiima tiray guurka sida ay dadka qaarkood maraha qaarkood yidhaahdaanba. Maya ma ahan sidaa. 1 Korintos cutubka toddobaad waa in lagu fasiraa aayadda 26aad. Dhib aad u weyn ayaa wakhtigaasi ka jiray magaalada Korintos. Bawlos wuxuu dadaka marxaladdaasi ku jiray u sheegayay in aynan u wanaagsanayn in ay guur samayaan iyagoo marxaladdaas ku jira ilawse kuwii doonaya in ay guursadaan ama la guursado lagama hor istaagin. Fahan kala duwanaanshada u dhaxaysa 1

Korintos 7:39-40 iyo 1 Timoteyos 5:14. Tan ugu horaysa waxey ku timid marxalad Bawlos aad u murugaysay; tan labaad waa talla caadi ah uu Bawlos isagoo ku cuslaynaya Bilowgii iyo hadiyaddii guurka uu horay Ilaah jiinsiga baniaadmiga siiyey. Guurka waa caadi waana shey ay dadka badidood ka maarmin.

**2. Guurka Ilaah baa caleemo saaray.** Bilowgii 2:24 waxey ka sheekeynaysa wax uu Ilaah sharciyeyey. Guurka ma ahan wax uu baniaadmiga abaabulanaya ama ay heshiis ka samaynayaan. Ma ahan wax lama filan iskiiga dhacaya.

**3. Guurka waa hadiyad aan ku helnay nimcada Ilaah.** Ilaah wuxuu hurdo culus ku riday Aadan markuu Xaawa diyaarin ayay. Sida ay Baybalka meel kaga dhigantahayba (eeg Bilowgii 15:12) tani waa hab lagu xoogaynaya nimcada Ilaah. Ma jirin wax uu Aadan samayn lahaa si uu hadiyaddan Ilaah uga helo. Intuu shuqulkaas socday Aadan ismaba ogayn oo hurdo culus ayuu ku jiray. Nimcada Ilaah ayaan ku guursana oo nimcada Ilaah ayaan gefkeena kaga badbaadi karna! Xaawa waxey aheyd uun cuseb (2:21), oo Ilaah ayaa iyada u geeyey Aadan (2:22).

**4. Waan fahmi karnaa sida uu xiriirkaasi u jilecsan yahay.** Waxey Aadan u aheyd wax uu ku farxo (2:23). Wuxuu ahaa kani xiriir ay

labadoodu aad iskiiga dhowayeen waxa la uumay oo dhan (2:25). Nin Mathew Henry la yidhaahdo ayaa fikirad ka bixiyey arintaan oo wuxuu yidhi, "Xaawa lagama uumin madaxiisa si ay isaga u xukunto, lagamana uumin cagahiisa hoostooda si uusan ugu tumanin iyada laakiin waxey ka soo baxday feertiisa si ay isaga ula sinnaato, shafqashiisa ugu jirto si uu u difaaco iyo weliba wadnahiisa agtiisa si uu jacayl u siiyo iyada." Xaawa waxaa laga uumay feerta Aadan. Wakhtigaas wixii ka bilowddayna ninka kaamil ma ahan hadduusan naag lahayn; naagtuna way cidlaysan tahay haddaanay nin lahayn. Aayadaha 1 Korintos 11:7-9 waxey u doodayaan inuu ninka noqdo mid loo aqoonsan yahay hogaamiyenimada. Waxaa tan saldhig looga dhiggay Bilowgii 2:21-22. Naagta waxaa loo keenay in ay ninka ka caawiso hawshii uu Ilaah u dhiibay (2:20). Haddaba halkan waxaan ka arkayna in ay naagta tahay sharafta ninka. 1 Timoteyos 2:13-14 ayaa ka hadlaysa isla fikiraddan.

**5. Guurka waa shey loogu tallagalay baniaamiga oo dhan e ma ahan wax dad qaas ah loogu tallagalay.** Ma ahan cibadaysi ilawse waa wax uu Ilaah uumay uuna caleemo saaray. Ma ahan wax badbaadada ku xiran laakiin waxey ka mid tahay waxyaalaha uu Ilaah uumay. Waa wax naxariista guud e Ilaah ku yimid e ma ahan wax ku yimid nicada badbaadada Ilaah. Ma ahan sida (tusaaleh ahaan) baabtiiska biyaha.

Baabtiiska biyaha kiniisadda ayaa loogu tallagalay; waana wax kuwa badbaaday ay sameyaan. Waan inaad badbaaddid intaanan lagu biyo gelinin. Dadka aanan badbaadinse way guursan karaan waayo, badbaadada iyo guurka iskuma xirno. Qof aanan Ilaah aaminsanayn hadduu badbaado waa in la baabtiiso laakiin hadduu mid aanan Ilaah aaminsanayn soo badbaado ma ahan inuu mar labaad Kiniisadda ku guursado. Taasi kama dhigayso guurkiisa mid dhab ah. Waxaa jiraan kuwa aanan Masixiin ahayn oo laakiin guurkooda uu ka wanaagsan yahay kuwa Masixiinta ah.

**6. Guurka uu Ilaah jecayl yahay waa kan hal nin iyo hal naag ay isqabaan.** Labadaasi waxaa laga sheegay Bilowgii 2:25. Naago badan guursashada waxey timid uun kaddib markuu gefka askunmay. Waxey aheyd wax ka mid ahaa qurunkii uu jiinsiga baniaadmiga galay (Bilowgii 4:19). Ninka ugu horayay (Lamek) e naaga badan guursaday wuxuu ahaa wuxuu ahaa mid aanan alla ka cabsasho lahayn (4:23).

**7. Guurka waxaa loogu tallagalay inuu aasaaso qoys xor ah** (2:24). Cunug qaangaaray ayaa qoys aasaasanaya. Ninka wuxuu ka tegaya aabbihiis iyo hooyadiis. Qoyska aan ka arkayno Bilowgii 2 waa qoys kooban e ma ahan mid ay awowayaal, adeero, abtiyaal iyo wixii la mid ah ay ka tirsan yihiin laakiin waa mid carruur, aabba iyo hooyo ka tirsan. Labada isqaba ayaa iskiiga

kay dhaw reeraha ay dhasheen. Xafladda caruusadda lagu bixiyo waa mid aad muhim u ah oo macna dheraad ah ayaa ku jira.

**8. Guurka waa shey ummadda horteeda lagu sameeyo e ma ahan sir (gudbo sir).** Ma ahan uun xiriir galma sir ah lagu samaynaya. Waa arin aad muhim u ah oo dadka hortooda lagu aasaasaya si ay ninka iyo naagta isguursanayaan ay iskiiga ballan qadaan in ay safarka ay bilabeen ay asturi doonaan.

**9. Guurka waxaa loogu talla galay inuu ahaado mid waara.** Ninka wuxuu ku dhegaya naagtiisa. Tani micnaheedu waa in ay aaminimo lahadaan, wada noolaansho joogta ah lahadaan, waa in ay isasharfaan. Ninka waa inuu hawshiisa ka soo baxo taa oo ah inuu naagtiisu asturo iyada oo uusan naagga kale la socon. Waa in ay dheef iyo dheef la’aanba iisu adkaystaan (Efesos 5:29).

**10. Guurka wuxuu aasaasaya xiriir hal jidh lagu noqonaya.** Arintaan waa mid aad u culus oo aan la fahmi karin. Bawlos wuxuu ugu yeedhay sirta ugu weyn (Efesos 5:31). Markii nin iyo naag layskugu darro guurka waxey bilaabaysa midnimo la yaab leh oo layskuugu keenaya dabiicado kala duwan in ay meel dhedhexaad ah dabiicad cuseb kaga dhaliyaan. Waa laba ruux laakiin waa hal jidh. Waana sababta xiriir galmada lagu yeesho uu u yahay mid aad u qoto dheer. Ma ahan in sahal loo qaato

(1 Korintos 6:16 ayaan ka heleyna sida uu arintaan Bawlos u istecmaalay). Waxaa dhallanaya xiriir xoog badan oo hal ujeeddo leh oo wax kasta lagu wada xiriiraya. Sababtaas daraaddeed ayay u wanaagsan tahay in ay labada isguursanaya ay noqdan kuwa qumati iisu jeclaadeen oo aan galma oo keliya iskuugu imaanin laakiin in ay noolosha oo dhan wada wadaagaan. Guursashada waxey u baahan tahay xigmad.

**11. Guurka waa kaamil xataa haddii ay Caarruur ka dhallan.** Carruur lagama sheegin Bilowgii cutubka 2aad. Guurka waa kaamil haddii ay carruur ka dhashaan iyo haddii kaleba! Sababtaan daraaddeed ayay qalad u tahay in ay dadka isfuraan madaama uuna guurkooda carruur helin (sida ka dhacdo bulshooyin badan e adduunka ka tirsan). Tan waxey haddana na tusin aysa in ay dawooyinka dhalmada lagu maamulo ay Masixiinta u habboontahay. Galmada ma ahan uun in loo sameeyo si carruur loo helo. Guurka waa kaamil xataa haddaanay natiijadiisa carruur noqon. Hal jidh noqoshada ma ahan wax guurka carruur la’aanta ah lagu baabi’in karo.

# Maska

***Cutubka 12aad***

(Bilowgii 3:1)

Bilowgii cutubka 3aad wuxuu ka tirsan yahay cutubada Baybalka ugu qiimaha badan. Cutubkan wuxuu na siinaya qayb ka tirsan jawaabaha aan uga baahannahay su'aalada aan weydin karno sida: gefka xagee buu naga soo galay? Waa sheeko si sahlan noogu sheegeysa taarikhda sida uu baniaadmiga Ilaah ugu caasiyey una noqday mid iin leh. Waxey jawaab saxan u tahay su'aasha ah: waa maxay sababta uu baniaadmiga badbaadada ugu baahan yahay? Halkan waxaan arkeyna in ay wax kastoo ay sheekadan tilmaameyso sheeko sawir nagu beereyso ku imaneyso. Waxaan arkayna maska oo hadlaya, waxaa kale oo noo muuqata inuu geedka yahay kan lagu garan karo halka uu jiinsiga baniaadmiga ku dambeyn doono, waxaan arkeyna Ilaah oo beerta dhex socdo, waxaa jira geed kale oo baniaadmiga siinaya noolol aanan dhamaad laheyn. Bilowgii 1-11 waa sheeko carruureed ay masaalo ku jiraan. Laba arimood ayaa halkan ku jira oo aan xoogga saaraya, **arintu waa sheeko.** Waana **sheeko carruureed oo hab dhismeydkeeda nooc masaalo carruurta wax looga dhaadhiciyo lagu sharaxay**. Masaska ma hadlaan, waxaanna ka fahmi karna Axdiga cuseb in maska Bilowgii cutubka saddexaad laga sheegayo uu yahay uun masaal. Laakiin sida sheekada looga sheegay waa mas dhab ah. Bilowgii 3:1 waxey leedahay,

*'Haddaba **abeesadu way ugu khiyaano badnayd bahal kasta e duurka jooga** oo Rabbiga Ilaah ahu sameeyey oo waxey naagtii ku tidhi Ilaah miyuu idinku yidhi , waa in aydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal?*

Hase ahaatee, sheekada oo dhanba waxey ka sheekeyneysa wax ka duwan maska. Buugga Muujintii haddaan ka eegno maska waxaa loo haysta inuu sheddaan yahay! Sheeddaanka toos looguma sheekeynayo buugga Bilowgii. Waxaa naloo sheegaya qayb ka tirsan sheekada dhabta ah oo ku saabsan taarikhda baniaadmiga laakiin hab masaal ayaa lagu sheegaya. Waxey macneyneysaa waxyaalaha taarikhda leh. Ibraahim waxaa loo arkaa inuu yahay calaamad taarikheed markaan ka akhrineyno Luukos 3:38. Bilowgii 5:3; 1 Taarikhdii 1:1; 1 Korintos 15:22. Bawlos wuxuu arimahan ku sheegaya in ay yihiin dhacdooyin taarikheed sida uu uga sheegayo Rooma 5:16, 17. Waxey ka sheekeyneysa **hal marxalad**, **hal gef uu hal nin sameeyey**. Waxaa lala barbar dhigi karaya hal ficil oo Alla addeecis leh uu sameeyey hal nin – Ciise Masiix. 1 Timoteyos 2:13, 14 iyo Yooxanaa 8:44 waxey hab taarikheed u wada taabanayaan sheekada Bilowgii 3.

Haddii siba loo eego dhacdada Bilowgii cutubka 3aad waxaa lala barbar dhigi karaya tan ku taala 2 Samu'eel 12:1-4 halkaa oo dhacdo dhab ah loo sheegay sida masaal ahaan. Hase ahaatee, waxaa

ku jirta kala duwanaansho maxaa yeelay, waxba kama ogin dhacdada Bilowgii cutubka 3aad (saa ma ahan marxaladda 2 Samu'eel). Sidaa daraaddeed gefka uu baniaadmiga Ilaah u gefay waxaan ku fahmi karnaa dhacdada noogala sheegayo sheekada Ilaah na siiyey.

1. **Gefka wuxuu ka bilowday meel ka baxsan Jiinsiyadda baniaadmiga.** Wax shar ah ayaa jiray ka hore intaanay Xaawa gefka gelin iyo weliba intuusan Aadan ku deyanin iyada. Tan waxey noo macneyneysa inuu gefka la galay uusan ahayn mid ka tirsanaa noolosha baniaadmiga. Gefka ma ahayn wax ku aasaasmay ninka iyo naagta. Gefkaasi wuu jiray intaanan ninka iyo naagtuba adduunyada la keenin. Bilowgii cutubka 3aad wuxuu ku bilaabanaya sida tan, *'Haddaba **abeesadu way ugu khiyaano badnayd bahal kasta e duurka jooga** oo Rabbiga Ilaah ahu sameeyey oo waxey naagtii ku tidhi "Ilaah miyuu idinku yidhi , waa in aydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal?"'* (3:1). Eraygan waa in halkan lagu macneyo mas e ma ahan 'sheeddaan'. Maska ma ahan uun wax jarrabaadda nagu jirta masaal loogu dhigay. Mana ahan inaan u fasirno in gefka baniaadmiga uu yahay mid ku yimid xayawaan sheeddaan. Arinta halkan ugu muhimsan waxey tahay in gefka uusan ahayn wax noolosha baniaadmiga ka tirsan ama uu Ilaah ku uumay baniaamiga. Waxaa nala tartamaya mas hadlaya oo cadawga Ilaah ah oo Xaawa ku hogaamiyey gefka. Ilaah

ayaa isaga inkaaray. Maska waa xayawaan, ilawse Masixiinta waxey og yihiin inuu masaal u yahay sheeddaanka (Rooma 16:20). Erayga Ibliis laguma istecmaalin halkan. Bilowgii 3:15 waxaan arkeyna in madaxa maska la burburin doono. Tani waxey masaal ahaan macna u tahay hawsha Ciise. Haddaba sheekada Masaalka laga dhigayo waa wax jira. Dhabta badbaadada ma ahan xayawaan la burburin ayo. Habka shekooyinkan loo qoray waa hab sharxaad sheeko. Waa sida habka jannada loogu macneynayo buugga Muujintii, kaa oo aan ka arkeyno irdaha Yerusaalem (Muujintii 21:21), iyo jidad laga sameeyey dahab (Muunjintii 21:21). Waa sheeko sawir lagu sharaxayo si loo fahmo dhacdo dhab ah.

Awood sheeddaan ayaa adduunyada ku jirta. Baniaadmiga laguma uumin gefka uu galay. Geflow ahaan looma uumin isaga. Wax dabiicaddiisa iyo nooloshiisa ka baxsan ayuu gefka uga yimid. Qaybaha kale e Baybalka ka tirsan ayaa si dheeraad ah u sharaxaya marxaladdan. Maska waxaa lagu sharaxaya inuu yahay ibliis ama sheeddaan, waa uun u dhaqma sida libaaxa oo shaqadiisu ay tahay inuu dadka cabsi geliyo, oo sida maska ayuu iisu bedelaya ama waa laba wejiile waana benaale.

Waa farxad dhan inaan ogaano inuu gefka ahayn wax baniaadmiga markii la uumayey lagu uumay. Haddaanan markii hore e nala uumayba aanan

gef nagula uumin, haddaba waa suurtagal inaan ahano kuwa aanan iin lahayn, markii badbaadada Ilaah ay sharaftiisa ku buuxsanto.

**Sheeddaanka waa wax jira.** Waa muhim inaan fikirad ballaaran lahaano markaan sheeddaanka ka hadleyno. Dadka qaarkiis aad bey sayniska xoogga u saarayaan oo ma aaminsano inuu sheeddaan jiro. Qaar kalena sheeddaanka aad buu maskaxddooda u qabsaday oo habbeen iyo maalinba sheeddaan unbay ka hadlayan. Aad bey suurtagal u tahay inuu qof akhriyo cutubka dhan oo Baybalka ka tirsan, uusanna arkin meel sheeddaan looga hadlayo ma laga magacaabayo. Ma ahan inaan waxyaalaha xunxun e aan noolosha kala kulano oo keliya ku fikirno. Ma ahan inaan sheeddaanka hawlihiisa aan mar kastaba ka hadalno, ilawse ma ahan inaan ilawno inuu sheeddaanka run yahay.

# Ibliiska iyo habkuu ku shaqeeyo

***Cutubka 13aad***

(Bilowgii 3:1)

**2. Tix geli dabiicadda sheeddaanka.** In kastoo aanan isaga qiimeyneynin, waa inaan ogaano wuxuu u eg yahay iyo habkuu ku shaqeyo.

**Sheeddaanka waa awood badan yahay.** Isagu waa dhiiran yahay. Maska ma uusan ka cabsanin inuu fara geliyo noolosha Xaawa oo wuxuu qaribay uunkii suubbanaa e Ilaah. Sheeddaanka awood buu leeyahay laakiin awooddiisa ma gaareyso tan Ilaah waxaana isaga xukumaya Ilaah. Wuu nagu soo xadgudbbi karaya. Wuu na jarrabaya. Adduunyada xiriir buu la leeyahay sida aad uga akhrin kartid aayadahan Baybalka, 1 Yooxanaa 5:19; Yooxanaa 12:31; 14:30; 2 Korintos 4:4; 1 Butros 5:8; Efesos 2:2.

**Dabiicadda sheeddaanka waxaa lagu tilmaami karaya in ay tahay mid shar ah.** Wuu naceybyahay Ilaah. Wuu naceybyahay runta Ilaah, wuuna naceybyahay uunka Ilaah. Maalmahan dambe wuxuu naceybyahay Kiniisadda Ilaah. Ibliiska shaqadiisa waa uun inuu raadiyo uu burburiyo wax alla wuxuu Ilaah sameeyo. Wuxuu doonaya inuu jiinsiga baniaadmiga baabi’iyo wuxuuna ku baabi’inaya

jarrabaad uu ninka iyo naagta uu jacleysinaya iney ku caasinta Ilaah jecladaan. Ibliiska wax dan ah uu naga leeyahay ma leh; wuxuuse doonaya inuu shaqada Ilaah burburiyo. Xayawaanada iyo malaa'igaha wax dan ah uu ka leeyahay ma leh laakiin wuxuu dhandhaansanaya uun baniaadmiga. Waxba kama rabbo uunka kale e aan aragnay uu Ilaah uumay, haddii uu uunka fara geliyana dantiisa waa uun inuu sidaas baniaadmiga ku farageliyo.

**Sheeddaanka waa beenaale.** Wuuu is bedelaya oo wuxuu u ekaani karaya malaa'igta iftiinka (2 Korintos 11:13, 14). Way adagtahay si mas loo arko markuu hoyggiisa joogo. Maska wuu midab bedelasho badan yahay. Waa sidaa sida uu Xaawa ugu yimid. Wuxuu iska dhigay mid wax wanaagsan Xaawa la jaceyl oo la talin wanaagsan siinaya.

**Sheeddaanka waa layska xajin karaya.** Tan waa farriinta ugu wanaagsan e aan sheeddaanka dabbiicaddiisa ka baran karno. Sheeddaanka waa layska xajin karaya! Iska xaji sheeddaanka wuuna kaa carari doona e.

Waxaan weydin karna su'aasha, 'sheeddaanka xaggee buu ka yimid?' ma jiro qof sheegi karo halka dhabta ah uu sheeddaanka ka yimid. Waxaanse hubnaa inuu Ilaah uumin uun sharlaawe ah. Waxaa kale oo aan hubnaa in ay jirin wax adduunkan ku jira uu Ilaah uumin.

Sidaa daraaddeed waxaan odhan karnaa sheeddaanka wanaag ayaa lagu uumay laakiin wakhti dambe ayuu sharlaawe noqday.

Maraha qaarkood Yexeesqel 28:11-19 waxaa loo fasira in ay ka hadleyso sheeddaanka. Dhabtii arintaan waxey ka hadleysa boqorka Turos laakiin waxey u ekaan karta fasiraad la bunbuuniyey haddii aan ku koobno oo keliya wax ku saabsan boqorka Turos. Boqorkan sharlawga ah waxaa la sheegaya inuu ahaa mid xaq ah (Yexeesqel 28:12), wuxuu ahaa mid ku noolaa beerta Ceeden (Yexeesqel 28:13), wuxuu ahaa malaa'ig (Yexeesqel 28:14). Markuu kibray ayaa jagadii uu xagga Ilaah ka haystay laga soo dejiyey (Yexesqeel 28:17). Dadka qaarkiis waxey u fahmaan in ay tani tahay hooska sida uu sheeddaanka kaga soo degay jannada. Way saxsanaan karaan dadka fikiraddaan qaba (eeg Ishacyaah 14:12, 13. Aayadaha kale e isla arintaan ka hadlayan waxaa ka mid ah; 1 Timoteyos 3:6; Yooxanaa 8:44; Muujintii 12:4, 7).

**3. Sheeddaanka wuxuu ninka iyo naagta ka weerara dabiicadaha ay ku fududyihiin.**
*'abeesadu way ugu khiyaano badnayd… oo waxey naagtii ku tidhi…'*. Ilaah wuxuu uumay ninka oo shaqa ayuu ka hayey beerta Ilaah. Naagta gadaal ayaa laga uumay waxaana loo uumay in ay ninka caawiye la siman u noqoto. Way ka saraysay xayawaanada oo dhan. Ma jirin

xayawaan ninka wehel u noqon lahaa sida naagta. Xaawa waxey Aadan u aheyd wehliye isaga la mid ah oo kala siman u ekaanta Ilaah. Feertiisa ayey aheyd oo sidaa daraaddeed iyada waxey ka sameysneyd isla wixii Aadan laga sameeyey. Maska naagta oo keliya ayuu la hadlay. Naagta markay ninkeeda ka ag dhoweyn dabiicaddeeda rasmiga ah kuma jireyso.

Sheeddaanka wuxuu jarrabay Xaawa e ma ahan Aadan (eeg 2 Korintos 11:3; 1 Timoteyos 2:12, 13). Madaama Aadan uu ahaa madaxa Xaawa, sheeddaanka wuxuu reerka ku soo galay kan ugu amarka yar weliba qaas ahaan xaaladdan markay noqoto. Ma ahan inaan leeyahay naagta way ka amar yartay ninka mar kasta markuu sheeddaanka jarrabaad kenayo; waxa aan ka wado waxey tahay iney dabiicaddeeda ay nuglaaneyso ama aany waxyaala culus iska xajin karin markuu dhib la soo gudboonaado oo waxey sameyneysa ficilo aanay ka fiirsanin ama aanay ka fikirin ninkeeda. Ma ahan inaan dumarka ka soo hor jeedo. Taarikhadii la soo dhaafay waxaan ogsoonnahay in dumarka aad loo yasi jiray oo ma doonayi inaan fikirad dumarka lagu yasayo gacan siiyo. Hase ahaatee, sheeddaanka wuxuu Xaawa ku beeray in ay go’aan gaarto iyadoo aanan Aadan la tashanin, sababta uu sheeddaanka ugu guuleystayna waxey aheyd wuxuu ogaa habka ama halka ay dabiicaddeeda dhaqso kaga damqaneyso. Raggu miyey dumarka ka xigmad badan yihiin? Maya, raggu kama xigmad badno

dumarka! Laakiin haddii ay naagta ku dhaqmin doonista Ilaah waxey noqoneysa mid sheeddaanka u nugul uu siduu rabbo ugu hogaamin ayo. Runtii wax culeys ah kuma jiraan inaan fasirno erayada Bawlos markuu leeyahay, *'Aadanna lama khiyaanayn, laakiin naagtii baa inta la khiyaaneeyey waxey noqotay mid xadgudubtay'* (1 Timoteyos 2:14).

4. **Maska wuxuu khalkhal geliyaa erayga Ilaah.** Wax alla wuxuu sameeyo oo dhan waa uun macaaradnimo uu erayga Ilaah kaga soo horjeedo. Halkan Bilawgi cutubka 3aad wuxuu istecmaalay **shaki** (*Ilaah miyuu idinku yidhi…?').* oo wuxuu istecmaalay qaloocin uu **erayga Ilaah qaloocin ayo,** maxaa yeelay, wuxuu halkan ka keenaya fikiradda ah in ay Xaawa ka cunin geed kastoo ku yaala beerta, laakiin Ilaah wuu u fasaxay Xaawa in ay wax ka cunto geed kastoo beerta ku yaalo oo dhan wixii aan ka ahayn hal geed oo qaas ah – Bilowgii 2:16, 17! Wuxuu haddana istecmaalaya diidmo uu ku inkiraya wuxuu Ilaah caddeeyey isagoo leh, (*'Ma dhiman doontaan')* sida ku dhigan Bilowgii 3:4. Erayga Ilaah waa cadawgga ugu weyn e Ibliiska. Ibliiska wuxuu jaceyl yahay inuu dadka shaki kaga beera runta uu Ilaah Eraygiisa nagula hadlayo ujeeddadiisana waxey tahay inuu dariiqa saxda ah e Ilaah naga leexiyo. Waa isla habkii uu ku jarrabay Ciise. Haddana markuu mar labaad jarrabayey Aadankii labaad kaa oo ah Rabbigeena Ciise Masiix, wuxuu doonayey inuu

shaki kaga dhaliyo runta jirta e Erayga Ilaah ku saabsan (***Haddaad** tahay wiilka Ilaah…’*, Luukos 4:3). Haddana wuxuu qalooociyey Erayga Ilaah (*halkan hoos iskaga tuur…waayo, waa qoran tahay…’*, Luukos 4:9, 10). Sheeddaanka wuxuu istecmaalay khiyaano (*Amarkan oo dhan waan ku siin ayaa iyo ammaantoodaba, waayo, waa lay siiyey…’*, Luukos 4:6).

Isla sidaan buu sheeddaanka Kiniisadaha ku jarrabaya uuna ku burburinaya. Wuxuu isku deyaya inuu dareenkeena oo dhan ka leexiyo dhinacuu Erayga Ilaah nagu hogaamin ayo. Adduunyada aan maanta ku noolnahay waxaan arkayna inuu sheeddaanka baniaadmiga ka dhaadhicin ayo in ay aqligooda iyo xigmaddooda ku heli karaan runta Ilaah. Sheeddaanka kuwa badanuu duufsaday uuna ka dhaadhiciyey in ay aqligooda istecmalaan oo ay xaliyaan dhibatooyinka iyo murugada adduunka ka taagan. Wuxuu Kiniisadda ka dhaadhicinaya in ay iska ilowdo Erayga Ilaah oo ay u jeesato waxyaalaha ‘farxadda leh’ oo ummadda wax lagu fahansin karo. Wuxuu ummadda ka dhaadhicinaya inuu Erayga Ilaah uusan noqoneynin mid wax lagu fahmi karo. Waxaa kaloo uu ummadda ku habsaaminaya in aynan wax barridda saxda ah waxba xoogga saarin maxaa yeelay, waxyaalaha adduunka aqliga baniaadmiga ayaa lagu xalin karaya oo Erayga Ilaah looma baahno. Macnaha arinta oo dhan waxey u muuqata inuu sheeddaanka adduunayada kula talin ayo ineynan

macna lahayn inaan hogaaminta Ilaah raacno. Ilaahay hanaga dembi dhaafo taasi haddii aan ka mid nahay kuwa adduunayada raacay oo doonista iyo hogaaminta sharafta leh e Ilaah ka goosteen. Kiniisadaha wey yaaban yihiin oo waxey wax muujin ah ka sugayan Ruuxa qoduuska ah e Ilaah laakiin ma haystaan waxey ku caddayn karaan in waxyaalaha u muuqda ay yihiin wax xagga Ilaah ka yimid iyo in kale. Sida keliya oo lagu ogaani karona waa uun markii Eraygiisa la akhristo waayo, waa sheyga aan wax kasta ku cabireyno. Erayga la'aantiis ma ogaani karno in waxyaalaha Ruuxa ay runtii yihiin wax xagga Ruuxa ka yimid. Qaar waxey istecmaalayaan hab maamulka beecsharada oo ay koolijyada iyo skoolada ka soo barteen iyo siraha kale e kuwa beecmushtariga ah ay istecmalayaan. Laakiin waxyaalahan oo dhan wax macna ah oo ay kiniisadda u leeyihiin ma jirto haddii ay jirtana waa qayb yar boqolkiiba. Kiniisadda kuma shaqayso sida ay dadka u malaynayaan in ay waajib ku tahay in ay ku shaqayso. Sheeddaanka doonistiisa waa inuu naga leexiyo doonista iyo hogaaminta Ilaah iyo sida aan ku maqli lahayn codka Ilaah. Sida aan doonista sheeddaanka ku inkiri karno waa annagoo diidna la talintiisa oo ku noqono inaan maqalno codka xagga Ilaah nooga imaanaya. Codka Ilaah waxaan ku maqli karnaa Eraygiisa oo aan akhrino. Waxa aan Baybalka ka akhrin aynana waa inaan eegna in ay jiraan aayado kale oo gacan siinaya waxyaalahaasi. Waa uun markaan dhiiranaan ku

leenahay ‘way qorantahay!’ marka aan sheeddaanka ka guulaysan karno oo aan boqortooyadiisa dudumin karno si aan boqortooyada Ilaah u dhisno.

# Khiyaanada Ibliiska iyo sida looga guuleysan karo

***Cutubka 14aad***
(Bilowgii 3:2-5)

Ibliiska wuxuu jaceyl yahay inuu Ilaah masabbido, wuxuu dadka shaki ka gelinaya isku haleynta Ilaah, wuxuu shaki naga gelinaya xaqnimada Ilaah (3:4). Wuxuu doonaya inuu naga dhaadhiciyo inuu Ilaah yahay mid daran oo sharciyo adag noo dejiya. Runtii waa gefka iyo sheeddaanka kuwa aad noogu daran markii la eego noolosheena. Sheekadu way socota oo waxaa qoran, *'2 Naagtiina waxey abeesadii ku tidhi, Midhaha geedaha beerta waannu cuni karnaa; 3 laakiinse midhaha geedka beerta dhexdeeda ku yaal, Ilaah wuxuu nagu yidhi, Waa in aydnaan waxba ka cunin, ama aydnaan taaban, yaydnaan dhimanine. 4 Abeesadiina waxey naagtii ku tidhi, Ma dhiman doontaan; 5 waayo, Ilaah wuxuu og yahay in maalinta aad cuntaan ay indhihiinnu furmi doonaan, oo aad noqon doontaan sida Ilaah oo kale, idinkoo kala garanaya wanaagga iyo xumaanta' (*Bilowgii 3:2-5).

Ha ilowbin inaad tixgelisid **ujedooyinka sharlaawaha** (Bilowgii 3:1-6). Isagu wuxuu doonaya inuu naga dhigo kuwa ku socda noolol aan Ilaah aqoonsanayn oo wuxuu doonaya oo keliya inaan isaga sareysino oo aan tiisa oo keliya

raacno. Marxalad kastoo ay ahaataba isagu ujeeddadiisa waa inuu baniaadmiga Ilaah ka fogeeyo, oo wuxuu doonaya inuu isaga ahaado kan carshiga ku fadhiya si isagoo naftiisa Ilaah ah. Wuxuu doonaya inuu naga ag fogeeyo Ilaaheena noo ah halka ay xigmadda iyo garashada ka soo askumato. Halkan waxaan ka aragnay inuu Xaawa Ilaah ka agfogeynayo si aanay Ilaah ugu tiirsanin isagoo ah kan wax kasta yaqaana oo wax alla wixii la doonayo in la barto isagaa yaqaana. Sheeddaanka wuxuu u hadlaya si isagoo ah kan wax kasta yaqaana Ilaahna ka badiya. Wuxuu doonaya inuu Xaawa ka fogeeyo Erayga Ilaah oo ah aasaaska garasha kastoo laga fikiro, wuuna bedelay muujinta Ilaah isagoo iska dhigaya inuu yahay kan ay garashada oo dhan ka soo askumato.

Wuxuu doonaya **inuu Ilaaheena ah kan amar kasta iska leh naga ag fogeeyo**. Wuxuu u ficiltamaya sida mid amar uu ku hadlo haya oo wuxuu iska dhigaya mid noo kala saaraya waxa san iyo waxa sharka ah. Wuu inkiraya in sinaba aan Ilaah loo fahmin inuu yahay kan amarka oo dhan iska leh oo aad buu isugu kalsoon yahay markuu waxyaalahan jaha wareerka ah sameynayo.

Wuxuu doonaya inuu naga ag fogeeyo Ilaaha **ah kan dariiqa saxda ah nagu hogaamin ayo.** Wuxu Xaawa kula talinaya hab kaloo cuseb oo

ay ku noolan karto oo ka duwan habka uu Ilaah iyada kula hadlay.

Wuxuu doonaya inuu naga ag fogeeyo Ilaaheena ah **kan mustaqbalkeena gacanta ku haya.** Haddii ay Xaawa cunto midhta geedka beerta bartamaheeda ku yaalo, Ilaah wuu sheegay wuxuu mustaqbalkeeda ahaan lahaa. *'Waad dhiman doontaa'.* Sheeddaanka fikiradda oo dhan wuu geddiyey oo wuxuu Xaawa ku yidhi, *'Ma dhiman doontaan'.* Ilaah ayaa hogaamiya mustaqbalkeena iskana leh awood kastoo uu noogu sheego waxa mustaqbalkeena ka dhici doono. Sheeddaanka wuxuu doonaya inuu naga fogeeyo hogaaminta uu Ilaaheena mustaqbalkeena ku hogaamin lahaa waddada xaqa ah. Wuxuu iska dhigaya mid fahamsan mustaqbalkeena fikiraddiisana waa mid ka duwan wuxuu Ilaah nagu yidhi ama naga ballan qaaday.

Wuxuu doonaya inuu naga ag fogeeyo Ilaaheena ah **kan noo ah sheegaha waxa uu istareexa yahay iyo waxa lagu istareexo.** Wuxuu noo sheegaya in ay noolol wanaagsani jirto intaan isaga addeeceyno. Sheeddaanka wuxuu Xaawa, nimanka iyo naagaha adduunkan kula talinaya in ay noolosha ugu istareexa badan tahay tan Ilaah lagu caasiyo oo la sameeyo waxyaalaha damaca jidhka ku yimaado. Dhabtii Baybalka wuxuu sheegaya in gacanta midigta ah e Ilaah ay noogu jiraan noocya badan oo istareexeena loogu talagalay. Maraha qaarkood waxaan u

maleyneyna in ay sharciyada Ilaah aad u adadag yihiin oo ay naga reebayaan waxyaalaha aan adduunka kaga istareexi laheyn. Sheeddaanka wuxuu nagula talinaya inuu jiro istareex fara badan haddii aan doonistiisa yeelno. Taasina waxey noo sheegeysa uun inaan waddadiisa beenta ah raacno mustaqbalna ma lahaan doonno – isagu waa khiyaanalaw. Sheeddaanka wuxuu nagu leeyahay, wax kasta waan ku siinaya haddii…wuxuuna nooga dhigaya in ay noolosha adduunayada ugu habbooni ay tahay tan lagu caasiyo Ilaah.

Wuxuu doonaya inuu naga ag fogeeyo **Ilaaheena ah kan ay nagu waajib tahay inaan caabudno.** Wuxuu sheegaya in ay Aadan iyo Xaawa ahaan doonaan sida Ilaah haddii ay isaga racaan. Fikiradda uu halkan sheeddaanka doonayo inuu ummadda Ilaah ka dhaadhiciyo waxey tahay inuu Ilaah ahaani doono mid laga maarmo oo mar dambe Ilaah ma ahaan doono mid ay adduunyada xukunkiisa hoos joogto. Dadka ayaa ilaahyo iisu noqonayaan. Mar dambe Ilaah looma caabudi doono Ilaahnimo. Qof kasta ilaah buu iisu ahaanaya.

Ilaa maantadan sheeddaanka waa beenaale oo isla beentii hore unbuu weli dadka u sheegaya. Maraha qaarkood wuxuu iska dhigaya waxyaala kale oo annagoo aan ogayn ayaan codkiisa macaansaneyna dhageysadkiisa. Sheeddaanka mar kastaba waa mid dadka ku jeesjeesa. Wuxuu

ka faa'ideysta markuu buuq jiro oo marxaladaha wareerka uu ka taagan yahay ayuu nagu soo galaa. Wuxuu doonaya inuu xukumo maskaxdeena, allabarigeena, dabiicaddeena, iyo waaya araggeena. Wuxuu doonaya inuu mar kastaba naga dhigo kuwa dareensan in ay iinlaaweyaal yihiin. Wuxuu doonaya inuu si joogta ah noogu hayo mugddiga.

Sheygga aan hadda u guda geleyno waa habka **khiyaanada Ibliiska looga guulaysan karo.** Sidee buu sheeddaanka ugu guuleystay inuu Xaawa jarrabaad geliyo?

**1. Iyada ayaa sheeddaanka siisay fursad uu kula sheekeysto.** Laakiin maxay tahay sababta ay saa u yeeshay? Waa gefka ugu weyn in Ibliiska haba yaraate e la siiyo fursad lagu wada sheekeysto. Maxay aheyd sababta ay wada hadalkaas u ogolaatay? Way uga jawaabtay su'aalada uu weydiyey mana jirin dan ay uga jawaabto su'aaladiisa. Maskan hadlaaya e Ilaah ka soo horjeedo ma lahan xaq uu jawaab ku helo. Masku ma ahan mid hadalo naxariis leh Xaawa kula hadlayey. Waa qalad inaan u maleyno in ay waajib nagu tahay inaan cadawyadeena mar kastaba uga jawaabno su'aalada ay na weydin ayaan. Ma ahan arin mar kastaba suurtagal ah. Waxeyna keentay in ay Xaawa sheeddaanka ka ogolaato habka uu ula hadlayey. Waxey rumaysatay oo ay ku dhaqatay habka maska uu ku dhaqmo.

**2. Way ogolaatay habka qaldan uu maska Erayga Ilaah u fasiray iyaduna si qaldan ayey Erayga Ilaah u sii fasirtay.** Waxey tidhi, *'Midhaha geedaha beerta waannu cuni karnaa…'* (Bilowgii 3:2b) Waxey u maleysay in ay Ilaah difaaci karto! Haddana waxey tidhi, *'laakiinse midhaha geedka beerta dhexdeeda ku yaal, Ilaah wuxuu nagu yidhi, waa in aydnaan waxba ka cunin, ama aydnaan taaban…'* (Bilowgii 3:3). Maya! Ilaah waxba kama sheegin taabashada geedka (waa hadal ay Xaawa ku darsatay). Xaawa waxaa ka dhaadhacday fikiraddii qaldaneyd oo aheyd inuu Ilaah xaasid yahay. Haddaba iyadu waxey noqotay mid xoojineysa fikiraddii qaldaneyd uu Ibliiska Erayga Ilaah ka qabay.

**3. Aad bey dheg u siisay hadalka Sheeddaanka.** Intuu sheeddaanka hadlayey wuxuu iyada ku yidhi, *'Ma dhiman doontaan waayo, Ilaah wuxuu og yahay in maalinta aad cuntaan ay indhihiinnu furmi doonaan oo aad noqon doontaan sida Ilaah oo kale…'*, weli Xaawa dheg bey sii siineysay markuu sheeddaanka hadalladaan ku hadlayey. Tallaaba kastoo khiyaana ah mid kaloo ka sii darran ayuu kaga gudbaya oo annaguna kuma guuleysan doonno inaan nimcaba tan kale kaga sii gudubno (2 Korintos 3:18) marba haddii aan sheeddaanka addeecno. Waxaan ku sii barbaareyna tallaababa tallaabada kale sharka inaan galno.

# Hababka uu Ibliiska nagu weeraro

***Cutubka 15aad***

(Bilowgii 3:6)

Tixgeli **hababka uu sheeddaanka dadka ku weeraro.** Xaawa waxey durbaba ku taagneyd waddada iisu dhiibista jarrabaadda markay awoodda iyo doonista Ilaah su'aashay oo ay sheeddaanka addeecday. Iyadu isla marka uu Ibliiska jarrabay durbaba waxey ku jirtay hawsha si qaldan u fasirka Erayga Ilaah (3:3b). Durbaba waxey dhageysaneysay Ibliiska oo qashqashaad baa ka galay runta Ilaah ku saabsan iyo awoodda Ilaah. Durbaba iyadu xagga maskaxda way ka maqneyd in kastoo aanay fal ahaan waxba sameynin ama aanay weli ku dhaqaaqin wixii maskaxdeeda ku jira. Bilowgii 3:6 ayaa wax ka sheegaya sida uu gefka ficilgal ku noqday.

Yacquub 1:14, 15 waxaa qoran, *'mid kasta waxaa jirraba damaciisa sharka ah isagoo la jiidanayo oo la sasabayo. Dabadeed damacu kolkuu uuraysto wuxuu dhalaa dembi, dembiguna kolkuu weynaado wuxuu keenaa dhimash'*. Tallaabooyinka aad bey uga muuqdaan gefkii ay Xaawa gashay. Waxey eegtay geedkii uu maska uga sheekeyey. Waxaa soo jiitay quruxda midhta geedka ku taalay damaceedana wuu jeclaystay oo way is dhiibtay. Damaceedi ayaa dhallay ficilka

gefka. Natiijada waa mid aad u xun, waana dhimasho xagga ruuxa looga dhimanaya weligeed. Mar dhaw waa laga fiijin doona jannada Ilaahna way ka fogaan doontaa.

Gefka wuxuu istecmala saddex walxood markuu jirrabaadda na gelinaya. Ugu horaynta waxaa jirtaa **damaca jidhka.** Hal hab uu sheeddaanka gefka nagu geliyo waa muuqaalka waxyaalaha la arki karo. Bilowgii 3:6 waxaa qoran, *'Oo markii naagtii aragtay in geedkii cunto ku wanaagsan yahay, oo indhaha u roon yahay, oo uu yahay geed loo doonayo in caqli lagu yeesho, ayay midho ka qaadatay, oo cuntay; ninkeedii la joogayna wax bey ka siisay, oo isagiina wuu cunay'.*

Waxyaalaha Xaawa gefka geliyey waxaa ka mid ahaa hunguri weyni ay cunto u qabtay. Jidhkeena ayaa noo jiidanaya gefka aan galno waayo, wixii la jeclaado waa la damcaa. Waxyaala badan ayaa jiraan uu jidhka jecayl yahay, jecaylka nafaska loo qabo, jecaylka wax matarenimada, ciirnimada, u hunguriweynida damaca istareexa jidhka, jecaylka galmada. Waxyaalahan iyo kuwa kale ayaa ka mid ah kuwa gefka na gelin ayaan. Naagta waxey aragtay in ay midhta cunto u roontahay. Gaajadeeda ayey xal u aheyd, dhadhenka nuurista nafaqada jidhkeeda uu u baahnaa ayey heshay.

Midda labaad waxaa jirta **damaca isha.** Awoodda aragga aad buu u weyn yahay oo wuxuu noo jiidan karaya xagga gefka. Dareenka aragga ayaa ka awood badan dareemada kale e jidhkeena ku jiraan. Erayga Ilaah wuxuu sheegaya in ay Xaawa tidhi, ***''Oo markii naagtii aragtay in geedkii cunto ku wanaagsan yahay, oo indhaha u roon yahay…'.*** Damaca aan damceyno waxyaalaha aan jaceylnahay waxaa sii xoojinaya aragga aan sheygaas arkeyno. Markaan wax isheena ku aragno waxaa jira damac dheeraad ah oo nagu kordhayo. Damaca fikirka ku yimaada wuu sii kordhaya haddiiba wixii laga fikirayey oo la damacsanaa isha la saaro. Midhta waxey aheyd wax indhaha u roon. Ficilka gefka wuxuu Xaawa ku beermay markay indhaha saartay wixii la damacsiiyey. Tan waa mid mar kasta na qabsata. Gefka wuxuu inta badan na soo galaa markaan wax qoonsano. Erayga Ilaah wuxuu leeyahay, *'Markuu arkay sangeliskii, iyo dugaagadihii gacmihii walaashii ku jiray…'* (Bilowgii 24:30), Liibaan wuxuu ka fikirayay siduu maskaxda uga qabsan lahaan addoonka Ibraahim. Cakaan wuxuu yidhi, *'…sida runta ah waxaan ku dembaabay Rabbiga ah Ilaaha reer binub Israa'iil oo waxaan sameeyey sidaas iyo sidaas markaan alaabtii boolida aheyd ku dhex arkay dhar wanaagsan oo Baabuloon laga keenay, iyuo laba boqol oo sheqel ayaan damcay, oo qaatay, oo bal eeg waxey haatan ku qarsoon yihiin dhulka meel teendhadada dhexdeeda ah, lacagtuna way ka hoosaysaa'* (Yashuuca 7:20,

21). Daa'uud wuxuu arkay naag qaawan e qubaysanaysa sida aan uga akhrin ayno 2 Samu'eel 11:2) oo durbaba boqortooyadiisa ayaa burburi gaadhay. Luut wuxuu arkay dhulkii isha u roonaa oo laga heli lahaa Sodom iyo Gomoorah sida ku dhiga Bilowgii 13:11, 12.

Markaan Eebbe jaalnimo la leenahay waa inaan iska eegno waxyaalaha ku caasinta Ilaah nagu hogaamin karo. Markaan Ilaah ka baxsannahay waxaan arkaynaa waxyaala fara badan oo nagu beerayaan damaca ku caasinta Ilaah. Maraha qaarkood hab qaldan ayaa waxyaalahas iskiiga dhawrnaa. Haddiiba Xaawa oo asli aheyd oo iin la'aan aheyd la jirrabbay oo ay dhacday, in intee ka badan ayaa annaga gefka ku dhallanay nala jirrabaya?

Sheygga saddexaad waa **kibirka noolosha** (waa sheyga saddexaad e laga sheegay 1 Yooxanaa 2:16). Ku caasinta Ilaah waxaa natiija u ah baaba'a baniaadmiga. Xaawa waxey dooneysay in ay Ilaah ka xurowdo. Waxey dooneysay in ay xagga xigmadda Ilaah ka xurowddo oo ay xigmaddeeda ku dhaqanto Ilaah la'aantiis. Waxey damacday in ay noqoto mid fikirkeeda uusan jirin fikir ka sareyo.

Durbaba waxaa aasaasantay ku caasinta Ilaah. Waa marka uu gefka baartamaha qalbigeena gelayo oo si daran oo ka noqosho lahayn ayaan u damceyna inaan Ilaah ku caasino. Gefka Ilaah lagu gefo wuu ka weyn yahay jirrabaadda,

jirrabaaddana ma ahan gef. Gefka wuxuu uureystaa markaan iisu dhiibno ficilka jirrabaadda. Sheeddaanka wuxuu nagu beeraya fikirado laakiin fikiradahaasi ma ahan gef. Waxey uun fikiradahaasi gef noqonayaan markaan ogolaano inaan ku dhaqano wuxuu naga dhaadhicinayo sheeddaanka.

Arinta tan ku xigta waxey noqonaysa gefka oo dhasha. Xaawa ficil bey gashay. Waxey gacanteeda ku qaadday midhtii oo way cuntay. Ma aanay isku deyin in ay maska bedesho maska intay isaga la sheekeysaneysay laakiin iyaduu gef geliyey.

Xaawa waa la khiyaanay (1 Timoteyos 2:14, ilawse Aadan lama khiyaanin. Aadan waxaa loo uumay inuu ahaado hogaamiyaha iyaduna waxey aheyd in ay ka amar qaadato isaga intay beerta Ceeden ku noolayeen. Madaama ay ka soo bixi waysay masuuliyaddeedii addeecista oo ay go'aankeeda ku dhaqatay iyadii waa la khiyaanay. Haddii ay dumarka maanta maqli wayaan in ay waa uun la khiyaanayn doona. **Ma ahan inaan leeyahay** dumarka si dhaqso ah ayaa lagu khiyaanayn karaya, laakiin haddii ay diidaan in ay ku dhaqmaan waxa looga baahan yahay dumarnimadoodu, diidmada ay ku diideen in ay qorshaha Eebbe addeecaan waa uun la khiyaani doonaa.

Xaawa durbaba way ku caasisay Ilaah markay su'aashay jiritaankiisa iyo awooddiisa oo ay

qaadatay fikiradda qaldan e ah inuu Ilaah xaasid yahay. Qalbigeeda iyo niyaddeeda ayay durbaba ka caasisay. Aayaddaan lixaad (6aad) waxey ka hadleysaa sida uu ficilka gefka ugu yimid cunista la cunay midhtii la mamnuucay. Isla saddexdan hab uu sheeddaanka baniaadmiga ku weeraro, damaca jidhka, damaca indhaha iyo kibirka noolosha (eeg 1 Yooxanaa 2:16) waxyaalahan oo dhan waxaan haddana arkayna in lagu istecmaalay jirrabaadkii Ciise sida ay ku dhigantahay Matayos  4:1-11). Sheeddaanka wuxuu rabbay (a) dhagaxda oo kibis loo bedelo, (b) wuxuu Ciise tusay sharafta boqortooyada adduunka (c) wuxuuna Ciise ka codsaday inuu u sameeyo wax uu dadka hortooda isla markaas sharaf iyo soo dhaweyn kaga heli lahaa. Hase ahaatee, Aadankii labaad wuu ka guuleystay jirrabaadda sheeddaanka halka ay Xaawa iyo Aadankii kowaad ku guuleysan wayeen. Ciise ma uusan ka shakinin Erayga Ilaah. Xaawa iyo Aadan waxaa la weydiyey *'Ilaah miyuu idinku yidhi…'* shakigana durbaba wuu ku dhashay iyaga wayna ka shakiyeen ujeeddada Ilaah. Ilawse Ciise oo ahaa Aadankii labaad wuu aamin ay Erayga Ilaah wuxuuna Ibliiska uga jawaabay *'way qoran tahay…'!*

# Jannadii la gefay

***Cutubka 16aad***

(Bilowgii 3:6-7)

Xaawa waxey midhtii la qaybsatay ninkeedi la joogay oo isaguna wuu cunay. Dhamaadka aayadda lixaad waxaa qoran, *'…oo ninkeedii la joogayna wax bey ka siisay, oo isagina wuu cunay'*. Sheeddaanka wuxuu u soo maray uu Aadan gefka ku geliyey Xaawa. Ma ahayn Aadan kan la khiyaaneyey sida ku dhigan 1 Timoteyos 2:14. Isagoo og ayuu dembaabay doonistiiseyna aheyd inuu gefkaas galo. Kas ayuu iyada u raacay meelihii laga reebbay in ayna lugta dhigin. Iyaduse waa la khiyanay oo sidaasay ku aadday halkii laga mamnuucay; Aadan isagoo ay indhihiisa furan yihiin ayuu goostay inuu galo boqortooyada gefka. Jiinsiga baniaadmiga kuma dhiman Xaawa. Wuxuuse ku dhintay Aadan waayo, ma ahan Xaawa tan ay dadka ku dhinteen sida ku dhigan 1 Korintos 15:22.

Natiijada gefka waa waxyaala fara badan oo is dabajoog ku imaanayo. Waxaan dhabteeda ka arkayna waxyaalihii qabsaday Aadan iyo Xaawa; oo jiinsiga baniaadmigana ilaa hadda dhibatooyinkaas askunmay waagaas ayaa weli na dabajooga.

Xaawa sidee bey uga rayn laheyd sheeddaanka? **Ma ahayn in ay masuuliyaddeeda ka baxdo oo**

**weliba waxey aheyd in ay xusuusato kuna dhaqanto sababta uu Ilaah iyada u uumay.** Way awoodday in ay sheeddaanka u moodiso Aadan si uu ula xajoodo. Waayo, Aadan iyaduu la joogay sida aan horey u soo akhrinayba (*'…oo ninkeedii la joogayna wax bey ka siisay, oo isagina wuu cunay'* (3:6). Waan gefeynaa markaan isku deyeyno inaan ku dhaqaaqno wax aanan awooddeena ahayn. Haddii aan ku ficilqaadno wax ka baxsan wuxuu Ilaah noo xilsaaray waxaan noqoneynaa nacasiin waana nala khiyaanaya.

Xaawa way diidi laheyd waxyaalaha uu sheeddaanka kula talinayay. Wada xajood badan looma baahnayn. Dadka Ilaah iyo sheeddaanka waxba uma dhaxeeyaan sidaa daraaddeed wada hadalkooda ma ahan inuu dheeraado. Sheeddaanka waa in loogu jawaabo, *'way qorantahay!'* ama waa inaad yaahu iska tidhaahddid si uusanba kuula sii sheekeysan. Ciise Butrosuu canaantay oo wuxuu ku yidhi, *'Gadaal iga mar, Sheedaan yahow…'* (Matayos 16:23). Ma jirto sabab sheeddaanka wada hadal dheer loola yeesho ama xataa wakhti dheer oo isaga lagu saaro – taasi ma ahan wax Baybalka ku jira! Sheeddaanka ma sheego wax maskaxgal ah oo sidaa daraaddeed ma jirto sabab isaga loola xajooda. Haddii aad arimo sheeddaanka kala xajootid ama aad isku deyddid inaad beentiisa dhageysatid Ilaah baad ku caasinaysaa isla marka aad bilaabeysid dhageysadkaasi. Xaawa waxey

rumeysatay wuxuu beenta uu sheeddaanka iyada ku buufinayay!

Sidee baan sheeddaanka iskiiga xijaabi karnaa? Haddaba habka uu Ciise iskiiga xijaabay ku deyo oo ku dhaqan. Jirrabaadda wax awood ah ma lahan markaan Ciise ka ag dhownahay. Ciise rumayso. Mar alla markaad jirrabaad ku jirtid magaca Ciise ku dhawaaq. Isagu mar kastaba wuu kuu dhowyahay. Waa inaad si joogta ah u dhex dabaalatid badda runta Ilaah ku saabsan. Xaqnimada Ciise si joogta ah ha kuu deddo. Ku farax oo ku qanacsanaw xiriirka aad Ilaah la leedahay.

Markuu sheeddaanka jirrabaad kuula yimaado isku ku tiirsanow balamada Ilaah. Waa inaad filatid inuu Ilaah kuugu guuleysin doono. Mar kastaba waa in ay hal aayad oo Kitaabka ka tirsan maskaxddaada ka bixin waana tan dhahaysa, *‘Way qoran tahay…’!* Weliba aad bey muhim u tahay inaad baryada badsatid.

Markaad saa sameysid waa inaad go’aankaada ku taagnaatid! Waa inaad sheeddaanka beentiisa dhageysanin! Ilaahna wuu ku siin doonaa guusha. Haddaan sheeddaanka iska xijaabno ma jirto wax uu nagu sameen karo. Wuu naga cararaya hadduu arko inaan isaga dheg iyo dhaaya toona siineynin. Aan xusuusano aayaddan leh, *‘Ugu dambaysta waxaan idinku leeyahay, ku xoogaysta Rabbiga iyo xoogga itaalkiisa’* (Efesos 6:10).

Waa inaan wax kastoo uu sheeddaanka naga doonayo inaan sameyno aan sameyno wax ka soo horjeeda. Haddii ay doonista sheeddaanka tahay inay noolosheena ahaato mid Ilaah macaarad ku ah, waa inaan xusuusano sababta uu Ilaah noo uumay in ay tahay inaan wax kastoo noolosheena ka tirsan ay yihiin wax aan doonista Ilaah ku sameyneyno. Ciise waa inuu noqdaa kan aasaaska u ah aqoonteena, kan aan ka amar qaadaneyno, kan hogaaminaya dabiicaddeena oo dhan, kan mustaqbalkeena gacanta ku haya, farxaddeena ugu weyn iyo starexeena iyo kan keliya e aan caabudeyno. Rabbigeena Ciise Masiix ayaan marxalad kasta iyo wakhti kasta kaga guuleysanaynaa sheeddaanka. Magaca Ciise Masiix ayaan wax kasta ku sameynayna.

Hase ahaatee, Aadan iyo Xaawa tallaabooyinkan oo dhan way raaci wayeen. Ilaah bey ku caasinayaan oo kol dhawba waxaa iyaga qabsanaya jirrabaadyo iyo inkaar kala duwan.

1. **Way heleen waxey rabbeen laakiin ma aanay jacleysanin.** Maska wuxuu iyaga ka ballan qaaday in haddii ay Ilaah ku caasiyaan indhahooda furmi doonaan, wayna noqotay. *'Oo labadoodiba indhahoodii way furmeen, oo waxey garteen in ay qaawan yihiin; waxeyna isku tosheen caleemo berde, oo ay gunti ka samaysteen'* (3:7). Geedkii aqoonta wanaagga iyo sharka wuxuu ahaa mid loogu tallagalay in ay Aadan iyo Xaawa ku aqoonsadaan gefka iyo

xaqnimada. Ilawse aqoontan waxey aheyd in ay ku helaan **ka fogaashada gefka.** Sida ugu wanaagsan e gefka lagu aqoonsan karo waa iyadoo gefka layska xijaabo. Ciise ayaa ugu aqoonsi badnaa gefka wuxuu yahay ilawse ma uusan gefin weligii! Aqoonta uu yaqaanay wanaagga iyo sharka waxey ku timid iska xajinta uu iska xajiyey alla ku caasinta.

Laakiin Aadan iyo Xaawa waxey aqoonta ku caasinta Ilaah ku heleen iyagoo xumaati ay ka xumayeen gefka ay galeen. Maska wuxuu iyaga siiyey aqoonta wanaagga iyo sharka, taasna waxey aheyd wixii ay heleen laakiin hab qaldan ayay ku heleen. Waxey iyaga u keentay ceeb. Way heleen waxey rabbeen laakiin waxey gadaal ka fahmeen in aynan helin wax lagu faano laakiin waxey aheyd wax u keenay ceeb iyo xishood. Inta badan sheeddaanka wuxuu na siiya hami weyn e aan ku damacno shey laakiin markaan sheygaasi helno waan ka shalaynaynaa oo kuma farxayno. Tani waa caadada wax kastoo xagga sheeddaanka ka yimaada. Mid ka mid ahaa wiilasha nebi Daa’uud ayaa mar damcay inuu si qaldan walaashiis ku qaato laakiin markuu iyada qaatay uu guri la galay natiijada ma ahayn mid uu weligiis ku farxay shalayn ayuu ku dambeyey. Aadan iyo Xaawa runtii indhaha way u furmeen (isla sida uu maska ka ballan qaadayba) laakiin habkaasi wuxuu ahaa mid ay shalayn ka dambeysay.

Tan waa dhimasho. Ilaah wuu u sheegay iyaga in ay isla marka ay Isaga ku caasiyaan dhimasho ku soo deggi doonto. Way heleen nooc aqoon ah ilawse waxey noqdeen kuwa aan Ilaah xiriir la lahayn. Waxey damacsanayeen in ay Ilaah xor ka noqdaan; hadda way u gashay oo Ilaah way ka xuroobbeen. Indhahooda waxey u furmeen hab aanay rajeyneynin. Markay Xaawa wada hadal saaxibtinimo la yeelanaysay maska, way ka indha tirnayd natiijada ka soo bixi doonto wanaagga uu sheegayey. Inta badan waan ka indha tirannahay natiijada jirrabaadda damacyada ka fiirsashada lahayn nagu beerto.

Qaawanaanta waxey hadda iyaga u aheyd maahmaah shaleen leh. Xishood iyo dareenka ay daremeen in ay Ilaah ku caasiyeen ayaa iyaga ka dhigay kuwa balaqan oo meel cidla ah taagan. Aadan iyo Xaawa way heleen wixii ay haweysteen laakiin waxey heleen ma ahayn wax ay ku farxeen. Waaya aragga loo leeyahay sharka markuu qofka yahay mid sharkaasi sameeyey waa mid aad u xun oo qalbijab leh. Waxaa ka sii wanaagsan adoo og dhibaatada uu sharka kuu geysan karo adiga oo aan sharkaasi sameynin.

Waxaan Ilaah ugu mahad celinaynaa hadiyaddiisa Ciise Masiix! Waxaan ku farxi karnaa madaama aan ognahay inuu Ciise sharka aan falnay oo dhan iskutallaabta noogu cafiyey oo wuxuu noqday mid noolosheena ku nool oo ka dhex shaqeya. Wuu noo cafinaya sharkeena oo

dhan oo wuxuu noo huwinaya dhar cad oo ah xaqnimadiisa.

# Eebbe ku caasinta

***Cutubka 17aad***
(Bilowgii 3:8-13)

Gefkay Aadan iyo Xaawa galeen wuxuu nooloshooda u keenay natijooyin sida silsilad iskuugu xiriirsan noolosha aadanaha kalena maanta isla natiijadaas ayaa soo gaartay madaama aan farcankooda nahay.

**2. Ceebta uu Gefkay galeen u keenay ayey ku daremeen in ay Ilaah ku caasiyeen.** Way daremeen qaawanaantooda (3:7). Markii hore waxey dareensanayeen in ay xor ka yihiin dareenka jidhkooda iyo weliba damaca is qarinta. Laakiin hadda waa mar ay mindida uuska ku tagtay oo ma jiraan si ay dib ugu noqdaan aslinimadii uu Ilaah ku uumay iyaga. Waxey dareensan yihiin in ay Eebbe hortiisa sharlaaweyaal ku yihiin oo weliba labadooduba way iska xishoonayeen.

**3. Waxey isku deyeen in ay kafaarogud u sameeyaan sharka ay galeen. '***Waxeyna isku tosheen caleemo berde oo ay gunti ka samaysteen'* (3:7). Madaama ay sharlaaweyaal noqdeen, haddana waxey isku deyayaan in ay badbaadada sharkooda iyaga uun sameystaan. Waxey isku deyeen in ay kafaarogud u sameystaan sharka ay galeen si ay ceebtooda iyo gefkooda u xaliyaan. Madaama ay dareesan

yihiin in ay qaawan yihiin oo ay ceebtooda banaanka taalo, waxey isku deyayan in ay isla iyagii uun gacantooda ku sameystaan wax ay ku xaliyaan ceebta ay dhex dabaalanayan.

Sharlaaweyaasha waxey isku deyaan in ay is badbaadiyaan ama iska nadiifiyaan gefka ay galeen. Waxey u dagaaltamayaan wax uu qof ugu yeedhay “Badbaadada caleenta berdaha” badbaada ay aqoontooda iyo xigmaddooda kaga fikireen. Waxeyna qaadan karta hab dhaqan diimeed ama qofka oo ku adkeysta inuu wax kaalma ah doonanin laakiin uu u maleyo uun inuu isku filan yahay. Dadka qaarkood e Masixiinta ah waxey u jeestaan tiirarka Masixiinta oo ay ka mid yihiin, miiska Rabbiga, biyo gelinta qaar kalena waxey ku darsanayaan kuwa kale oo ay sameysteen oo aan Kitaabkaba ku jirin. Waxey iska dhaadhicinayan inuu Ilaah ugu naxariisanayo dhawridda ay dhawrayaan shuqul diiniga. Laakiin qalbiga oo aan Ilaah u jeesanin wax kastoo la sameyo Ilaah lagama farxin karo waayo, Ilaah qalbiyadeena ayuu ka dan leeyahay e ma ahan waxyaala aan isku deyeyno inaan isku badbaadinayno. Markuu qalbiga bedelmo ayey waxyaalaha ka soo baxa noqonayaan wax Ilaah ka farxiya e ma ahan inaan waxyaalaha wanaagsan aan qalbiga ku wanaajinayno ama aan Ilaah ku laalushi karno. Qaar kale oo baniaadmiga ka tirsan ayaa jiraan oo sharciyo iisu dejinayaan oo Ilaah ka ballan qaadayaan waxyaalaha faraha badan e ay Ilaah u

samayn doonaan. Qaar ayaa jiraan oo dabeecadahooda bedelaya oo noqonayaan kuwa aad u sharaf badan oo waxey u malaynayaan inuu Ilaah saa ugu naxariisan doono. Qaar kale waxey isku deyayaan in ay Ilaah waaya aragnimo ku fahmaan ama ay dareemadooda ku fahmaan waana wax ay aqoontooda iyo ximaddooda ay ku sameynayaan. Waa "Badbaadada caleenta berdaha"; ma jirto mid ka mid ah waxyaalahaasi oo wax wanaag ah Ilaah looga helayo. Badbaadada waa in ay xagga Ilaah ka timaaddo haddii kale ahayn maba jirto wax badbaado la yidhaahdo.

**4. Ma doonayaan in ay mar dambe Ilaah jaalnimo la yeeshaan.** In kastoo ay isku deyayaan in ay sharkooda qariyaan, markuu Ilaah u yimid inuu sida caadiga aheyd iyaga ula kulmo, ma aanay dooneynin in ay Isaga la kulmaan. *'Oo waxey maqleen codkii Rabbiga Ilaaha ah, isagoo beerta dhex socda kolkii maalintu qaboobayd: oo ninkii iyo naagtiisii way iska qariyeen Ilaah, oo waxey ku dhuunteen geedihii beerta dhexdooda'* (3:8). Intuusan Ilaah iyaga la hadlinba waxey bilabeen in ay iska dhawraan uusanba iyaga la kulmin. Markaan Ilaah ku caasinno waxaan noqoneynaa kuwa cabsi aan sal lahayn Ilaah ka cabsada. Mar kasta waxaan dareemeynaa inaan sharlaaweyaal nahay. Waxaan dareemeynaa in ay inkaarta Ilaah nagu dhici doonto. Ninka Ilaah ku caasiya ma doonayo inuu Ilaah ku dhowaado in kastoo uu jecaylyahay inuu maqlo wax Ilaah ku

saabsan. Qofkan wuu ka hadlaya ‘ilaah’ laakiin markii laga hadlo Ilaaha Baybalka wuxuu doonaya inuu cararo. Sida uu Bawlos yidhayba, *‘ninka nafta raacaa ma aqbalo waxyaalaha Ruuxa Ilaah, waayo, nacasnimo bey u yihiin, mana garan karo, maxaa yeelay, ruuxa ayaa lagu imtixaamaa’* (1 Korintos 2:14). Qofkan waa cadawga Ilaah.

Ilaah wuxuu iyaga ugu yimid inuu jaalnimo la yeesho laakiin iyagu way ka goosteen Ilaah oo ma doonayaan in ay isaga xiriir dambe la yeeshaan. Hadda waxaa iyaga ku dhashay damiir xun oo sida keliya oo ay Ilaah u inkiri karaan waa iyagoo isaga ka carara markuu soo raadiyo.

*‘Oo Rabbiga Ilaah ahu wuu u yeedhay ninkii, oo wuxuu yidhi, Xaggee baad joogtaa?* (3:9). Luuqadda halkan looga hadlaya waa mid sawir nagula tusinayo oo waxey u muuqata inuu Ilaah yahay sida qof socda oo wargelin doonayo. Luuqaddan sawirka nagula tusinayo yaanan loo qaadan in ay tahay mid sida loo sheegayo ay wax u jiraan. *‘Isagii wuxuu yidhi, codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday, maxaa yeelay, waan qaawanaa; oo waan isqariyey’* (3:10). Aadan wuxuu doonaya oo keliya inuu isqariyo. Wuxuu isku qarinaya uunka Ilaah sida geedaha si uu Ilaah ugu muuqanin. Wagaas ilaa hadda baniaadmiga Ilaah buu iska qariya. Waa uun markaan Ciise iisu dhiibno markaan dhabta arinta iisu dhiibi karno. Waa uun markaas

goortaan awoodno inaan wixii uu jiinsiga baniaadmiga Aadan ku waayey aan heli karno.

**5. Waxey bilabeen in ay eedeyn bilowbaan.** Madaama aany doonaynin in ay ogoladaan qaladkooda, oo hab kastoo ay iskuqaribi rabbeen ay suurtagal u noqon weyday, habka kaloo ay doonayaan in ay istecmalaan waa in ay meel kale isku qariyaan. Bilowgii 3:11 waxey leedahay, *'Kolkaasuu ku yidhi, yaa kuu sheegay inaad qaawan tahay?  Miyaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray inaadan wax ka cunin?* Hadda waxaa u muuqatay sida uu Ilaah qaladkooda u daba joogo oo madaama aanay doonaynin in ay gefkooda ogoladaan waxey rabaan in ay eeddooda meel kale ku toosiyaan. Bilowgii 3:12 waxey leedahay, *'Ninkiina wuxuu yidhi, Naagtii aad I siisay in ay ila joogto ayaa geedkii wax iga siisay, oo anna waan cunay.'* Si khiyaana leh ayey su'aasha Ilaah uga jawaabayaan. Sharka wuxuu qofka ku beera eexasho. Sharlaawaha qof kastuu eedeyaa wixii aan ka ahayn isaga sharka sameyey. Marka ugu horeysa waxaan arkeyna ninkii oo naagtii eedeynayo. Naagtan uu eedeynayo waa uun isla tii uu yidhi, *'Ninkiina wuxuu yidhi, tanu hadda waa lafka mid ah lafahayga, iyo hilib ka mid ah hilibkayga: waxaa iyada loogu yeedhi doonaa Naag, maxaa yeelay, iyada waxaa laga soo saaray Nin.'* Waa tii uu aad u jeclaa uu farxad iyo raynrayn ku jiray markuu arkay. Haddana waxaan arkaynaa inuu Ilaah ku eedeynayo hadiyaddaas uu siiyey. Waxaa jirtay mar uu aad Ilaah ugu mahad

celinayey, laakiin hadda wuxuu eedeynaya Ilaah, '*…Naagtii aad I siisay…*'

Sharka wuxuu burburiya saaxibtinimada iyo wehelnimada. Markii hore sharkuu la galay iyada; haddana waxaan arkeynaa in aysan dantiisa ahayn xataa haddii ay inkaarta Ilaah iyada ku dhacdo. Wuxuu noqday mid taxaddarla' oo aan mar dambe tii uu ugu jeclaa u arkin in ay ehel u tahay.

Naagtiina waxey bilowday in ay maskii eedeyso. *'Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu naagtii ku yidhi, waa maxay waxan aad samaysay? Naagtiina waxey tidhi, Abeesadaa I khiyaanaysay oo anna waan cunay'* (3:13). Ma jiro qof is edeynayo. Isla markaana sheeddaanka uma xilsaari karno gefka aan galnay. Waxaa nagu waajib ah inaan Ibliiska iska xajino oo aan wax isaga ka yimid aan inaba ku dhaqmin. Maalinta xukunka qof kasta iskiisu Ilaah u hor istaagaya oo ma jiro qof kale oo aad sharka aad sameysay ku eedeyn kartid xataa Ibliiska ma eedeyn karti.

Waagaas ilaa maanta lab iyo dhaddigba Ilaah bey ka cararayaan. Waa uun Ciise kan dib u rogi karo waxey Aadan iyo Xaawa sameyeen.

# Midhta naagta

***Cutubka 18aad***
(Bilowgii 3:14-15)

Aadan iyo Xaawa waxey isku deyeen in aynan qiranin wax alla wixii qalad ahaa ama shar ahaa e ay sameyeen. Waxey go’aansadeen in ay dhar ka sameystaan caleen berde si ay qaawanaantooda u qariyaan. Eedeyn ayey galeen oo way ogolaan wayen in ay iyaguba qalad galeen.

Xalka keliya oo jira waa uun Ilaah oo go’aansada inuu dhibkooda xaliyo. Ilaah Ibliiska uma su’aalin isla sida uu Aadan iyo Xaawa u su’aalay. Ibliiska wuxuu gefkiisa ka gaaray heer aan laga badbaadin karin. Ma jirin sabab uu Ilaah maska waajib uga dhigo inuu toobad keeno laakiin waxaan arkeyna Ilaah oo maska xukumayo. Xukunka maska loo goyey waa kan, *‘Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu abeesadii ku yidhi, waxan aad samaysay aawadiis waad ka habaaran tahay xoolaha oo dhan, iyo dugaag kasta oo duurka jooga; waxaanad ku socon doontaa boggaaga, ciid baanad cuni doontaa maalmaha cimrigaaga oo dhan’* (3:14). Maska waa la inkaaray. Sheeddaanka waxaa inkaaray Ilaah. Weerka *‘ciid baanad cuni doontaa’* waa eray uu micnahiisu yahay ‘aad u tabardaran’. Ma ahan muhim in muuqaalka maska uu is bedelay ama uu sidii lagu uumay uu yahay. Yaanan u maaleynin inuu jiray mas quruxsan oo aan calool ku socon jirin oo

hadda calool ku socda. Bilowgii 3:14 waxey istecmaaleysa luuqad sawir ah. Aayaddaan waxey noo macneyneysa in dabiicadaha maska oo dhan ay noo tilmaameyan inuu yahay cadawga Ilaah iyo dadka Ilaah. Maska sida uu maanta yahay unbuu weligiisba ahaa laakiin hadda muuqaalkiisa waa mid nagula xusuusinayo inaan Ibliiska xusuusano mar alla markaan mas arkeyno. (Waa sida qaansa roobeydka. Weligeedba way jirtay xataa Bilowgii 9:13 ka hore laakiin daadkii ka damba waxey noqotay calaamad).

Markuu Ilaah naagta la hadlayey waxaan arkayna inuusan iyada inkaarin. Maska way u dhamaatay ilawse xaaskii uu habsaamiyey looma inkaarin isla sida isaga loo inkaaray. Ibliiska heer loogu cafiyo wuu ka dheeraaday ilawse naagta kama aanay xadgudbin heer lagu cafin karo ama lagu badbaadin karo. Bilowgii 3:15 ayuu Ilaah ku yidhi, *'Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa.'*

Sida aan Bilowgii 2:9 uga soo aragnayba ninka iyo naagta way ka qiima badnayeen xayawaanada uu Ilaah uumay oo dhan. Bilowgii 3:1-7 waxaan ka aragnay sawir xayawaanada hadlayaan oo Ilaah nacayb oo doonayaan in ay ka saramaraan heerka uu Ilaah ugu talagalay in ay ku sugnadaan oo doonayaan in ay baabi'iyaan jiinsiga

baniaadmiga. Tani waa maahmaah lagu tilmaamayo cadawga Ilaah, sida aan uga akhrin ayno Muujintii 20:2, *'Oo markaasay qabsatay masuulaagii ahaa maska duqa ah, kasoo ah Ibliiska iyo Sheedaanka…'*.

**1. Maska mar dambe looma ogolaan doono inuu 'saaxibtinimo' la lahaado naagta.** Ilaah wuxuu maska ku yidhi, *'Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta…'* Hadda wixii ka dambeyo Xaawa waxey ogaan doontaa inuusan maska ahayn wax lala saaxibo.

**2. Maska wuxuu lahaan doonaa farcan.** Midhtan la sheegayo ma ahan in ay ahaan doonto ruux shar ah laakiin waa baniaadmiga Ibliiska adeeci doonaan oo sheeddaanka aabba ka dhigan doonaan. Ciise wuxuu Yooxanaa 8:44 ka yidhi, *'Idinku waxaad tihiin kuwo aabbahood Ibliiska yahay, oo waxaad doonaysaan inaad samaysaan damacyada aabbihiin. Tan iyo Bilowgii wuxuu ahaa mid dhiig qaba, runtana kuma uu joogsan, waayo, runtu kuma jirto isaga. Markuu been ku hadlo, tiisuu ku hadlaa, waayo, waa beenaaleh, waana beenta aabbaheed'*.

**3. Naagta waxey lahaan doontaa farcan.** Waxey noqon doontaa cadawga maska waxeyna lahaan doontaa farcan badan oo iyaguna cadaw ku noqon doonaan maska oo sheeddaanka ka soo hor jeedi doonaan. Jiinsiga baniaadmiga wuxuu u qaybsami doonaa laba, kuwa xagga maska gacan

siin doonaan iyo kuwa xagga naagta jiri doonaan oo cadaw ku noqon doonaan maska.

**4. Midhta naagta ayaa burburin doontaa madaxa maska.** *'Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo madaxaaguu buruburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa'* (3:15). Erayga burburin afka Cibraaniga wuxuu ku macna leeyahay ficilka 'jejebin'; 'si xun u dilid' 'si daran u dhaawicid'. Marka mas la dilayo madaxa ayaa laga tumaa. Aayaddaan waa wacyoon baniaadmiga u caddayneyso sida uu maska iyo farcanka maska uga guuleysan doono. Laakiin sidee bey tan ku noqon kartaa? Aadankii asliga ahaa oo aan weligiis Ilaah ku caasiyin oo si joogta ah Ilaah ula xiriirayeyba wuu gefay. Hadda madaama uu jiinsiga baniaadmiga gef galay uu wada yahay mid iin leh, uuna ku suganyahay in laga mamnuuco aragga Ilaah ma wax rajo ah ayaa jirta? Sidee buu hadda farcanka naagta uga guuleysanaya maska oo la tusay garashadaas sare iyo awooddaas weyn? Wacyoontan su'aal baa ku jirta.

Sidee buu jiinsiga baniaadmiga Ibliiska uga guuleysan doonaa hadduuba Aadan oo daahirnimo lagu uumayba ku dhacay imtixaankaas? Oo weliba waxaan aragnaa in ay jirto rajadaasi. Waxaa jirtaa arin kaloo ay tahay in laga fiirsado. Erayga 'midh' waa eray macna badan yeelan karo. Waxey macna u ahaan kartaa

hal shey oo shaqsi ah, ‘waa midh’. Waxey noqon kartaa eray waxyaala la tuuray lagu macneynayo, ‘midh’ taa uu micnaheeda ahaan karo midho badan oo meel la tubay.

Bilowgii 3:15 way balaarisay suurtagalka ah in ay jiri doonto hal midh oo maska uga guuleysan doonto jiinsiga baniaadmiga oo dhan. Tani ma ahan uun inaan fasiraaddeena gelineyno aayadda. Qoraalka naftiisa ayaa na wareerinaya. Sidee buu weligiis ku jiri karaa shey ama ruux jiinsiga baniaadmiga ka tirsan oo maska ka guuleysan doono? Ninkii tan ku habboonaa wuxuu ahaa Aadankii asliga ahaa oo aan gefin laakiin nasiib darro isna wuu gefay. Sidee baa lagu heli kara baniaadmi kale oo hawshan qaban karo?

Tan hal macna unbay lahaan kartaa. Sida ay ku noqotaba waxaa jiri doonaa guuleyste burburin doono maska. Mid baa imaan doonaa oo wax alla wuxuu sheeddaanka sameeyey daba gedinayo. Wuu baabi’in doonaa kuwa sharlaawayaasha ah, kuwa ceebeysan iyo kuwa qaawan. Wuxuu soo celin doonaa jannada la gefay iyo nasteexadii beerta Ceeden. Dumarka iyo ragga ayuu dib ugu soo celin doonaa xiriirkii hore iyo jaalnimadii hore e ay Aadan iyo Xaawa Ilaah la lahaayeen.

Bilowgii 3:15 waa sheegidda ugu horeysa e warka wanaagsan e Injiilka la sheegay. Waa wacyonta ugu horeysa e Ciise Masiix lagu sheegay. Waxey aheyd mid la yaab leh oo aan la

fahmi karin waxaana laga yaaba in ay akhriyayaashii ugu horeyey ay welwel fara badan ku beertay markii loo kaco xagga fasiraadda. Su’aasha ay dhallisay waxey aheyd: sidee buu qof jiinsiga baniaadmiga ka soo baxay maska uga guuleysan doonaa?

**5. Maska wuxuu burburin doonaa cidhibta midhta naagta.** Burburinta madaxa waa ficilka ugu daran oo wax lagu sameeyo lagana boogsan karin. Burburinta ama dhaawicidda cidhibta waa hab nabarayn laga boogsan karo. Ciise iskutallaabtuu sheeddaanka ku burburiyey. Sheeddaanka iskutallaabtuu Ciise ku dhaawacay. Sheeddaanka kama boogsan doono dhaawaca la gaarsiyey. Si weligeed ah ayaa loo burburiyey. Ciisese wuu ka soo boogsaday dhaawicii uu sheeddaanka gaarsiyey. Waxaa lagu dhaawacay dhaawac dhimasho gaarsiyey laakiin wuu ka soo sara kacay dhimashadaasi. Ciise wuu ka raystay iskutallaabta; sheeddaankuse weligiis kama raysan doono burburka gaaray.

# Iimaanka Aadan

***Cutubka 19aad***
(Bilowgii 3:16-20)

Baaba'a adduunka waxaa lagu eedeynaya Aadan e ma ahan Ilaah. Ilaah wuxuu baniaadmiga ku uumay xornimo xaddadan. Nimanka iyo naagaha uu Ilaah uumay ayaa ku xadgubbay xornimadaasi. Maxay aheyd sababta uu Ilaah xornimadaas baniaadmiga uu siiyey markii hore? Waxaa laga yaabaa inuusan Ilaah rabbin baniaadmiga inuu noqdo sida mashiinta robodka la yidhaahdo oo sidii la rabbo loola dhaqmayo oo aan iskiisa waxba u sameyneynin. Waxaa laga yaaba qaybta baniaadmiga ka tirsan e la badbaadin doono in ay ka wanaagsanaan doonto sida ay wax ahaayeen intuusan Aadan dembaabin. Laakiin waxyaalaha noocaas ah waxaa lagu xisaabin kara waxyaalaha sirta ah uu Ilaah keliya fahmi karo sida ku dhiga Sharciga Kunoqoshadiisa 29:29. Buuga Bilowgii wuxuu taarikh ka bixinaya natijooyinkii gefka.

**1. Eebbe ku caasinta ayaa xanuun adduunyada soo gelisay.** Intuusan Aadan Ilaah ku caasinin ka hore ma jirin xanuun shar ku yimid. Laakiin hadda isbedel weyn ayaa jira. Bilowgii 3:16 waxaa ku qoran sida tan, *'Naagtiina wuxuu ku yidhi, dhibtaada iyo wallacaaga aad baan u badin doonaa; oo dhib baad carruur ku dhali doontaa; oo waxey*

*doonistaadu ahaan doontaa ninkaaga, wuuna kuu talin doonaa'*. Waxaa laga yaaba inuu jiray xanuun wanaagsan intuusan Aadan gefin, nooca xanuunka e na siinayo waanada ama nooca xanuunka oo naga reebbayo inaanan wax dhib ah ku sameynin jidhkeena. Wax alla wixii gefka ka hore jirayba, waxaa noo cad in xanuunka uu noqday mid aad loo sheego markuu Aadan dembaabay ka bacdi. Xanuunka ay dumarka ku xanuunsadan dhalmada waa mid nagula xusuusinayo gefka ay Xaawa gashay.

**2. Foolxumo ayaa soo gashay xiriirka u dhexeeyey ninka iyo naagta. '…***oo waxey doonistaadu ahaan doontaa ninkaaga…',* ayuu Ilaah ku yidhi naagtii. Xiriirka labka iyo dhaddigga u dhexeyo wuxuu ahanaya khareer. Haddaba naagta waxey lahaan doontaa 'doonis'. Waxey u egtahay in eraygan micnahiisu yahay in ay rabboon doonto in ay wax xukunto. Waa isla erayga laga istecmaalay Bilowgii 4:7 markuu Ilaah Haabiil ku yidhi, *'Haddaad wax wanaagsan samaysid, sow laguma aqbaleen? Haddaadan wax wanaagsan samaynse, dembi illinkuu kuugu gabbanayaa; doonistiisuna aday noqon doontaa, adiguna waa inaad xukuntid isaga'*. Qofta dumarka ah waxey rabbi doontaa in ay ninkeeda bedesho oo ay xukunto.

Dhinaca masuuliyadda ninkana wax baa si ka noqonayo waayo, erayga wuxuu leeyahay, '…*wuuna kuu talin doonaa'*. Masuuliyadda

ninka iyo tan naagtuba sida saxda ah kuma socon doonaan. Naagta waxey aad u rabbi doontaa in ay ninka xukunto. Ninkana wuxuu rabbi doonaa inuu wax kastaba naagta kaga badiyo oo ay isaga hoost timaaddo.

**3. Dhulkiina dhaawac baa soo gaaray.** Ilaah wuxuu u leexday Aadan. Erayga Eebbe wuxuu leeyahay, *'17 Aadanna wuxuu ku yidhi, Codkii naagtaadaad maqashay oo waxaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray, anigoo leh, Waa inaadan waxba ka cunin, sidaas daraaddeed dhulku waa habaaran yahay adiga aawadaa; maalmaha cimrigaaga oo dhanna dhibaataad wax kaga cuni doontaa. 18 Qodxan iyo yamaarugna waa kaaga soo bixi doonaan, waxaanad cuni doontaa geedaha yaryar oo duurka. 19 Wejigaagoo dhididsan baad wax cuni doontaa, ilaa aad dhulka ku noqotid; maxaa yeelay, dhulkaa lagaa qaaday; waayo, ciid baad tahay, ciid baadna ku noqon doontaa'.* Xukumaadda Aadan ayaa ugu weyneyd kuwa kale. Ilaah wuu canaantay Aadan sababtoo ah masuuliyaddii la siiyey ayuu ku xadgudbay (*'Codkii naagtaadaad maqashay…')* iyo gefkii uu galay (*'oo waxaad wax ka cuntay geedkii…')*. Hadda wixii ka dambeyso dhulkana wuxuu noqday mid dhaawacan. Cagaarka oo dhan waxey ku soo bixi doonaan dhibaato iyo rafaad lagu rafaado habeynta dhulka. Ceeden waxey aheyd dhul wanaagsan, biyo leh oo dhul beereydka ugu wanaagsan aheyd, laakiin hadda

waxyaalahaas oo dhan taarikh bey noqon doonaan. Qoyskii hore waa laga fiijin doonaa Ceeden (eeg 3:24) ugu dambeystana Ceeden nafteeda ayaan jiri doonin. Mar dambe ma jiri doonto wax la yidhaahdo beerta Ceeden oo adduunka ku yaali doonto.

Durbaba xanuunka waa la sheegay oo waxaa lagu soo qabtay Xaawa laakiin Aadan naftiisana wuu dareemi doonaa xanuunkaasi (3:17). Xaawa way dhibboon doontaa markay carruur yeelato; Aadanna wuu rafaadi doonaa markuu beer fale noqdo uu noqdo mid cuntadiisa beerta. Waxaa noolosha oo dhan qabsatay masiibo; qodxan iyo yamaruugna waxey noqdeen kuwa beerfalaha daal ku sii kordhiya. Eebbe ku caasinta waxey dhulka oo dhan u keneysa inkaar.

**4. Shaqada waxey noqoneysa mid aad u adag.** Shaqada waxey aheyd wax jannada ka tirsan (2:15) laakiin hadda waxaa soo kordhay mid aad u culus oo rafaad iyo dhibaato lagu sameynayo. Ninka mar dambe kuma farxi doono inuu dhidido uu shaqeysto. Sida ay markii hore shaqada ugu macaanaan jirtay hadda uguma macaananeyso.

**5. Dhimasho ayaa jiinsiga baniaadmiga soo gashay.** Baniaadmiga waxaa ku soo degtay masiibada xiriirka Ilaah lala lahaa oo lumay oo weliba waxaa raacday ka dhimasha adduunka oo ay nafta baxayso (3:19).

Hase ahaatee, waxaa jira war xun iyo war wanaagsan. Aadan iyo Xaawa si sax ah ayey u qateen xukumaadda uu Ilaah ku xukumay iyaga. Sida qoran, *'Ninkiina wuxuu naagtiisii u bixiyey Xaawa, maxaa yeelay, waxey aheyd hooyadii waxa nool oo dhan'* (3:20). Aadan wax kastoo uu samayeyba wuu ogolaaday xukumaadda Ilaah, wuuna aaminsan yahay ballanta Ilaah. Nimcada Ilaah ayaa ka weyn gefka uu Aadan galay. Aadan wuxuu naagtiisa ugu yeedhay 'Xaawa' ama *'Chawwah'* sida luuqadda Cibraaniga ay ugu qorantahay). Magacaasi waa eray macnahiisa uu yahay 'tan wax dhashaa'. Ma ahan in ay macnahaasi ku egyahay oo keliya inuu jiinsiga baniaadmiga oo dhan iyada oo keliya ka soo baxaya. Saas waa loo fasiri kara laakiin aniga u malayn maayo fasiraadda magacaas ku jirta in ay saa tahay. Runtii waa arin fasiraysa iimaanka ku jira ballanta ku dhigan Bilowgii 3:15.

Xaawana waxaa loogu yeedhi kari in ay tahay hooyada kuwa dhintay oo dhan. Jiinsiga baniaadmiga oo dhan waxey ku baabe'een xukumaadda dhimashada madaama uu jiray gefkii ay Xaawa gashay oo uu raacsanaa kii Aadan. Ilaah ayaa saa yidhi sida qoran, *'ciid baad tahay, ciid baadna ku noqon doontaa'*. Xaawa waa hooyada dadka oo dhan laakiin way wada dhiman doonaan! Hase ahaatee, waxaan arkeynaa Aadan oo Xaawa ugu yeedhayo in ay tahay 'tan noolosha laga helo'. Waa hab uu Aadan ku sheegayo inuu rumaysan yahay

ballanta uu Ilaah naga siiyey Bilowgii 3:15. Maska dhimashuu adduunyada keenay, laakiin waxey u egtahay in ay siba jiinsiga baniaadmiga uu naagta ku heli doono mid burburin doono madaxa maska. Dhimashadu waxey noqon doontaa noolol. Gefkii uu baniaadmiga galay dib baa loo habeyn doonaa. Noolol Ibniaaddanka oo odhan u siman ayaa lagu heli doonaa naagta qaas ahaanna nooloshaasi waxey ku imaan doontaa naagta nafteeda. Aadan wuu aaminsanaa tan oo wuxuu iyada ugu yeedhay: ‘tan noolosha laga helo’. Wuxuu rumeysna in ay si uun ku dhici doonto oo naagta midhteeda jiinsiga baniaadmiga noolol ku heli doonaan.

# Sharafta la daahiyey

***Cutubka 20aad***
(Bilowgii 3:21-24)

Laba walxood ayaa ku yimid rumaysadka uu Aadan rumeystay ballanta uu Ilaah ku balamiyey Bilowgii 3:15.
1. Ugu horeynta, Aadan iyo Xaawa waxey Ilaah ka heleen dhar. *'Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu Aadan iyo naagtiisii u sameeyey dhar harag ah, wuuna u xidhay iyagii'.* Beertii Ceeden, qaawanaan ayaa keentay dareenka ishooseysinta. Ogaanta in ay qaawanayeen ayaa iyaga ku dhalisay in ay Ilaah ku caasiyeen (Bilowgii 3:7, 21). Wixii wagaas ka dambeysay qaawanaanta waxey noqotay ceeb weyn oo dadka hortiisa laguma qaawanaan karo (Bilowgii 9:22, 23).

Huwinta uu Ilaah iyaga qaawanaantooda huwiyey waxey noo caddeyneysaa in haddii aan rumaysad leenahay Ilaah badbaado nagu huwin doono. Waxaa nagula huwiyey xaqnimada Ilaah; kan Masiixa rumaysan wuxuu odhan karaya waxaa laygu huwiyey xaqnimada Ciise (2 Korintos 5:21). Qofkaasi wuxuu haysta dhar nuuraya; waxaa qalbigiisa ka buuxa farxad. Wuxuu huwan yahay dhar nadiif ah waayo, isaguba Ilaah hortiisa nadiif buu ku yahay (Markos 9:3; Muujintii 3:4). Mar dhaw ayaa lagu huwin doonaa sharafta sara kaca jidhka sida ku dhigan 2 Korintos 5:1, 2.

Waxaan fahmeyna in ay huwintaasi horta waajib u aheyd inuu shey kale u naf beelo. Dhimashada waaqdhaca ayuu ku yimid dharka qaawanaanta lagu qariyey. Dhimashada inanka Ilaah ayaan ku helnay sharafta nagula huwinayo xaqnimada inanka Ilaah.

2. Hase ahaatee, waxaa jira hab kale oo arinta huwinta loo eegi karo. **Baarista Aadan iyo Xaawa lagu sameeyey weli ma kaamilmin.** Iyagu ma aanay helin sharafta ugu dambeysa. Waxaa jiri doonta maalin nagula sara kicin doono jidh aanan qurmeynin sida ku dhigan 1 Korintos 15:42-44 waxeyna leedahay sida tan, *'Sarakicidda kuwii dhintayna waa sidaas oo kale. Waxaa lagu beeraa qudhun, waxaana lagu sara kiciyaa qudhunla'aan. Waxaa lagu beeraa maamuusla'aan, waxaana lagu sara kiciyaa ammaan, waxaa lagu beeraa itaaldarro, waxaa lagu sara kiciyaana xoog.'* Aadan haddaba ma gaarin heerka sharaftaasi.

Aadan iyo Xaawa lagama badbaadinin dhimashada ay dhiman lahaayeen. Markaan badbaado heleyno waa mid xiriirkeeni hore e aan Ilaah kala dhunnay aan dib u heleyno, ilawse weli waxaa noo dambeysa badbaadinta jidhkeena la badbaadin doono sida aan uga akhrin karno Rooma 8:23 oo leh, *'…innagoo sugayna carruunoqoshadeenna, taasu waxaa weeyaaan samatobixinta jidhkeena.'* Aadan waxaa la

gaarsiyey heerkaas. Sidaa daraaddeed wuxuu ku qasbanaaday in beerta Ceeden laga saaro. Suurtagal bey u aheyd inuu xiriirka uu Ilaah la leeyahay ku stareexo, laakiin weli ma uusan gaarin heer uu ku helo sharafta sara kaca. Habka caadiga ah uu Ilaah gefka Isaga loo gefay ula dhaqmayo weli isma bedelin ilaa maanta.

Ibniaaddanka wuxuu helay garasho uu ku kala ogaanayo wanaagga iyo xumaanta. Horay buu u dhedhemiyey wanaagga (maxaa yeelay, waxaa jirtay mar uu iin la'aan ahaa); xumaantana wuu dhedhemiyey (madaama uu haddan iinlaawe yahay). Ilaah wuu hadlay haddana. Ilaah wuxuu Eraygiisa ku yidhi, *'22 Oo Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu yidhi, Ninku wuxuu noqday sidii mid innaga inaga mid ah, isagoo garanaya wanaagga iyo xumaanta; oo haatan, waaba intaasoo uu gacantiisa soo fidiyaa, oo uu wax ka qaataa geedka nolosha, oo uu cunaa oo uu weligiis noolaadaa: 23 sidaas daraaddeed Ilaah isaga w uu ka saaray Beer Ceeden, si uu u beerto dhulkii isaga laga soo qaaday.'* (Bilowgii 3:22, 23).

Baniaadmiga weligii buu noolan lahaa laakiin uma sii noolan lahayn madaama uu Ilaah ku caasiyey aawadeed ilawse waa madaama uu ka cunay geedkii noolosha. Hadda way gefeen axdigaas. Baniaadmiga wuu gefay xiriirkii uu Ilaah nooloshiisa oo dhan la yeelan lahaa. Arintaa horey ayey u sii jirtay markii la uumayba. Aadankii hore si joogta ah ayuu Ilaah xiriir ula

lahaa oo mar kastay wada kulmi jireen markay maalinta qaboobeed. Nooloshaas Ilaah xiriir lala lahaa waxey aheyd mid weligeed jiri laheyd. Taasi ayaa ah micnaha noolosha weligeed ah. Waa noolol aanan idlaaneynin oo weliba waxey aheyd noolol aan caadi ahayn. Waxey aheyd mid sbeeshel ah. Waa noolol si joogta ah Ilaah loogu dhawyahay. Aadan horey buu u dhedhemiyey nooloshaasi weligiina wuu noolaan lahaa isagoo aan dhimasho arkeynin.

Laakiin hadda gefkii uu Ilaah u gefay ayuu ku waayey nooloshaas uu qof kasta maanta u shaleynayo inuu helo. Waa laga fogeeyey geedkii noolosha si uusan mar dambe wax uga cunin. Waxaa qoran, *'Kolkaasuu ninkii eryay; beer Ceeden barigeedana wuxuu tagay Keruubiim, iyo seef ololaysa, oo dhan walba u jeesanaysa, si ay u dhawrto jidka geedka nolosha'* (Bilowgii 3:24).

Aadan iyo Ilaah dib bey u heshiyeen, laakiin waxaa weli waajib ku aheyd inuu caddeeyo naceybka uu ku caasinta Ilaah u qabo. Badbaadada ugu dambeysa e Aadan xataa xagga jidhka weli lama gaarin. Ilaah wuxuu go'aan ku gaaray inuu naagta iyo ninka buriyo oo wuxuu meeshooda geliyey Keruubiim – taa oo aheyd mid ka mid ah noocyada Malaa'igaha. Malaa'igtan dariigay ilaalinaysay si uusan Aadan dib ugu soo noqon beerta. Seef ololeysa ayaa wareeganeysay si aysan u jirin wax halkaa soo mooda. Si kastoo uu Aadan isku deyo inuu ku

soo noqdaba ma awoodi lahayn inuu jannada dib ugu soo noqdo.

Waxyaalahan oo dhan waxaa sababay gefkii uu Aadan Ilaah ka galay. Miyuu jira hab dib loogu noqdo? Waxaa jira hal hab oo keliya oo rajo lagu lahaan karo waana habka ku yaala Bilowgii 3:15, waana in wax kasta dib loo rogaa. Jiinsiga baniaamiga laba meel ayuu u kala qaybsami doonaa. Naagta waxaa ka soo bixi doonaa ‘midh’. Midhtaasna waxaa ka soo bixi doona badbaadiye. Wuxuu ku dhallan doonaa baniaadminimo, isagoo ah midhta naagta sida aan aayaddaas uga aragnay. Jubudda xoog leh ayuu ku dhufan doonaa wax kastoo uu sheeddaanka dhisay si uu u burburiyo hawsha sheeddaanka oo dhan.

Habkan sheeddaanka looga badbaadaya waa mid tallaaba tallaaba ku imaanaya. Qarniyo badan buu Ilaah waddadas diyaarin ayay. Oo haddaba waxaa la gaaray mar uu mid aan aabba lahayn dhallan doono laakiin wuxuu ahaan doonaa midhta naagta. Isagu wuxuu  noolaaday noolosha aan noolaan lahayn oo wuxuu dhintay dhimashada aan dhiman lahayn. Isagu wuxuu leeyahay xaqa asliga ah iyo rumeysadka dhabta ah. Wuxuuna haysta hagaajinaya waddada dhabta ah e lagu badbaadayo.

Sida aan Ciise u rumeysaneyno ayaa hawsha sheeddaanka oo dhan dib logu rogaya. Hadduu

sheeddaanka naga dhigay kuwa Ilaah ku caasiya, Ciise wuxuu naga dhigaya kuwa Ilaah u nool. Hadduu maska ka dambeyey gefkii ay Aadan iyo Xaawa galeen, Ciise wuxuu keenaya dib u heshiisin. Hadduu sheeddaanka noolosha weligeed ah na gefiyey, Ciise wuxuu dib noogu soo celinaya nooloshaas weligeed ah e aan gefnay. Haddii ay hawsha sheeddaanka naga dhigtay mid si xoog leh jannada noogula soo eryey, shaqada Ciise waa inuu dib noogu soo celiyo si aan noolol daa'imis ah ugu noolaano. Dib ayuu u rogaya wax alla wuxuu maska sameeyey, wuxuuna dib u rogaya dareenkii naga dhigay kuwa iinlaawayaal ah gefkii aan galnay awgii, awoodda gefka oo ugu dambaystii ayuu baabi'in doonaa oo bartiisa dambe lama arki doono.

Rumaysad aan Ciise rumaysanayno ayaan ku heleynaa nolloshaa weligeed ah. Waa sida iyadoo aan beertii Ceeden dib ugu noqonay.

# Baybalka iyo taarikhdii hore

***Cutubka 21aad***

(Bilowgii 4:1-26)


Dhamaadka cutubka afaraad e Bilowgii wixii ka bilowdo waxaa suurtagal ah in ay noo muuqanayso dhabta sheekada adduunka ku saabsan sida ay mutaclimiinta u arkaan iyo weliba dhacddooyin waayahaas hore bilowdday oo ilaa maantadan socda. Bilowgii 4:11 waxey na geynaysa taarikhda markay aheyd 13,000 dhallashada Ciise ka hore.

Sida aan uga akhrinayno Bilowgii 1:1-2:3 in Ilaah uu adduunyada uumay oo uunkaasi uu ka tirsanaa jiinsiga baniaadmiga, maalmaha Bilowgii cutubka kowaad waa qayb ka tirsan luuqadda sawirada e habka sheekada loo sheeggay mana ku habboono in loo qaato in ay sharaxayso taarikhda dhabta ah e adduunka la uumay. Mutaclimiinta sayniska waxey aaminsan yihiin inuu adduunka jiro 4,000,000,000,000 sanno. Weliba waxey fikirad ka hayaan taarikhda dhulka la uumay, taarikhda ninka ugu horeyey la uumay, iyo taarikhda baniaadmiga maanta nool la uumay taa oo ah 100,000 – 75,000 sanno oo la soo dhaafay, laakiin Baybalka wax taarikh ah uu waxyaalahan nooga sheegayo ma jiraan.


Sida looga fahmay waxyaalihii dadkii horay u dhintay ka soo haray, waxey u egtahay in qofka ugu horeyey ka soo aasaasmay qaaradda Afrika

ama ‘dhul aad beerta ugu ronaa’ markay taarikhda aheyd 100,000 – 75,000 oo sanoo la soo mooday dhallashada Ciise ka hore oo ibnimaaddanka wuxuu ku faafay qaaradda Afrika, Yurub iyo Asiya (eeg qaaraddda 1aad e hoos ku sawiran).

Markay taarikhda aheyd 20,000 oo sanadood dhallashada Ciise ka hore ayuu jiinsiga baniaadmiga gaaray qaaradda Ameerika iyo weliba Australiya (eeg qaaradda 2aad e baalka hoose ku yaala).



*Maabka 1aad: Sida uu firka baniaadmiga ku faafay*



*Maabka 2aad: Dadka wuxuu ku faafay Ameerika iyo Australiya*

Waxaa jiray hal jiinsi oo baniaadmiga metelayey. Baniaadmiga oo dhan waa isku dhiig sida ku dhigan Falimaha Rasuullada 17:26. Taarikhda waxey sheegeysa in 20,000 oo sanadood dhallashada Ciise ka hore ay dad kaloo jiinsiya kala leh horay u jireen. Waxaa jireen dad Afrikaan ah, Hindi iyo dad reer Yurub ah oo isku dhex noolaa iyo kuwa kale oo bariga lagu tilmaamayey 20,000 sanadood dhallashada Ciise ka hore. Kuwa Ameerika iyo Australiya u safray waxey ahaayeen qoomiyad gooni ah; waxaa loo kala qaybsamay Afrikaan, isku jirka Hindida iyo reer Yurub iyo kuwa bariga.

Bilowgii 2:4-3:24 waxey si masaal ah noogu sheegeysa sheekada ku saabsan sida uu ninka ugu

horeyey Ilaah ugu caasiyey. Luuqadda uu ku hadlayay iyo iyo magaca ninka ugu horayay loo yeedhayay waa mid aan lays weydinin oo muddo dheer laga soo tegay. Qoraageena isagoo istecmaalaya luuqadda Griigta e lagu hadli jiray 1,000 sanno dhallashada Ciise ka hore wuxuu ugu yeedhaya 'ninka'.

Waxey u egtahay in 'ninka' looga sheekeynaya Bilowgii 4:1 uusan dhabtii ahayn 'ninka' looga hadlaya Bilowgii 1-3. Tan waxey noo sii caddanaysa intaan sheekada sii dhex geleyno. Qaabiil, Haabiil iyo Seet ma ahan carruurta keliya e ugu horaysay uu weligiis dhallay ninka ugu horayay. Qoraagga sababtuu u leeyahay 'ninka' wuxuu doonaya inuu wax nooga kala saaro waxyaala dhacay tobnaan kun sanadood oo la soo dhaafay. Madaama sheekada lagu sheekay hab gaaban oo sawir sheekada lagu fahmo leh, Bilowgii 4:1 si sahlan ayaan wax uga fahmi karnaa waayo, waxaa qoran sida tan, *'Ninkiina naagtiisii Xaawa aheyd buu u tegey; wayna uurasatay, oo Qaabiil bey dhashay, oo waxey tidhi, Wiil baan ku helay Rabbiga caawimaaddiisal'*.

Waxaan hadda u guda geleynaa adduunyada Mesobotamiya iyo taarikhddeeda ku saleysan waaga markuu ahaa 13,000 – 10,000 oo sanadood dhallashada Ciise ka hore. Ma ahan fikirad saxsan inaan u maleyno in ay uun saddex ruux oo keliya adduunyada ku soo hareen wakhtiga

Bilowgii 4:1 looga sheekeynayo (Aadan, Xaawa iyo Qaabiil). Qaabiil wuxuu sheegaya in intuu adduunka kor socda uu dhimasho ku sugan yahay maxaa yeelay, mid alla kii isaga arka ayaa dilli kari (Bilowgii 4:14). Bilowgii 4:14, 15 waxey noo caddaynaysa in ay jireen dad kaloo badan adduunka korkiisa. Ilaah callaamad ayuu u yeelay Qaabiil si uusan ninna isaga u dillin (Bilowgii 4:15). Ma ahayn in ay calaamaddaas caawin aysay Aadan iyo Xaawa si ay ku gartaan inankooda! Bilowgii 4:17 waxaan arkayna Qaabiil oo magaala dhisay. Dad fara badanna way jireen oo qaarkood waxey ku noolayeen magaalada Qaabiil.

Arinta kaloo muhimka ah oo ah inaan ogaano waxey tahay arinta aan ka heleyno Bilowgii 4:17-26 oo ah in ay fikiraddan la mid tahay waxa aan ka ognahay dadkii jiri jiray 10,000 oo sanadood dhallashada Ciise ka hore. 'Ninka cuseb' oo ay mutaclimiinta sayniska ugu yedhaan *homo sapiens* taarikhddiisa waxey dib ugu noqoneysa ilaa 50,000 oo sanadood dhallashada Ciise ka hore ama xataa ka sii hore. Haddii ay dhacdada Bilowgii 1:26-27 ay tahay inaan ka dhigno in ay dhacdday 50,000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore iyo haddii ay dhacddada Bilowgii 4:17-26 ay tahay mid dhacdday 10,000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore, waxey noqoneysa inaan aayado yar oo Bilowgii ka tirsan ku dhex marayno tobnaan kun oo sanadood.

Erayga Cibraaniga *Aadan* (kaa oo lagu macneynayo xarafta luuqadda Cibraaniga oo ah *aleph*) 34 jeer ayey ku dhigantahay Bilowgii 1-5. Micnaha eraygan waa ‘nin’ ama ‘baniaadmi’. Waxey macna u tahay qayb ka tirsan jiinsiga baniaadmiga iyo weliba qof shaqsi ah. Labaatan iyo labba (22) jeer[2] ayaa erayga *ha’adam* (‘ninka’) loo istecmaalay ‘baniaadmiga’ (Bilowgii 1:27) ama ahayn qofka sida iyaduna ay ku dhigantahay Bilowgii 2:7.

Eraygaasi haddaysan xarfaha ‘…ka’ ku jirin wuxuu macna u noqon karaya ibnimaadmi ama qof. Saddex jeer ayaa erayga Cibraaniga e *lamed* (‘ku’ ama ‘u’) laga horeysiyey erayada, ‘ninka’ iyo ‘Aadan’ wayna adagtahay sida labadaan loo kala saaro. Laakiin waxaa laga yaaba in ay Bilowgii 2:20 ay macna u tahay ‘uu ninka’; Bilowgii 3:17 waxey macna u noqon karta ‘tilmaanta Aadan’.[3]

Meesha ugu horeysa uu Baybalka erayga Aadan magac ka dhigayo (‘Aadan’) waa Bilowgii 4:25. Waxaa haddana sii caddaaneysa inuu erayga magac ahaan loo istecmaalayo sida ku dhigan Bilowgii 5:3-5. Wakhtiga aayadahan ka horeyey erayga inta badan waxaa loo haystay in erayga *aadan* loo tafsiirayay sida ‘Mudane jiinsiga baniaadmiga’ ama ahayn ‘Mudane baniaadaan’.

Waxaa halkan ka soo muuqata in Mudane Jiinsiga baniaadmiga ay aheyd macna tafsiiraya dad kala duwan oo jiri jiray wakhtiya kala duwan. Inta badan erayga *aadan* looma arki jirin inuu magac yahay. Markuu eraygaas magac yahayna waxaa la dareemaya inuu yahay mid Mudane jiinsiga baniaadmiga lagu tilmaami karo. **Wakhti dheer oo aan la khiyaasi Karin ayaa u dhexeeyey Bilowgii 1-3 iyo Bilowgii 4:1aad.** Haddaba Mudane Jiinsiga baniaadmiga ma ahan isla qofkii horey looga hadlayey. Haddii aan ka eegno Bilowgii 5:1, eraygaas laba jeer ayuu muuqanaya. Si caadi ah ayaa marka hore loo yidhi 'Aadan' oo haddana waxaa loo turjumay inuu yahay 'nin' – laakiin waa uun isla eraygii.

Bilowgii 1-4 waa sheeko laga soo koobay dhacddooyin kumaan sanndood dhexdooda dheceen. Waa sababtaas wuxuu Bilowgii 4:14, 15 u hadlayo sida iyadoo ay kumaan ruux adduunyada jogeen oo Qaabiil wuxuu noqday mid magaala dhisay sida ku dhigan Bilowgii 4:17. Qaabiil, Haabiil iyo Seet waxey ahayen carruurtii 'ninka' laakiin ma ahayn fac ku xigay faca 'ninka' sida ku dhigan Bilowgii 1-3. Dadka Ameerika iyo Australiya waagii sannadka 20,000 dhallashada Ciise ka hore waxey ahayen kuwa ka soo farcamay 'nin' sida ku dhigan Bilowgii 1:26 laakiin ma ahayn kuwa ka soo farcamay 'ninkii' noolaa sannadka markuu ahaa 13,000 dhallashada Ciise ka hore kaa oo ahaa aabbaha Qaabiil.

Qaybta aan haddan geleyno waxey ku saleysan tahay Bilowgii 4:17. Waxaan gaarnay wakhti aan is barbar dhigeyno waxyaalihii aan akhrinay iyo kuwii aan taarikhda jiinsiga baiaadmiga kaga baranay baarista taariqada. Way adag tahay si dhacddooyinka Bilowgii 1-3 loo barbar dhigo aasaaska taariqada, laakiin wixii Bilowgii cutubka 4aad ka bilaabata waa suurtagal inaan dhacddooyinkaas aan barbar dhigno taarikhda baniaadmiga e aan baaritaan kale ka helnay.

Abtirsiga Bilowgii 5-10aad iyaduna waxey u ekaan kartaa in ay waxyaala ka maqan yihiin laakiin suurtagal ma ahan inaan taarikhda Bilowgii cutubka afraad aan dib ugu celino 100,000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore amaba 30,000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore. Marxalladda ugu horeysay Baybalka e aan taarikh maskaxgal ah ku khiyaasi karno waa wakhtigii nebi Ibraahim oo aheyd 2000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore. Wakhtiga sheekada Terax ku saabsan (Bilowgii 11:27-32) waxaa lagu khiyaasi karaya 2,135-1,925 dhallashada Ciise ka hore. Haddii aan dib u xisaabno, taarikhda dhacddooyinka Bilowgii 10:1-11:26 waxey ku sii ballaaranayan wixii u dhexeya 5,000-2135 dhallashada Ciise ka hore (tan waa dood furan). Wakhtigii daadka (Bilowgii 6:9-9:28) waxey u egtahay in taarikhddaasi lagu khiyaasi karo 5,600-5000 dhallashada Ciise ka hore. Dhacddooyinka

Bilowgii 4:1-5:32 wakhti dheer ayey qaadatay taa oo aan ku khiyaasi karno 13,000-5,600 dhallashada Ciise ka hore. Sidaa daraaddeed taarikhda Bilowgii 4:1aad waa in ay u dhowddahay wakhtigii 13,000 dhallashada Ciise ka hore. Bilowgii 1-3 ayaa ka war bixinaysaa dhacddooyinka uumista adduunka oo dhan wixii wakhtigan ka horeyey.

Baybalka wuxuu wakhtiyadiisa oo dhan ku khiyaasaya dhacddoyinka dheceen, laakiin markaan gaarno Bilowgii 4:1 sheekadu way yaraneysa. Marka ugu horeysa waxey aheyd samada iyo dhulka (1:1), haddana waxey ku soo noqotay oo keliya dhulka (1:2-2:3). Waxey ku sii noqotay jiinsiga baniaadmiga e ku noolaa beerta Ceeden sida ku dhigan 2:4-3:24. Markii 4:1aad la gaaro sheekadu way ka sii koobnaneysa sidii hore. Hadda waxaan ku jirnaa wakhtiyadii adduunka Mesobotamiya, waxaanna eegeyna laba walaala ah oo ka soo askunmay ‘ninka’ iyo ‘tan noolosha bixisa’.

# Qaabiil iyo Haabiil

***Cutubka 22aad***
(Bilowgii 4:1-7)

Gefkii uu Aadan galay wuxuu sababay inuu walaal walaalkiis nafta ka gooyo (Bilowgii 4:1-16), iyo weliba waxaa timid bulsha quruntay (4:17-26). Ilaa maantadan waxaa adduunyada xukumaya dhimasho (5:1-32) oo adduunyada waxey noqotay mid awoodda Ibliiska iisu fidisay (6:1-8). Habab badan oo kala duwan ayuu gefka ku shaqeya. Marka ugu horeysa qofka gefa wuxuu noqonaya mid Ilaah xiriirka ka goostay. Bacdigeedna gefka gudaha ayuu naga burburinaya. Aadan markuu Ilaah ku gefay wuxuu dareemay cabsi iyo gardarro. Awoodda gefka markaasuu dibadda u soo baxaya si loo arko. Sheekada Qaabiil iyo Haabiil waxaan ka arkeynaa in nacayb, naxariis darro iyo masayr ummadda kale ka soo gaaray. Isla markay Aadan iyo Xaawa Ilaah ku caasiyeen, carruurtoodina waxey bilaabeen in ay dhexddooda isku caasiyaan.

**1. Jiinsiga baniaadmiga wuxuu u qaybsamay laba.** Waxaan arki karnaa midhta naagta, qayb ka tirsan jiinsiga baniaadmiga oo sheeddaanka ka guuleysan doonto. Midhta hal sheyna way noqon karta waxyaala badanna macna way u noqon kartaa. Waa badbaadiyaha iyo Dadkiisa oo dhan. Waxaa kaloo jirta midhta maska tanna waxey

noqon doontaa qayb ka tirsan jiinsiga baniaadmiga taa oo ahaan doonta mid sheeddaanka la dhinac ahaan doonto oo Ilaah cadaw ku ahaan doonto. Xaawa laba carruur ayey leedahay (Bilowgii 4:1-2a). Hal cunug waa mid Ilaah hortiisa wax ku leh; midka kalena wax uu Ilaah hortiisa ku leeyahay majirto (Bilowgii 4:4-5).

**2. Qof kasta wuu ka war qabaa jiritaanka Ilaah.** Labada wiil e qoyska Aadan iyo Xaawa ka dhashay waxey daremen in ay muhim tahay in Eebbe la caabudo. Kuwa Ilaah addeeca iyo kuwa aan addeecinba, kuwa badbaadiyaha aqoonsan iyo kuwa aan aqoonsanaynba, labada qaybood e jiinsiga baniaadmiga u dhashay waxey xoogga wada saarayan inuu Alla caabudka aad muhim u yahay shaqsi kasta. Qaabiil wuxuu keenay waaqdhac, Haabiilna isla sidaasuu yeelay (4:2b-4a). xataa kuwa aanan Ilaah toos u addeecin way u baahan yihiin macaawinada Ilaah.

**3. Qof kasta waa inuu ka tirsanaado labada nooc e Alla caabudka midkood.** Haddaba halkan waxaa jiraan laba wiil oo walaala ah. Marxaladaha ay ku jiraan waa kuwa ay ka siman yihiin. Hal waalid ayaa wada dhallay. Laakiin mid baryadiisa Ilaah wuu aqballay kan kalena lagama aqbalin (Bilowgii 4:4, 5). Haddaba waa maxay waxa kala duwanaanshadaas keenay?

Bal ka feker **Haabiil.** Wuxuu waaqdhaciisa ka keenay xoolahiisa, Ilaahna wuu ka ogolaaday saddaqada uu bixiyey. Haabiil wuxuu u baahnaa inuu Ilaah caabudo sidaa daraaddeed wuxuu dareemay in ay muhim tahay inuu neef soo qabto, gawraco si uu Ilaah saas u hor tago. Haabbiil aad buu habkaas u aaminay oo wax shaki ah uguma jirin inuu Ilaah asmici doono waaqdhaciisa (Cibraaniyada 11:4).

Wuxuu dareesan yahay in ay muhim tahay inuu waaqdhac helo. Wuxuu soo qabtay neef, wuu gawracay oo sidaas buu Ilaah ku hor yimid. Fikiradda waxey ka soo askumatay wuxuu Ilaah sameeyey sida aan uga akhrinayno Bilowgii 3:21. Ilaah wuxuu dillay neef si uu ku qariyo qaawanaanta Aadan iyo Xaawa. Dhimashada neefka waxey iyaga u noqotay dabboolid ceebtooda lagu dabboolay. Haabiil wuxuu fikiraddas ka raacay Ilaah. Wuxuu doonaya in isagana laga dabboolo ceebtiisa. Wuu ka war qaba inuu Ilaah ku caasiyey. Wuxuu dareensan yahay inuu neef la gawracay yahay habka keliya oo ceebtiisa lagu dabbooli karo. Xayawaanka iyo Baniaadmiga isku maalin ayaa la uumay maalinta lixaad. Baniaadmiga iyo xayawaanka waxaa jiraan waxyaala badan oo ay ka siman yihiin. Haabiil wuxuu aaminsan yahay in neef la gawracay uu yahay kan keliya uu ceebtiisa ku dabbooli karo isla sida uu Ilaahba u yeelay waalidkiisa (Aadan iyo Xaawa).

Wuxuu ogaaday in ku caasinta Ilaah ay tahay mid in la edbiyo ku habbon. Dhimashada neefkan waxey callaamad u tahay in ku caasinta Ilaah ay edbin istaahisho. Haabiil wuxuu qiranayey baahida uu qabo. Wuxuu aaminsan yahay in uu waaqdhacaas yahay mid wax tar leh. Mushaarka Alla ku caasinta waa dhimasho (Bilowgii 3:19), laakiin wuxuu aaminsan yahay in dhimashada neefkaasi ay ahaan doonto mid laga aqbalo. Haddaba neefka wuxuu u dhintay gefkuu Haabiil Ilaah ka galay Ilaahna wuu u ogolaaday inuu Haabiil saan hortiisa ku ansaxnaado. Haabiil wuxuu aaminsan yahay inuu Ilaah ka ogolaan doono waaqdhacaas uu baxsaday.

Ilaah wuu ogolaaday saddaqada neef gawricidda xataa intuusan Ciise imaanin. Gawricidda neefka waa callaamad tilmaameysa wuxuu Ilaah nagu siin doono Ciise Masiix. Waa Haabiil kan iimaan ku bilowbay habkaas saddaqada loo bixinayo, oo rumeysadkiisa ayuu saa ku caddeynayey. Waxey tilmaameysay mustaqbalka. Ciise ayaa ah kan waaqdhaca nool noo noqday. Isaga ayaa noo noolaaday noolosha aan ku noolaan lahayn. Wuxuu u dhintay sida isagoo wax gef ah galay. Ma jirin wax qalad ah uu geestay laakiin annaguu noo dhintay. Habka badbaadada lagu heli karo waa uun iyadoo la helo wax gefkeena u dhinta, waa inaan rumeysanno kan noo noolaaday oo inoo dhintay. Isla markaan aamineyno waqdhacaas asliga ah Ilaah hortiisa waxaan ka nahay kuwa laga asmacay waaqdhacooda.

Bal haddana aan ka fekerno noolosha **Qaabiil.** Haddii uu neefka la gawracayo noqday mid mushaarka ku caasinta Ilaah looga gudbaya, haddaba midhaha dhulka ka soo baxa maxay macneynayaan? Waxey macna u tahay natiijada wax shaqa culus lagu helay. Ilaah wuxuu sheegay in midhaha dhulka ay ku soo bixi doonaan uun shaqa adag oo la qabtay sida ku dhigan Bilowgii 3:19. Qaabiil wuxuu rabbay inuu Alla bari sameyo laakiin wuxuu keenay midhaha dhulka. Ma jirin wax dhimasho ku saabsan oo midhaha dhulka ku jira. Midhaha waaqdhaq uma noqon karaan gefka uu baniaadmiga galay waayo, midhaha noolohooda oo dhan uma bixinin sida uu neefka la gawracaya u bixiyo. Midda kale abuurista cuntuda la abuurayo waxaa lagu soo qabanayey in ay tahay mid shaqada baniaadmiga ku timaaddo (Bilowgii 3:18, 19). Ilaah arintaan buu xoogga saarayey. Waaqdhaca uu Qaabiil baxsaday waxey aheyd badbaadada uu u shaqeystay! Waxey aheyd hab uu iskiiga dhaadhiciyey in hadduu wixii uu shaqeyey Ilaah horgeyo uu barakadeeyo, isagoo u maleynayo inuu nadiifinta ku caasinta Ilaah heli doono. Laakiin habkani wuxuu ahaa habkii midhta maska. Tani waa dhinaca ninka caadiga ah ama awooddiisa iyo fikirkiisa ku shaqeyo. Waxeyna u egtahay in ay tahay hab uu qofka ku doonayo inuu shaqadiisa wanaagsan Ilaah badbaado kaga helo ama uu Ilaah ku laalusho shaqadiisa wanaagsan. Laakiin badbaadada Ilaah ma ahan

mid shaqa wanaagsan lagu helayo (Efesos 2:8-10; Rooma 3:20, 22-24, 28; 4:4-6). Qaabiil waxey u egtahay inuu Ilaah ku leeyahay, ‘Rabbiyow, hawshan oo dhan adaan kuu sameyey. Miyaanad igu ogolaneynin hawshan wanaagsan oo adag e aan kuu sameyey?’

Waxaa jiraan laba diimood oo kala duwan. Diimaha uu baniaadmiga sameystay oo dhan waxaa saldhig u ah hawlaha wanaagsan e la qabto. Habka uu Qaabiil Ilaah ula yimid ma ahayn mid iimaan ku saleysan. Markuu saddaqada bixinayay wuxuu aaminsana inuu doonayo in Ilaah uu arko dadaalkiisa iyo shaqada wanaagsan uu qabtay. Runtii waaqdhaciisa wuxuu ahaa mid aad uga duwan kan uu Ilaah rajeynayey. Hase ahaatee, habka uu Qaabiil ku yimid wuxuu ahaa mid qaldan. Shaqada wanaagsan e aan qabano ma noqon karto hab aan Ilaah isku jacleysino.

Haabiil wuxuu iimaankiisa ku caddayay neef uu gawraco. Haabiil waxaa u caddaatay in waaqdhaca uu yahay mid lagama maarmaan ah. Annaguna haddii aan talla saarano oo aan rumeysano Ciise waa nala asmici doonaa. Ilaah wuu na aqoonsanaan doonaa wuuna ogolaan doonaa saddaqada aan Isaga u bixinayno – dhiigga inankiisa madiga ah.

# Laba hab oo Ilaah Lagula kulmo

***Cutubka 23aad***
(Bilowgii 4:1-16)

Qaabiil iyo Haabiil weli way nala joogaan. Ilaa hadda waxaa jiraa laba hab oo Ilaah loogu tegi karo. Weli way nala joogaan ilmaha ruuxiga e Qaabiil. Dadka waxey odhan karaan, ‘anigu waxaan ahay mid aanan ka daahin allabariga, meelaha allabariga ayaan doondoonaa waanna kala maydhaa, waan ka toobad keenaa gefkeyga oo dhan, dadaal weyn ayaan wadaa, runtii waxaan ahay qof nadiif ah’ iyo waxyaala kaloo la mid ah oo aad magacaabi kartid. Weli waxyaalahan waa diintii Qaabiil.

**1. Qaabiil aad buu iskuugu kalsoonaa.** Aad buu u xanaaqay sababtoo ah Ilaah ma ogolaanin sadaqadiisa (Bilowgii 4:5b). Waxaan jacaylnahay inaan hababka nala quman isku badbaadino. Waxaan jaceylnahay inaan Ilaah xiriir kula lahaano hababka nala quman oo waxaan dooneynaa inaan shaqadeena wanaagsan aan Ilaah ku laalushno. In kastoo uu Qaabiil ogaaday inuu Ilaah ku caasiyey wuxuu u maleyey inuu Ilaah isku jacleysin doono shaqada wanaagsan uu qabtay awgeed oo wuu ka soo hor jeeday wax kaloo talla ah oo ka dhaadhicinaysa inuu u

baahan yahay waaqdhaq bedelkiisa u noolaado una dhinto.

**2. Wuxuu doortay habkii isaga la qumanayd inuu badbaado ku heli karo.** Haabiil wuxuu raacay habkuu u fahmay in ay aheyd wax uu Ilaahba sameyey sida aan uga akhrinayno Bilowgii 3:21. Laakiin habka uu Qaabiil istecmaalay wuxuu ahaa mid uu isaga naftiisa sameystay.

**3. Diinta Qaabiil waxey istecmaaleysay saddaqa bixinta si ay inkaarta Ilaah iskiiga leexiso,** laakiin qalbigiisa Ilaah hortiisa kuma qumaneyn. Wuxuu sameynayey waxey aheyd uun wax caada u ah laakiin ma ahayn wax qalbigiisa ku jiray ama ma ahayn habka uu Ilaah ugu tallagalay inuu baniaadmiga ku badabaadiyo.

**4. Dabiicadda Qaabiil waxaa lagu tilmaamay inay aheyd mid Ilaah cadaw ku ah** (4:6). Wuu ku socon waayey habka uu Ilaah ugu tallagalay in lagu dhaqmo. Sidaa ayay la tahay kuwa sheeddaanka ku lug leh oo dhan. Si joogta ah ayey Ilaah col ula yihiin. (Rooma 5:10; 8:7; 2 Korintos 5:20), waxeyna u baahan yihiin in ay xiriir cuseb dib Ilaah ula yeeshaan. Haba ahaatee, Ilaah wuxuu Qaabiil siiyey hab uu ku badbaadi karo. Oo waxaa isaga la weydiyey sida tan, *'Haddaad wax wanaagsan samaysid, sow laguma aqbaleen?'* (4:7). Tani waa hadiyad cafis lagu helayo. 'Sow laguma aqbaleen?'

macnaheeda waa ‘sow laguma cafiseen’. Qofku hadduu wanaag sameyo wuxuu helaya cafis iyo qalbi deggan ilawse Qaabiil ma uusan danaynin hadiyaddan.

**5. Madaama uu Qaabiil diiday habka uu Ilaah noo faray inaan ku dhaqanno si aan badbaado ku helno, wuxuu noqday mid ku caasinta Ilaha u hogaansama.** Ilaah wuu u digay isaga. *‘dembi illinkuu kuugu gabbanayaa; doonistiisuna aday noqon doontaa’* (4:7). Waa sida dugaag duureed na gaadaya oo doonayo inuu na burburiyo. Qaabiil wuxuu fahmay inuu gefka ka awood badan yahay sida uu horaan ku qiyaasayey.

**6. Waxyaalahan oo dhan waxey ku soo koobteen nacayb ay dadka Ilaah isku layaan.** Qaabiil wuxuu iska dhigay inuu aad Saaxib ula yahay Haabiil, wuxuuna ku caasumay meel cidla ah wuuna dilay. Ma jirin wax xun uu Haabiil ku sameeyey Qaabiil laakiin nacaybkii uu qabay iyo sida uu u fahmay inuu iinlaawe yahay ayaa ku dhalisay inuu wax cadaadiyo. Midhta maska weligeedba way ka soo horjeedi doontaa kuwa uu Ilaah asmici doono oo dhan. Isla sida uu qofka gef badan isku ogyahay ayuu baaba’ badan dadka kale ugu sameynaya. Rumaysadka runta ah wuu ka saramaraya waxyaalaha adduunka oo dhan. Qaabiil kama uusan xumeen sababta uu Ilaah u asmacay Haabiil laakiin wuxuu ka xumaa sababta aanan isaga loo asmicin. Waxey isaga ku sii

hogaamisay inuu hinaas iyo nacayb ka qaado oo xataa waxaa ku sii dhashay qalbiga wasakhda ah e nafta gooya oo walaalkiis Haabiil ayuu baabi'iyey.

Qaabiil wuxuu haystay nooc diin ah! Wuxuu iska dhaadhiciyey inuu habkiisa barakada Ilaah ku heli doono. Wuxuu doonayey inuu Ilaah gorgortan la galo. Laakiin ma oga inuusan barakada Ilaah saa ku heli doonin maxaa yeelay, isagu is hoosaysis ma lahan rumeysadna ma lahan. Rumaysadkii iyo ficilkii Haabiil unbaa ah daawada Ilaah lagula heshiin karo oo badbaado looga heli karo. Diimaha ay dadka hagaagsadeen inta badan waxey dhalliyaan uun nacayb iyo dil Masixiinta loo qabo. Rumeysadka runta ah waxaa lagu helaya ficilo xaq ah sida ku dhigan 1 Yooxanaa 3:12 oo leh sida tan, *'Oo yaanan ahaanin sida Qaabiil oo ahaa kan sharka leh oo walaalkii dilay. Oo muxuu u dilay? Waayo, shuqulladiisu waxey ahaayeen shar, oo kuwii walaalkiisna xaq bey ahaayeen'.* Xaqnimada keligeed ayuu qabay Qaabiil waxey u geysatay inuu waxyaalaha Ilaah ka soo hor jeesto. Midhta maska weligeedba ma wayni doonto nacayb si kastoo loogu dedo waxyaala badanoo wanaagsan.

Ilaah muxuu ka dareensan yahay Qaabiil? Way iska caddahay inuu Ilaah jaceyl ka buuxo oo uusan wax xumaan ah qabin Qaabiil. Ilaah wuxuu Qaabiil u sheegaya inuusan gefkiisa ahayn mid la qarin karo sida ku dhigan Bilowgii

4:9. Qaabiil wuxuu isku deyay inuu gefkiisa qariyo waayo, markuu Ilaah walaalkiis ka su'aalay wuxu ku jawaabay sida tan, *'Rabbiguna wuxuu Qaabiil ku yidhi, Walaalkaa Haabiil meeh? Kolkaasuu yidhi, ma aqaan: ma anigaa ah walaalkay ilaaliyihiisa?* (4:9). Ilaahna wuu ku celiyey oo wuxuu ku yidhi, '*Maxaad samaysay? Codkii dhiiggii walaakaa ayaa dhulka iiga dhawaaqaya e'* (4:10). Wax Ilaah ka qarsoon ma jiraan. Naf bixinta waa Alla ku caasinta ugu weyn. Dhiigga dhulkuu ka dhawaaqaya. Wax gef ah oo la sameyn karo oo Ilaah laga qarin karo ma jiraan. Waxaa dhici kartaa inuu Qaabiil maydka walaalkiis meel cidla ah ku aasay laakiin weli dhiiggiisu dhulkuu ka dhawaaqayo. Gefka aan galno kama qarin karno Ilaah. Ilaa aan ka toobad keennana weligood dhawaaqooda qalbigeena kama baxayo. Waxaa uun lagu xalin karaya iimaan iyo toobadkeenid.

Gefkii ka hore Aadan si sahlan ayuu dhulka wax uga cuni jiray. Bacdigeedna wax kasta way adkaadeen (3:8). Hadda Qaabiil waa laga reebbay inuu dhulka wax ka soo saaro inaba, waxaana lagu edbiyey inuu aado dhul kale oo adduunka Ilaah ka tirsan. Wuxuu noqonaya mid seegseegi doona. Ilaah waa Ilaah qoduus ah wax alla wixii gef ahna waxey isaga u keenayaan farxad darro. Gefka wuu na baabi'in doonaa. Muddo gaaban gudaheeda ayaan qarin karnaa laakiin ugu dambeysta wax alla wixii gef ah oo aan Ilaah ka galnay way soo wada bixi doonaan (4:11, 12).

Wax kastoo uu Qaabiil sameyeyba weli fursad buu u leeyahay inuu naxariis helo. Hadda wuxuu ka xunyahay edbinta la edbiyey oo waxaa qalbigiisa ku jirta uun in isaguna sida walaalkiis loo dilo (4:13, 14). Ma ahan inuu gefka ka baqaya laakiin wuxuu ka baqaya natiijada gefka. Kan wax dilla wuxuu ka baqaa in isaguna isla sidaas loo dillo.

Laakiin Ilaah wuxuu sheegaya inuu Qaabiil badbaadin doono kana dhigi doono mid noolaado, waxaa la siinaya fursad dheeraad ah uu isku fahmo si uu rumaysadka ugu soo noqdo ugana toobad keeno gefkiisa. Ilaah wuxuu amray nooc calaamad ah oo Qaabiil lagu garan doono si mid kastoo isaga arka uusan u dillin. Ma naqaano calaamaddaas waxey aheyd. Qaar waxey callaamaddaas ku fasirayaan in ay aheyd wax laga arkayay jidhka Qaabiil. Aniga iyo kuwa badanna waan ku raasannahay fikiraddaas - waxey u egtahay in ay aheyd callaamad adduunyada ay arki karto, taa oo noqon kartaa cabsi weyn oo laga cabsado in baniaadmi kale la qudh gooyo.

Ilaah ma doonayo inuu hal qofna xaatee qurmo, sidaas daraaddeed fursad buu siiyey Qaabiil si uu iisu garto uu gefkiisa uga toobadkeeno si uu badbaadada Ilaah u helo. Way dhici kartaa inuu Qaabiil rumeysan doono.

Fursad kastoo la siiyeyba, Qaabiil wuu ka ag fogaaday Ilaah. Sida qoran, *'Qaabiilna Rabbiga hortiisuu ka tegey oo wuxuu degay dalkii la odhan jiray Nood, oo xagga bari oo Ceeden ku yiil'* (4:16). Fursad uu ku badbaado ayaa la siiyey laakiin isagu wuxuu doortay inuu Ilaah ka fogaado. Wuxuu bilowbay inuu ku noolaado noolol aan Alla ka cabsasho lahayn. Wuxuu dhisay magaalo madax. Wuxuu ku noolaaday noolol aan inaba Ilaah tixgelineynin. Ma jiraan wax noo sheegayo ama noo caddaynayo inuu Ilaah mar kale Qaabiil la hadlay.


Ilaah weligiis wuu na sugaya, weligiis fursad buu na siinaya oo aan ku toobad keenno. Wuxuu naga codsanaya inaan rumeysano waaqdhaca uu na siiyey. Habka lagu badbaadi lahaa waa uun isla kii; waa in la rumeysto waaqdhaca uu Ilaah na siiyey. Halkaa wax aan u dhaafi karno ma jiraan. Waa sida keliya oo aan Ilaah ku baran karno.

# 'Ilbaxnimo'

***Cutubka 24aad***
(Bilowgii 4:17-19)

Qaybta kaloo aan sheekada ka eegeyno waa tan aan kaga hadleyno sida ay 'ilbaxnimada adduunka ku askumatay. Ilbaxnimada adduunka waxey marka ugu horeyso ka bilowbatay lix xaro sida aan sawirka qaaradda hoose uga arkayno.

**1.** Ilbaxnimada ugu horesay adduunka waxey ka bilaabatay **'Mesobotamiya'.** Farcankii Qaabiil, Seet iyo Nuux agagaarka dhulkan ayey ku noolayeen. Iyagu waxey u aheyd adduunka oo dhan. Bilowgii 4 waxey sheekadeeda ku sal leedahay dhaqankii dadkii jaahiliinta ahaa (kuwa taarikhda baniaadmiga baara waxey ugu yeedhaan *New stone age)*



*Maabka 3aad: Lixda nooc e ugu horesay hormarka adduunka*

oo ka soo farcamay Mesobotamiya. Ilbaxnimada agagaarka Mesobotamiya waxey kuwa taarikhda baara u muuqatay markuu sanadka ahaa 5000 dhallashada Ciise ka hore oo Bilowgii 4:17-24 wuxuu noo sheegaya inuu dhaqankaani bilowday wakhtigaas ka hore. Dhaqankii kuwa *Sumerian* la odhan jiray e aad u dhismay taarikhda markay aheyd 3,500 dhallashada Ciise ka hore ayaa ah dhaqanka ugu horeyey e ay kuwa taarikhda baara la qabsadeen oo ku caawisay in ay qoraan waxyaalaha maanta taarikhda laga akhristo. Way jiraan dhaqamo kaloo aasaasmay taarikhdan ka dib.

**2.** Waxaa **Masar** joogay dadka ugaarsatada ah oona kaluumeysan jireen taarikhda markay aheyd 5000 oo sanadood dhallashada Ciise ka hore. Masarna waxey noqotay boqortooyo iyadoo boqorkeeda ugu horeyey heshay sanadka markuu ahaa 3200 dhallashada Ciise ka hore.

**3.** Qaybtii ugu dambeysay e dhaqankii jaahiliinta wuxuu soo gaaray **Indiya** abaaraha 4000 oo sanadood dhallashada Ciise ka hore oo ilbaxnimadii ugu horeysay waxey Indiya soo gaartay abaaraha sanadka 2500 dhallashada Ciise ka hore.

**4.** Magaalooyin ayaa laga dhisay **Kreete** sanadka markuu ahaa abaaraha 2500 dhallashada Ciise ka hore oo ilbaxnimada waxey heerkeeda ugu horeyey halkaas kaga bilaabatay sanadka markuu ahaa 2000 dhallashada Ciise ka hore.

**5.** Waddanka **Shiinaha** waxaa cad in ay beerfalasho ka jiri jirtay muddo dheer oo lagu soo qaban karo sanadka markuu ahaa 5000 dhallashada Ciise ka hore oo ilbaxnimada Shiinaha ugu horeysay waxey bilowbatay abaaraha sanadka markuu ahaa 1700 dhallashada Ciise ka hore.

**6.** Mid halkan ka sii fogna waxaan arkayna in ay ilbaxnimada ka bilowbatay **qaaradda Ameerika** (abaaraha wixii ka bilaabata sanadka markuu ahaa 1500 dhallashada Ciise ka hore).

Ilbaxnimo cuseb tan Ameerikaanka ayaa ugu dambeysay. Wax cuseb oo ka dambeyey ma lahayn. Waxkhtigaas kaddib wax kasta waxaa uun laga soo xiganayey waxyaalihii horey loo soo bilowbay.

Bilowgii 1-11 waxey uun ku sal leedahay mid ka mid ah dhaqamadan. Wax kastoo cutubadan laga sheegay waxey u dhexeeyaan labada webi Xiddeqel iyo Yufraat oo ku yaala Mesobotamiya. Haddii aan isku deyno inaan sheekada Bilowgii ku fasirno waxyaalaha ay mutaclimiinta taarikhaha yaqaanin waxaa caddaaneysa in

Bilowgii 4:17 wixii ka dambeya ay ka hadleyso sheekada ku saabsan sida uu dhaqanka jaahiliinta ku baaba'ay oo ilbaxnimada loo qaatay markii la eego taarikhda adduunka.

Haddii aan dooneyno inaan fahanno taarikhda adduunka iyo sida ay xiriir ula leedahay Bilowgii, sheyga ugu adag waa sida aan ku fahmi lahayn sida uu cutubka 3aad e Bilowgii ula xiriirsan yahay cutubka 4aad. Waa xaqiiq laysku halayn karo haddii aan nidhaaho cutubka afraad wuxuu ka hadlaya dhamaadka dhaqanka jaahilnimada iyo aasaaska dhaqanka ilbaxnimada. Dhacddooyinka Bilowgii 4:17 wixii ka dambeyo waxaa la odhan karaya in ay dheceen sanadka 13,000 dhallashada Ciise ka hore. Markaan gaareyno Bilowgii 5:30 waxaan ku jirnaa dhacddooyinkii dheceen taarikhda markay aheyd sanadka 5600 dhallashada Ciise ka hore. Ilbaxnimada barakooyin badan ayey adduunka u keentay. Hase ahaatee, dhibaatooyin badan ayaa jiinsiga baniaadmiga ku soo kordhay oo nacayb iyo Alla ku caasin badan ayaa adduunyada ku badatay. In kastoo uu Qaabiil nin Ilaah ku caasiyey ahaa, wuu sii noolaaday oo farcankiisii iyo farcankii carruurtiisii waxey soo gaareen dhallashadii ilbaxnimada ugu horeysay e ku bilaabatay dooxada Mesobotamiya.

**1. Guur iyo taran ayaa socday (**4:17). Qaabiil naag buu lahaa oo mid carruurtiisa ka mid ahna waxaa la yidhaahdaa Enook. Ilaah in kastoo lagu

caasiyey wuu ogolaaday inuu jiinsiga baniaadmiga sii tarmo.

**2. Magaalooyin waweyn ayaa adduunka ku soo kordhay** (4:17). Magaalada ugu horeysay e ay mutaclimiinta taarikhda yaqaaniin waa Yeriko. Laakiin Qaabiil wakhtigan ka hore ayuu magaala dhisay oo wiilkiisuu ku magacaabay – Enook. Waa wax la yaab leh in ay magaalooyin ku aasaasmaan farcanka Qaabiil oo Ilaah ku caasiyey. Magaalooyinka waxey ku bilowdaan dad isku maskax ah oo doonayaan in ay meel ku wada nooladaan iyagoo aan Ilaah u xilsaarin doonistooda. Dadku ma qanacsana cabsi badanna way ku jirta. Dadka waxey doonayaan in ay dad kale ka ag dhawadaan si ay nabadgelyadooda u sugnaato. Hase ahaatee, markay magaala dhisan oo ay meel iskuugu yimadaanna magaaladii ma ahan wax damacooda qancinaysa! Madaama ay dadka hal meel ku wada tubmayaan magaalooyinka waxey noqonayaan meel lagu cidloodo. Magaalooyinka waxey noqonayaan meel dagaala iyo baahi ay ka buuxaan. Magaalada waxey u ekaan kartaa meel lagu nabad gelaayo laakiin waxey noqoneysa meel ay caga juglayn iyo khatar ka jiraan. Fikiradda uu Qaabiil magaala ku dhisay waxey aheyd mid uu doonayey inuu uga gudbo inkaarta ku dhigan Bilowgii 4:14. Waxaa lagu inkaaray inuu ahaan doono mid seegseegaya oo kelinimo ay ka buuxdo nooloshiisa, wuxuuna isku deyayey inuu fikiradda Ilaah dabageddiyo si uu sida la quman

wax u hagaajiyo. Nasiib xumo kuma uusan guuleysanin fikiraddiisa. Magaalooyinka ma bixiyaan daafaca iyo nabad gelyada loogu tallagalay in ay dadka siiyaan.

**3. Naaga badan guursashada ugu horeysay waxaan ka heleynaa Baybalka.** Farcankii Qaabiil, wixii Enook ka dambeyey waxaa soo raacay Ciiraad, Ciiraadna wuxuu dhallay Mexuuya'el: Mexuuya'elna wuxuu dhallay Metuusha'el dabadeedna Lamek (4:18). Lamek wuxuu noqday ninka Baybalka laga sheegay inuu ahaa kan ugu horeyey e hal naag ka badan guursaday.

Haddana waa mid la yaab leh oo hal naag ka badan guursashada waxey ku timid isla farcanka Qaabiil. Tan waxey aheyd mid ka soo hor jeedda ku tallagalkii ugu horeyey e Ilaah. Haddana waa hab kale uu jiinsiga baniaadmiga iskuugu deyayo inuu ku caasiyo habka uu Ilaah wax u sameeyo. Hal naag ka badan guursashada la mid ma ahan galma ku xad gudubka. Waa nooc guur. Saasba ha ahaatee, waa ficil ka soo hor jeeda ku tallagalka Ilaah. Waxey uun badineysaa nacayb iyo ama la'aanta noolol qoys uu jacayl ku jiro. Tani waxey ku bilaabatay isla farcanka Qaabiil.

Jiinsiga baniaadmiga wuxuu nabagelyo iyo noolol qancisa ka doonaya waxyaalaha caadiga ah uu Ilaah noo siiyey barako siyaado ah. Taranka baniaadmiga, ku noolaanshada

magaalooyinka, guurka iyo noolol galma ku stareex leh – waxyaalahan waa barakooyin siyaada ah uu Ilaah baniaadmiga u soo dejiyey. Waxey ka tirsan yihiin wanaagga guud uu Ilaah dadka oo dhan u soo dijiyey. Ilaah waa u roonyahay ummaddiisa oo dhan oo isku si bu qoraxddiisa ugu deqaya kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahaynba.

Hase ahaatee, barakooyinka caadiga ah oo baniaadmiga oo dhan loo soo diyey laba shey ayay ku liitaan.
a) Kuwa sharka leh ayaa si xun u istecmaali kara. Farcankii Aadan waa loo wada muujiyey barakooyinkan caadiga ah sidaa oo ay tahayna waxaan arki doonnaa, waxey u istecmaleen si ay ku faa'idayaan sheeddaanka

b) Sheyga labaad e ku jira waxyaalahan caadiga ah waxaa weyaan, **Badbaado laguma helo.** Lab iyo dhaddigba waxey isku deyayaan in ay nabadgelyo iyo noolol qancisa ka raadiyaan guurka, dhisidda ummad wada nool iyo in ay badsadaan ku stareexidda galmada. Laakiin badbaado kuma heleyno waxyaalahan oo way na sii habsaamin ayaan haddii aan ka doonno in ay na siiyaan wixii ay na siin lahaayeen uu Ilaah ugu tallagalay wax ka badan. Dadkii Qaabiil way sii baaba'een in kastoo uu Ilaah iyaga u wanaagsanaa.

Waxyaalaha halkan laga la'yahay waxaa noogala sheegaya Bilowgii 4:26. Waxaa qoran, *'Seetna waxaa u dhashay wiil, magiciisiina wuxuu u bixiyey Enoos; markaasaa dadkii waxey bilaabeen in ay Rabbiga ku baryaan magiciisa.'* Tani waxey aheyd u yeeridda Ilaaha badbaadada laga helo. Haddii ay sidaa noqonin waxaa dhici karta inaan barakooyinka helno laakiin aan aqoonsan wayno kan barakadasi na siiyey. Haddii aan barakooyinka helno oo aan aqoonsan wayno kan barakooyinkaas na siiyey, barakooyinkaas nama camfici doonaan weligoodba. Qoysaska! Magaalooyinka! Naagaha! Waxyaalahan oo dhan nama camfici doonaan haddii aan aqoonsan wayno oo aan u yeedhi wayno kan aasaaska u ahaa.

# Nimca caadi ah iyo Nimca qaas ah

***Cutubka 25aad***
(Bilowgii 4:20-26)

Ilaahey adduunyada ma baabi'inin. Wuxuu baniaadmiga siiyey wakhti ku filan iyo banana ku filan oo ay ku sameyaan wax alla wixii hor mar ah oo nooloshooda adduunka ka caawinayo. Ilaah wuu u naxariistay iyaga wuxuuna u ogolaaday fursad ay isku sharfaan madaama ay doonayaan in ay magac yeeshaan sida ku dhigan Bilowgii 4:17.

**4. Waxaa yimid teknoolojiyad fara badan.** Waxaa bilowday in xoolaha lagu dhaliyo hab aanan kii uu Ilaah ugu tallagalay ahayn oo loogu yeedho *husbandry* sida aan uga akhrin karno Bilowgii 4:20. [Maantana wey socota arinta oo xataa dumarka manta waxey rabaan in isla sida xayawaanada loo uureyo iyagoo aan nin la saaxanin]. Ilaah xataa kuwa aan Isaga addeecin kama xasdo waxyaalaha ay hormarka adduunka ku gaari lahaayeen. Waxey ka mid tahay naxariista uu u leeyahay baniaadmiga oo dhan. Hase ahaatee, barakooyinkan badbaado laguma helayo. Ilaah ma naco kuwa Isaga ku caasiyeen, waana suurtagal in ay dhaliyaan teknoolojiyad la yaab leh oo ay hormar weyn adduunka gaarsiyaan oo beecmustariyaasha adduunka ugu waweyn ahadan. Laakiin si kastoo ay xagga

maskaxda waxyaalahaas waweyn uga samayaanba, ma fahmi doonaan badbaadada Ilaah laga helo. Badbaadada waa wax Ilaah oo keliya uu naxariistiisa baniaadmiga ku siin karo waana mid si joogta ah loo siiyey jiinsiga baniaadmiga oo dhan oo qof ay badbaadada Ilaah ka xirantahay ma jiro. Waa in ay jiraan wax ka sareeya waxyaalaha caadiga ah.

**5. Sharaxaadda iyo qurxinta sheyada kala duwan ayaa la bilaabay.** Halkan waxaan arkeynaa suubbinta qalabka muuziga lagu ciyaaro sida aan tusaala uga arki karno Bilowgii 4:21 waxaana qoran sida tan, *'Magaca walaalkiisna wuxuu ahaa Yuubaal; isna wuxu ahaa aabbihii kuwa kataaradda iyo biibiilaha garaca'*. Isla markaana ku shaqeynta biraha ayaa u bilowday jiinsiga baniaadmiga sida ay ku dhigantahay Bilowgii 4:22 oo leh, *'Sillahna waxey dhashay Tuubalqayin oo ahaa mid tumi jiray alaabtii naxaasta iyo birta aheyd oo dhan; Tuubaalqayin walaashiisna waxey aheyd Nacmah'*.

Waxyaalahan oo dhan waxey ka mid yihiin waxyaalaha loogu yeedho nimcada guud e Ilaah. Ilaah ayaa noolosha ka dhigaya mid sii jirta. Isagu wuu u naxariista dadka oo dhan kuwa badbaadadiisa qaateen iyo kuwa aan qaadaninba, oo wuxuu ogolaaday in ay waxyaala badan oo lagu hor maro dhacaan. Waxyaalahan ayaa adduunka ka dhigaya inuu sii jiro. Ilaah ma

doonayo in ay dunida si fool xumo leh ku baaba’do. Bulshooyinka waa in ay sii jiraan.

Iyadoo ay saa tahay waxaa noo caddaanaysa in ay sheekada Bilowgii cutubka afraad ay tahay mid ay noo muujineyso sida uu adduunka u sii baaba’ayo. Bal eeg sida muuzigga iyo dhaqamada loo istecmaalaya (4:23, 24). Lamek wuxuu qoray gabay gaaban laakiin bal eeg sida uu gabaygaas u yahay mid aad u fool xun! Waa hees. Qofka durbaba wuu fahmi karaya sida ay aayadahaas iskuugu xiran yihiin oo ay hab gabay iskuugu taxmeen. Waxaa qoran sida tan, *‘Caadah iyo Sillahay, codkayga maqla; lamek naagihiisow, hadalkayga dhegaysta; nin baan u dilay dhaawacid uu I dhaawacay aawadeed, iyo nin dhallinyar dhufashadii uu wax igu dhuftay aawadeed. Haddii Qaabiil toddoba labanlaab looga aargudan lahaa, Runtii lamek waa in toddoba iyo toddobaatan labanlaab looga aargutaa’* (4:23, 24). Lamek ayaa ku heesaya heestan. Laakiin waa maxay waxa uu ka heesayo? Wuxuu ka heesaya wax ku saabsan naaga badan guursashada (‘*lamek naagihiisow’),* gudh goyn (‘*nin baan u dilay’)* wuxuu haddana ka hadlaya aargudasho (‘*Haddii Qaabiil toddoba labanlaab looga aargudan lahaa, Runtii lamek waa in toddoba iyo toddobaatan labanlaab’).* Waa sidan sida ay dadka ‘dhaqankooda’ u istecmaalayaan. Ilaah wuxuu ogolaaday in ay jiraan noolosha qoyska, muuzigga iyo tacliinta farsamada laakiin sidee buu baniaadmiga u

istecmaalaya barakooyinka uu Ilaah siiyey? Ilaah aad buu u naxariis badan yahay, hase yeeshee, lab iyo dhaddigba aad bey ugu xadgudbayaan waxyaalaha uu Ilaah iyaga ku nimceyey.

Waxey u egtahay inuu Lamek doonayo inuu noqdo mid gudh gooya ka daran kan uu ka soo farcamay oo la odhan jiray Qaabiil (4:24). Waa hees ku saabsan gudh goyn iyo rabsho sida uu qofba ugu yeedhay waa hees loogu yeedhi karo 'heesta seefta'. Ilaah wuu ogolaaday in ay sii jiraan kuwa qalabka muuziga sameeya laakiin si xun bey u istecmaalayaan dhaqankaas uu Ilaah siiyey oo waxey bilabeen in ay heeso rabsho kicinayaan ku hesaan.

Muuzigga waa wax la yaab leh. Bal ka feker muuziggii Daa'uud iyo Sabuurradiisii, iyo gabayadii nebiyada. Haba ahaatee, muusigga hab baabi'in ah waa loo istecmaali kara. Kuwa aan Ilaah addeecsaneyn aad bey xagga farsamada uga dhereyan kuwa Ilaah addeeca oo doonistiisa ku dhaqmaan. Farsamadooda heerka sare ah waxey ku imaaneysa iyagu kuma qanacsano wuxuu Ilaah sameyey oo mar kastaba waxey ku jiraan uun baaritaan si ay u soo saraan waxyaala cusub oo ay u maleynayaan in ay nooloshooda kaga qancayaan. Baniaadmiga wuxuu ku sii habaabaya baaritaan fara badan iyo Alla ka cabsasho la'aanta sii badaneysa. Lamek qof buu qudh goynaya wuuna ku faraxsan yahay. Haddaba ka shalayn ma leh inkaarta ku caasinta Ilaah loo helo

(waxaan tan barbar dhigi karnaa 4:13). Jiinsiga baniaadmiga wuxuu iisu banaan dhigay burbur.

Bilowgii 4:25-5:32 waxey noo abtirineysa farcankii Seet. Waxaa jireen nimca caadi ah iyo nimca qaas ah. Ninka Aadan ahaa wuxuu lahaa wiil kale (4:25) waxaana jirtay qayb kale oo jiinsiga baniaadmiga ka tirsaneyd oo aan Ilaah ku caasinin sida Qaabiil. Qof kastoo farcanka Seet ka tirsanaa ma badbaadsaneyn laakiin rumeystayaasha Ilaah badidood waxey lug ku lahayen farcanka Seet. Seet wuxuu lahaa mid isaga ka soo farcamay oo la yidhaahdo Enook (4:26) waana wagaas Enook marka la bilowbay in si wada jir ah Ilaah lagu amaano. Ilaah Kiniisaddiisu nooleynayey. Wakhtiba wakhtiga kale waxaa jireen dad Ilaah aamin ku ahaa balamadiisana rumeysteen. Balamadaasi waxaa ka mid ahaa in ay badbaado imaan doonto oo weliba maska la burburin doono.

Farcankii Qaabiil waxey bilabeen in ay magaalooyinka ku kulmaan, waxeyna iyaga u keentay in ay qudh goyn, naaga badan guursasho, iyo rabsho ay nooloshooda ka bixin wayeen. Laakiin xataa dadkii farcanka Enook ahaa iyaguna way kulmayeen, laakiin kuma kulmeynin fikirad qudh goyn laakiin in ay Eebbe ammaanaan. Midhta naagta mar kastaba way jiri doontaa. Seet wuxuu noqday mid bedela Haabiil. Farcanka Ilaah e ah kuwa Ilaah rumeysan oo addeeca marnaba lama cidhib tidhi karo. Haabiil

waa la dillay laakiin Seet ayaa tarankii halkaa ka sii waday. Ilaah ayaa mar kastaba kuwa Isaga rumeysan oo u adeega dooran doonaa.

Calaamadda ugu weyn e dadka Ilaah lagu garan karo waa ducada. Halkan ayaan ku arkeyna muhimadda ay baryada wadajirka lagu sameeyo leedahay sida Baybalka ku dhigan. Saddex shey oo Baryada laga sheegay ayaa halkan ku jira,

a. Waa in ay noqoto duco si kulul Ilaah loo hor tegayo. Dadka cod sare ayey Ilaah ugu yeedhayeen, Ilaah bey u ooynayeen. Ma ahayn barya si degan oo ay aamusnaan ku jirto lagu sameeyey laakiin waxey aheyd barya si xoog leh oo dhiirogelin leh lagu sameeyey oo Ilaah farxad iyo rayrayn loola hortagayey.

b. Waa baryo wadajir lagu sameynayo. Dadka markay barya iskuugu imaanayaan way is caawiyaan. Baryada keli ahaanta lagu sameynayo way wanaagsan tahay runtii laakiin waxaa dhici kartaa inaanan si u jeeddo leh ku duceysanin haddii aanan ka fiirsanin. Ducada wadajirka lagu sameeyo waxey caawineysa baryada keli ahaanta lagu sameeyo isla sida ay baryada keli ahaanta tan wadajirka ku caawiso.

c. Baryada waxey na bareysa sida aan ku ogaan lahayn dabiicadda Ilaah. Waxey heer sare ugu dhawaaqayeen magaca Rabbiga iyagoo tixgelinayaan in ay ku caabudan sida uu iyaga isku kay muujiyey. Markaan ducada ku jirno waxaan dareemeynaa wanaagga Ilaah,

naxariistiisa, jacaylkiisa iyo dabiicadahiisa kale oo dhan. Tan ayaa ka macna ah markaan magaca Eebbe ku dhawaaqeyno. Waxey ku dhawaaqeen magaca Rabbiga. Rabbi markaan leenahay waxaan ku dhawaaqeyna magaca qaaska ah e Ilaah. Rabbi macnaheedu waa ISAGU WUU JIRA, waana magac aan gadaal dambe ka macnayn doonno markaan taarikhda nebi muuse ka sheekeyn doonno. Wuxuu Ilaah u tilmamaya inuu yahay badbaadiyaheena iyo waaqdhaceena. Dumar iyo ragba waxey bilabbeen in ay magaca Rabbigooda badbaadiyahooda ah ku dhawaaqaan. Mana ahan in ay ururo oo keliya baryadaas baryayeen. Sheekada waxey noo sii sheegeysa in ay jireen shaqsiyo doonista Ilaah toos ula socday oo Ilaah ka barakeysteen sida aan uga akhrin karno Bilowgii 5:24; 5:32; 6:8. Baniaadmiga si daran oo aad u daran ayuu Ilaah ugu caasiyey laakiin boqortooyada Ilaah weligeed way jireysa. Ilaah weli carshigiisuu ku fadhiya wuuna haysta dad isaga addeecsan oo weligoodba Isaga rumeysanaan doonaan.

# Noolol ay dhimasho ku hareersan tahay

***Cutubka 26aad***
(Bilowgii 5:1-32)

Abitiriskii ninkii iyo Nuux u dhexeeyey ayaan hadda u guda geleyna. Ugu horeynta, **aan wax ka sheegno abtiriska naftiisa.** Abtiriska wuxuu noo caddeynaya inuu jiinsiga baniaadmiga sii tarmayo. Wax baa xiriirinayo sheekada Nuux iyo tan ku dhigan Bilowgii 1-4.

- Abtirsanyadan waxaa laga yabaa inaynan kaamil ahayn. Bilowgii cutubka 5aad iyo 10aad waxey sheegayan isku sheeko waxeyna wada sheegayaan sheeko iisu eg taa oo ah in ay jiraan tobban qoys oo farcankooda toos loo soo tiriyey.

- Waxey aad ugu dhawddahay in macnaynta abtiriska uu noqon karo mid lagu soo koobi karo qayb waliba ama qoys kasta oo farcan ah hal ruux. Wakhtiga aad buu u dheeraa. Bilowgii 5:3aad waxaa qoran, *'Aadanna wuxuu jiray boqol iyo soddon sannadood, wuxuuna dhalay wiil isagii u ego o araggiisii leh; magiciisiina wuxuu u bixiyey Seet'*. Tan waxey noqon kartaa in ay tahay habka ay reer Mesobotamiya ku sheekeyn jireen iyagoo leh, 'waa ayaa jiri jirtay oo reerka ugu da'dda weyn uu gaari jiray 130 jir. Waxaa dhacday inuu nin

wiil helay oo wiilkii wuxuu bilaabay qayb cusub oo farcanka qoyska ka tirsan…'. Caddayn ayaa jirta oo aan ku ogaan karno in ay dadkii hore saa ku abtirsan jireen. Waa hubaal markii la leeyahay hebel hebel buu dhalay macnaheedu waxaa weyaan hebelkaasi ayaa dhameystiraya qaybtii farcankii jiray oo wuxuu bilaabaya qayb cuseb oo farcanki sii wadaysa. Hadaladan way ku jiraan abtirsigga dadkaasi hore markay ka hadlayeen cimri dheer. Liiska boqorada haddaan eegno waxaa noo muuqaneysa in Mesobotamiya ay jireen boqoro sannada la yaab leh qabay, laakiin shaki kuma jiro in ay boqorada jiri jireen waayo, caddayn ayaa loo haya. Haddaba waxaa noo sii caddaneysa fikiraddii aheyd in ay magacda ay shaqsi ku ekayn e ay laakiin tilmaamayeen qayb ka tirsan abtirsiga farcamada mid ka mid ah.

- Sannada badan uma dhaxeynin abtirsanyada. Tusaaleh ahaan taarikhda 1,000,000 oo sanno dhallashada Ciise ka hore waa wax aanan suurtagal ahayn.

- Tobbanka magac waxaa loo soo qaatay waa tobbanka ugu waweyna oo tilmaan aan laga wareereynin lagu heli kari lahaa. Waxey tani noo sheegeysaa sannadka ay heleen wiilashooda iyaga kala wareegayey xididka abtirsiga. Waxey aheyd in ay sii caddeynayaan muddada uu farcankaasi socon lahaa.

- Tobbanka qaybood e abtirsiga e aan ka heleyno Bilowgii 5:1-32 waxey qaadatay ku dhawaan 8,000 oo sannadood. Haddii ay magacddaan qayb tilmaamayaan oo ay tilmaameynin shaqsi, waxey u egtahay inuu abtirsigaasi u dhexeeyo sannadka 13,000 dhallashada Ciise ka hore ilaa sannadka 5,600 dhallashada Ciise ka hore. Taarikhda ugu dambeysay sida ay fasiraadda cutubka 10aad ku tahay weli lama sheegin. Haddii ay sannado badan u dhexeyeen waxey u egtahay in ay taarikhddani dib u noqoneyso. Inta sannado oo dib loo tirinayo lama hubo laakiin ma gaareyso tobbnaan kun oo sannadood.

Haddana aan u leexano **natiijada abtirsiga.** Horta waxaan ka baraneyna **aaminimada Ilaah**. Ilaah wuxuu baniaadmiga ku amray in ay tarmaan (1:28). In kastoo uu baniaadmiga Ilaah ku caasiyey, Ilaah kama uusan noqon amarkiisi aheyd inuu baniaadmiga tarmo uu adduunka buuxiyo. Bilowgii 5:1 ilaa 5:1-32 waxaa jiraan 8,000 oo sannadood ugu yaraan, ama xataa ka badan taa uu Ilaah baniaadmiga u ogolaaday in ay tarmaan.

Waxaa halkan nooga cad **sida daran uu jiinsiga baniaadmiga ugu caasiyey Ilaah**. Cutubkan wuxuu noo bandhigaya sida ay wax ahaan jireen Bilowgii sheekada baniaadmiga. Waxaa lagu uumay u ekaanta Ilaah (5:1, 2). Laakiin qaybaha kale e cutubkan waxaan ka arkayna sida daran uu

baniaadmiga darajada la siiyey uga soo degay. Waxyaalihii Bilowgii 2:16 laga sheegay way dhaceen: 'dabadeedna wuu dhintay…dabadeedna wuu dhintay…dabadeedna wuu dhintay' ayaa ah erayada cutubka dhex fiigayaan. Waxaan ka arkeyna sida daran uu **baniaadmiga uga guuleysan Karin dhimashada.** Erayada ugu waweyn e cutubka dhex fiigayaan, 'dabadeedna wuu dhintay…dabadeedna wuu dhintay', waxey na tusinaysa in xataa teknoolojiyada heerka sare ah iyo hormarka uu baniaadmiga gaaray sida aan uga akhrinayno Bilowgii 4:17-24 iyo weliba heerka sare uu farcan Ilaah xiriir toosan ula yeeshay sida ku dhigan 4:25, 26, weli baniaadmiga wuu ka adkaan waayey inkaarta dhimashada.

Waxaan cutubkan ka baraneyna in uun **xiriirka wanaagsan oo Ilaah lala leeyahay oo keliya looga guuleysan karo waxyaalihii baniaadmiga gefka ka soo gaaray.** Abtiriska wuxuu gaaray ilaa tobban fac; Aadan – Seet – Enoos – Qaynaan – Mahalale'el – Yaare – Enook – Metushelax – Lamek – Nuux. Erayada 'dabadeedna wuu dhintay waxey halkan soo galeysa saddeed jeer oo tan sagalaad waxey ka soo galeysa Bilowgii 9:28. Hal ruux keliya ayey erayadaas ('…dabadeedna wuu dhintay') raacin. Enook ma dhiman (Bilowgii 5:21-24)! Enook wuxuu guushaas ku gaaray xiriirka cuseb uu Ilaah la yeeshay. Ilaah ayuu toos u addeecay

micnaheedu si toos ah ayuu tallaabo tallaabo nooloshiisa oo dhan Ilaah ugala socday.

Intuu Ilaah la socday ayuu helay ballan. Enook wax kastoo uu sameeyey wuxuu ku sameyey iimaan, iimaankana mar kasta wuxuu ku xiran yahay ballan. Rumeysad iyo dulqaad ayaan ku dhaxleyna ballamada (Cibraaniyada 6:12). Maalin maalimaha uu Ilaah caddecayey ka mid ah ayuu Ilaah u muujiyey inuusan dhiman doonin. In kastoo ay jirtay dhimasho fara badan oo kumaan sanno socotay, Ilaah wuxuu doonayey inuu ummadda tusiyo inuu dhimashada ka xoog badan yahay. Enookna Ilaah buu rumeystay! Cibraaniyada 11:5 waxaa qoran, *'Enook rumaysad baa kor loogu qaaday si uusan dhimasho u arag…'*.

Ilaah wuxuu noolosha Enook nagu yara tusay wax ku saabsan waaqdhaca iyo sida madaxa maska loo burburin doono. Laakiin Rajada jiinsiga baniaadmiga way ka baxsan tahay dhimashada si kastoo loo eeguba. Maalin ayaa imaan doonta oo dhimasho dambe laga hadli doonin oo waxyaalihii hore e ku jiray adduunkeeni Ilaah ku caasiyey way wada idlaan doonaan xataa sheeddaanka naftiisa mar dambe ma jiri doono (Muujintii 20:14; 21:5). Rajada aan kaga badbaadi doono inkaartii naga soo gaadhay gefkii ay awowayasheen galeen waxaa ka mid ah xiriirkii aan horey Ilaah ula lahayn oo dib u soo cusboonaan doono iyo dhimashada oo la baabi'in

doono. Enook ayaa helay fursad uu nagu tusiyo qayb waxyaalahaas ku saabsan. Ilaah ayuu toos ugu tegay isagoo aan dhimasho arkin. Wuxuu la kulmay ficilka ay Masixiinta la kulmi doonaan markuu Ciise imaan doono intay weli adduunka joogaan – waxey ahaan doontaa nimceyn aan duug layskuugu imaanayo lahayn!

Waxyaalaha noogala baahan yahay Enook ayaa qaybteeda noo muujiyey oo runtii uma baahnin farsamo sare iyo tacliin teknoolojiyad ku dhisan laakiin waxaan u baahannahay oo keliya rumeysad sahlan. Enook wax yar ayuu ka fahamsanaa waxyaalaha imaan doona qarniyada imaan doona. Enook nasiib uma lahayn Waraaqihii Rasuul Bawlos. Noolosha Ciise iskaba daa lama soo gaarin e. Xataa ma uusan haysan tusaalooyinka nooloshii nebiyada sida nebi Daa’uud iyo Ibraahim. Ma jirin dad kale oo Ilaah horey u soo addeecay uu noolosha kaga deyan lahaa oo aan ka ahayn Haabiil. Iyadoo ay saa tahayna sida uu dhimashada uga guuleystay waxey aheyd mid la yaab leh oo aan weligeed dhicin. Eliya oo keliya ayaa isla nooloshaas arkay. Waxey tani na bareysa in haddii aan erayga Ilaah maqalno oo aan rumeysano oo aan ku dhaqanno, aanay jirin wax nagu adkaan karo.

# Wiilasha Ilaah iyo Gabdhaha dadka

***Cutubka 27aad***
(Bilowgii 6:1-8)

Baabi'ii uu baniaadmiga ku caasinta Ilaah ku baaba'ay ayaan hadda ka joognaa qaybteeda ugu darneyd sida ay Baybalka ugu dhigantahay. Bilowgii wuxuu qiimeynaya sida daran uu gefka baniaadmiga u galay. Lab iyo dhaddigba horaan iin ma lahaan jirin, laakiin waan soo aragnay sida ay Ilaah ugu caasiyeen (Bilowgii 3), sida uu midba kan kale ugu caasiyey (Bilowgii 4), iyo weliba sida ay ku caasinta Ilaah u baabi'isay bulshooyinka.

Haddan waxaan si dheeraad ah u guda geleynaa baabi'ii uu baniaadmiga baaba'ay oo ugu darnayd weligeedna ugu darnaan doonto. *'Waxeyna noqotay, markii ay bilaabatay in dadku ku bataan dhulka oo ay gabdho u dhashaan, in wiilashii Ilaah arkeen gabdhihii dadku in ay wanaagsan yihiin, oo ay guursadeen in alla intay doorteen oo dhan'* (6:1, 2) Runtii tiradii dadka ayaa gobolkan adduunka ku badatay oo wakhtigaas ayey arintan guurka dhacday. Waxaa jiraan saddex fasiraad oo qaybtan Kitaabka lagu fasiray,

a) Qaar waxey u qabaan in ay wiilasha Ilaah ay ka macna tahay farcankii Seet. Laakiin tani ma ahan macnaha guud e 'wiilasha Ilaah'. Waa maxay sababta ku jirta in ay wiilasha Ilaah oo keliya ay guursadaan dumar aanan xaq ahayn? Miyey horay u dhici jirin in ay niman xaq ah iyo dumar aan xaq ahay is guursadaan? Ama miyaan ku fikirnaa in ay gabdhihii Qaabiil oo keliya ay ahaayeen kuwa ugu quruxsan?

b) Fikiradda kaloo jirta ayaa waxey tahay in 'wiilasha Ilaah' ay yihiin dad qaas ah oo noolol sare ku nool sida boqorada oo qaateen naago fara badan.

c) Fikiradda saddexaad waxey tahay in ay dadka qaarkood aaminsan yihiin in ay dhacdadani tahay mid layaab leh oo ka dhacday adduunka malaa'igaha. 'Wiilasha Ilaah' waxaa lagu macnayn karaya malaa'igaha. Fikiraddan ayaa aniguna ila quman. Erayada 'wiilasha Ilaah' haddii aan ka eegno buugga Cibraaniyada waxey macna u tahay malaa'igaha (eeg Ayuub 1:6; 2:1; 38:7 taa oo wax ka sheegeysa waa ay dunida wax dad ah joogin; Sabuurrada 29:1; 89:6).

Dhacdadan waxaa haddana laga sheegay 1 Butros 3:19-20, 2 Butros 2:4 iyo Yuudas aayadda 6aad taa oo ku macneyneyso in ay erayadan yihiin malaa'igo.

Waxaa kale oo la weydin karaya: waxan ma wax suurtagal ah baa? Miyey malaa'igaha dad guursan karaan? Xusuuso waxyaalahan,

a) Malaa'igaha waxey u ekaan karaan sida dadka (Bilowgii 18:2, 8; 19:1, 5). Sida dadka ayey dhar u xiran karaan; oo way cuni karaan oo wax bey cabi karaan. Nimankii Soodom waxey isku deyeen in ay malaa'igaha kufsadaan.

b) Waxaan la xarbineyna adduunkii jiray daadka ka hore. Isbedel aad u weyn ayaa adduunka ku dhacay daadkii kaddib; xataa adduunka malaa'igaha isbedel weyn ayaa ka dhacay. Daadkii kaddib isbedel weyn ayaa ku dhacay malaa'igihii gefay. Matayos 22:30 ayaa **hadda** run noo noqoneysa. Waxaa laga yaabaa inaysan **waayahaas** run ahayn. Arinta ugu weyn e aan halkan kala xarbinayno ayaa waxey tahay in ku caasinta Ilaah e ka dhex dhacday adduunkaas Mesobotamiya uusan ahayn mid yar oo xataa waxaa dhacday in ay Mesobotamiya burburto. Weyna dhici kartaa in waxyaalahaas ay ka dheceen geesaha kale e adduunka. Dhacddo ka darran tii Bilowgii cutubka 3aad ayaa dhacday oo haddana waxey fursad u heleen in ay arkaan wax wanaagsan oo isha u roon isla sida ay ka aheyd Bilowgii 3:6. Waagaas wixii ka dambeyey dumar iyo ragba gefba mid ka sii darran ayey ku dhaqmayeen. Waxey xataa gaartay mar ay qatar weyn ku sugnayeen oo ay ruxyada wasakhda ah la dagaaltami gareen. Adduunka malaa'igaha sharka ah ayaa dagaal la galay noolosha baniaadmiga. Dadkii waxey bilabeen in ay sharba kan ugu darran ay ku dhaqmaan. Malaa'igihii waxey arkeen gabdhihii dadka iyo (laga yaaba in

ay ku arkeen niman uu sheeddaanka duleystay) iyaga oo is guursanaya. Ilaahna wuxuu yidhi, *'…Ruuxaygu lama sii dagaallmai doono dadka weligiis, maxaa yeelay, isagu waa jidh, laakiinse cimrigiisu wuxuu noqon doonaa boqol iyo labaatan sannadood'* (6:3).

Marxaladdan waxey Ilaah ku dhallisay fikiradda ah inaysan wanaagsaneyn inuu ruuxa sheeddaanka muddadan oo dhan uu baniaadmiga ku jiro. Waxey u egtahay in 120 sannadood ay ka macna tahay in muddada uu qofka noolan karo intaa lagu soo koobayo ama sida ay isla tahay in ay jireen 120 sannadood daadka ka hore. Waxaan tan saldhig uga dhigi karnaa dulqaadka iyo silaca uu Rabbiga noo maray sida ku dhigan 1 Butros 3:20 taa oo gacan siinaysa fasiraadda labaad.

Bilowgii 6:4 waxaa dhigan, *'Waagaas waxaa dhulka joogay dad waaweyn oo xoog badan, tas ka dibna kolkii wiilashii Ilaah u yimaadeen gadhihii dadka, oo ay carruur u dhaleen, isla kuwaas waxey ahaayeen nimankii xoogga badnaa oo waagii hore ahaa raggii caanka ahaa'*. Dadkan way jireen xataa guurka malaa'igaha ka hore laakiin guurka malaa'igaha la guursaday ayaa wax kasta qaribay. Arinta aan halkan ka baraneyno ayaa waxey tahay in ay dadka lab iyo dhaddigba ay xagga noloshoda shar uun ku sii fikirayaan oo xiriirka ay Ilaah la leeyihiin wuu sii xumaanaya.

Bilowgii wuxuu noo sheegaya sida uu Ilaah uga xumaaday baaba'a dadka ku dhacay markii la eego xagga xiriirka ay Isaga la leeyihiin. **Ilaah wuu fahmay baaba'aasi** (6:5). Ilaah wuxuu arkay in ay dadka noqdeen kuwa ku caasintiisa u hogaansamay. Ilaah ma ahan Ilaah naga fog oo aan arkeynin waxyaalaha nolosheena ku dhacaya.

**Ilaah wuu murugooday** (6:6). Ilaah miyuu silca? Ilaah miyuu dareen leeyahay? Ilaah wuu silcay markay dumarka iyo ragga Isaga ku caasiyeen.

**Ilaah wuu xukumaya gefka (**6:7). Wuxuu go'aan ku gaaray inuu adduunyada iyo dadka ku nool wada baabi'iyo.

**Ilaah wuxuu na siiyaa hab aan kaga badbaadno ba'a na haysta.** Nuux wuxuu helay nimcada Ilaah. Ilaah wuxuu xushay nin uu badbaadadiisa dadka ugu soo dejin doono. Markaan leenahay 'wuxuu helay nimco' waxey ka dhigantahay inuusan istaahilin inuu noqdo kan uu Ilaah adeegsan doono. Waa nimcada Ilaah tan isaga badbaadisay. Waxey aheyd Nuux inuu noqdo badbaadiye, mid ay badbaadada Ilaah ku imaan laheyd. Markay inkaarta Ilaah soo dhacdo waxey aheyd inuu jiro hab lagaga badbaadi doono.

Baniaadmiga weli wuu sii baaba'aya. Bulshooyin ayaa weli sii baaba'ayo hadduusan Ilaah xal

keenin. Ilaah weli wuu u jeedaa waxa dhacaya, waxyaalahaas oo dhan wuxuu ku haya maskaxddiisa, weli duniduu u murugonaya, weli wuu u naxaya baniaadmiga baaba'a uu ku jiro daraaddiis. Weli fikiraddiisi edbinta ku caasinta Ilaah ma uusan bedelin adduunyaduna weligeed ma jiri doonto.

Adduunyadeenana way idlaan doontaa isla sida ay dunida Nuux u idlaatay. Waagii Nuux badbaadiye ayaa la doortay; maanta waan haysana badbaadiye: Ciise Masiix! Ciise ayaa na siiyey hab aan ku badbaadno, isla sida uu Nuux u dhisay markabkii lagu badbaaday. Rag iyo dumarba waa lagu caasumay in ay galaan. Isla sida ay maalmihii Nuux ahaayeen ayey maantana noqon doontaa.

Ciise wuxuu ku dhintay iskutallaabta korkeeda, oo qiima weyn ayuu gefkii aan galnay u bixiyey. Waagaas hore ummaddii jirtay waxey aamintay in ay ku badbaadeyso markabkii uu Nuux dhisay. Maantana waa inaan aaminaa inaan ku badbaadeyno iskutallaabta Ciise. Waxey aheyd in ay markabka gudahiisa galaan. Waa inaan iskutallaabta Ciise galnaa. Ciise wuxuu noo noqonaya wuxuu Nuux u ahaa dadkaasi hore. Markaan Ciise iisu dhiibno nabadgelyo ayuu na siinayo.

# Daadka

***Cutubka 28aad***

(Bilowgii 6:9-7:5)

Gef aan joogsad lahayn ayaa sii weynaday ilaa ay inkaarta Ilaah ka soo degtay. Bilowgii 6-9 waxey wax nooga sheegayaan waxa iyo sida ay inkaartaasi tahay. Waxaa kale oo ay cutubadan noo sheegayaan inuu Ilaah in kastoo uu inkaar soo dejiyey uu weli yahay Ilaaha naxariista oo haddana soo dejin doono badbaado.

**1. Midda ugu horeysa, ha ilowbin badbaadiyihii Ilaah – Nuux.** Nuux wuxuu ahaa nin xaq ah, sida uu rumeysadkiisuba ahaa. Waxaa qoran, *'Nuux oo Ilaah uga digay waxyaalo aan weli la arkin ayaa cabsaday, oo rumysad buu ku diyaariyey doonni in reerkiisu ku badbaado, sidaasuu dunida u xukumay oo ku noqday mid dhaxla xaqnimada rumaysadka ku timaada'* sida ay ugu dhigantahay Cibraaniyada 11:7. Erayga Ilaah ayaa Nuux u yimid. Ilaah wuxuu Nuux u sheegay wax ku saabsan inkaarta imaan doonta iyo sida uu Nuux naftiisa u noqon lahaa kan ay kuwa rumaysadka leh ku badbaadi doonaan. Nuux Ilaah buu rumeystay. Taasi ayaa ah waxa laga wado rumeysad; waa Ilaah oo la aamino.

Baybalka wuxuu shegaya in waagii Nuux uusan jirin nin sidiisa iin la'aan u ahaa (6:9). Wuxuu noolaa maalmo uu sharka xidid yeeshay. Dunida isaga ku hareersaneed way baaba'saneed oo qof

Ilaah u jeesto kuma jirin, hase ahaatee, Nuux waxyaalahas sharka ah dhexdooda isagu nadiif buu ku ahaa Ilaah hortiisa.

Xiriir wacan buu Ilaah la lahaa. Ilaah buu toos ula socday sida aan Baybalka uga akhrineyno 6:9. Tani waxey ka macna tahay inuu maalin waliba nooloshiisa oo dhan wuu ilaalinayey tallabadihiisa si uusan u sameynin wax aanan doonista Ilaah ahayn. Nuux wuxuu ahaa nin reer leh. Wuxuu lahaa saddex wiil (6:10). Haddaba xaqnimada Nuux waxey aheyd mid uu nin caadi ah oo noolosha aan maalin waliba ku dhaqano uu ku dhaqmayey. Ma ahayn nin bulshada ka baxsanaa. Runtii xaqnimada dhabta ah saa kuma timaado. Nuux wuxuu ku jiray kuna dhaqmayey adduunka Ilaah. Masuuliyadda dhaqaaleynta qoyskana way saarnayd isaga.

Kan ayaa ahaa ninka uu Ilaah u istecmaalay inuu badbaado ku keeno. Dhacdadan oo dhan waxaa saldhig u ahaa nimcada Ilaah. Nuux waa sida Ciise. Ciise wuxuu badbaadada nagu siiyey noolosha xaqa ah uu ku nolaa. Noolosha Nuux ma ahayn mid asli aheyd, laakiin Ciise wuxuu ku nolaa nolol aan weligeed haba yaraatee lagu qasin wax Alla ku caasin ah. Ilaah wuxuu istecmaalaa dadka iin la’aanta ah, kuwa aan iin lahayn uu istecmaaleyna waxaa ugu wada weynaa Ciise, Inankiisa madiga ah. Waxey aheyd inuu ahaado mid aan iin lahayn si uu u noqdo badbaadiyaheena. Nuux wuxuu ahaa badbaadiye

ku meel gaar ah kaa oo farcankiisii ku simay badbaadiyaha imaan doonaa.

2. Midda kale oo aad eegi laheyd waa **xukunka Ilaah.** Ilaah wuxuu go'aansaday inuu ibniaadanka siiyo 120 sanno oo dheeraad ah isagoo baniaadmiga siinayo fursad kaloo ay ku badbaadaan. Ilaah kuma degdego xukunka. Xukunkiisa wuxuu yimadaa uun markii wakhtiga ugu dambeya uu la gaaro. Dhulka waxaa ka buuxsamay masuqmaasuq iyo deganaan la'aan (6:11). Waxey tani dhib gaarsisay jiinsiga baniaadmiga oo dhan (in kastoo ay sheekadeenu quseyso dhaqankii Mesobotaamiya). Jiinsigan wuu ka kharibmay xagga hab nooleydkiisa oo dhan (6:12); adduunyada waxey soo gaadhay meesha heerka ugu dambeyey. Ku caasinta Ilaah oo tan ka xumeyd oo la sameyn lahaa ma jirin. Ilaah wuxuu goostay inuu ku dhawaan adduunkaas oo dhan uu cidhib tiro (6:13).

Ilaah wax badan ayuu u dulqaatay gefka uu baniaadmiga Isaga ka galay. Inta dooniida la dhisayey Nuux dadkuu u sheegayey fikiradda uu Ilaah ka qabo ku caasinta Ilaah. wuxuu ahaa wacdiye ku wacdinayey wax ku saabsan xaqnimada (2 Butros 2:5). Haddaba Ilaah wuxuu gaaray wakhtiguu edbin lahaa adduunka ama dhulka (luuqadda Cibraaniga labadas isku macna ayey yeelan karaan). Nuux waxaa lagu amray inuu doonni dhiso (6:14-17) maxaa yeelay, waxey aheyd Ilaah inuu ballan galo taa uu ku

badbaadin doono farcanka Nuux (6:18). Hase ahaatee, adduunka oo dhan oo wakhtigaas jiray meel alla meeshay adduunka maabta ka aheydba, aad buu u qaribmay oo wuxuu gaadhay heer aanan mar dambe loo ogolaan karin inuu sii jiro.

Markuu baniaadmiga Ilaah ku caasiyo, adduunyaduna isagay la go'aysaa. Markii baniaadmiga la xukumayo, wax alla wixii agagaarkiisa ku noolna inkaartaas ayaa gaareysa. Sidaa daraaddeed wax alla wixii noolaa noocay ahaadaanba waxey aheyd in ay baaba'aan (6:19, 20). Shaki kuma jiro kalluumada way badbaadeen, iyo laga yaaba inuu dhulkii Mesobotamiya oo keliya uu ahaa kan la baabi'iyey in kastoo ay aheyd inuu Ilaah adduunka oo dhan xukun ku soo dejin doono.

Ilaah weli waa Ilaah xaq ah. Weli wuu nacayb yahay ku caasinta Ilaah. Weli degdeg xukun kuma bixiyo laakiin wuu dulqaad badan yahay. Wuu arkaya caasinimada ay dadka sameynayaan wuuna uga digaya si ay u ogadaan inaysan caasinimadoodu weligeed socon doonin. Ilaah wuu u sheegaya adduunyada waxa uu sameyn doono. Adduunkeenan naftiisa wuu dhmamaan doonaa. Waa noogala sii digay in ay xukumaadda Ilaah nagu soo food hayso.

**3.** Midda kale aan ka fekerno **nimcada Ilaah in kastoo uu xukumaad bixiyo.** Ilaah wuxuu Nuux ku ku amray inuu hagaajiyo wax lagu badbaado,

doontii. Nuux waxaa lagu amray inuu cunto diyaarsado (6:21) si uu ugula noolaado qayb ka tirsan nooc kastoo xayawaan ah oo adduunka ku nool. Wax allaate wixii doonnida geli doonaan way badbaadi doonaan.

Saa ayayna noqotay (6:22). Waxey aheyd badbaado laga soo shaqeyey. Waxaa doonida ku jireen qolal yar yar (6:14). Waxey aheyd meel looga nabadgalo biyaha Ilaah oo wax baabi'in doonaan.

Badbaadadan waxey aheyd mid rumeysad lagu helayey. Waxey aheyd in wax kasta iyo qof kastoo doonayey in ay badbaadaan doonnida galaan (7:1). Sidaa ayey Nuux u aheyd si ay reerkiisa iyo waxyaalaha kaloo uu adduunka ka soo aruuriyey ay u badbaadaan (7:1-3). Horey ayaa loogu sheegay waxa dhici doona (7:4) iyo waxa ay samayn lahaayeen. Haddii ay rumeystaan way badbaadayaan. Nuux wuu yeelay wax alla wixii lagu amray oo isaga iyo wax alla wixii isaga la galay – toddoba ruux oo kale – ayaa ka badbaaday xukunka Ilaah.

Ilaah wuxuu doortay badbaadiye, ninka Ciise Masiix ah ayaa ah badbaadiyahaasi, isagu cidna kuma sheegi karto inuu weligiis Ilaah ku caasiyey. Ciise waxaa la siiyey hogaamin. Iskutallaabta ayuu badbaado noogu sameeyey. Weli badbaadada waxaa lagu helaya oo keliya tallaabada rumeysadka. Dhamaadka daadka,

dadkii Nuux waxey dhaxleen adduunka cuseb. Wax alla waxey u baahnayeen oo dhan wey haysteen. Annaguna waa inaan tallaabadaas qaadno oo aan Ciise rumeysano kaa oo maanta noo ah doonnida uu Ilaah naga codsanayo inaan galno inaan ku badabaadno haddii kale ahayn waan baabi'i doonaa e. Waxey aheyd inuu Nuux ummadda u sheego waxa dhici doona (2 Butros 2:5). Waxaan u maleynaya in ay dadkii maqlay ay ku dheleeceeyeen, laakiin wuu badbaadiyey reerkiisa. '*Rumysad buu ku diyaariyey doonni in reerkiisu ku badbaado'* sida aan horey kaaga soo akhriyey Cibraaniyada 11:7aad. Waxaa dhici kartaa inaadan awoodin inaad farintaan dad badan gaarsisid, laakiin haddii aad ka codsatid kuwa agagaarkaaga jooga in ay galaan doonnida, Rabbigeena Ciise Masiix waxaad sameyneysa wax weyn.

# Gogoldhigga 'Axdiga'

***Cutubka 29aad***
(Bilowgii 6:18)

Ficilkii uu Ilaah Nuux iyo carruurtiisa doonnida kaga badbaadiyey inkaarta waxey aasaas u noqotay 'axdi'. Ilaah wuxuu yidhi, *'Laakiin axdigayga adigaan kula dhigan doonaa; oo doonnidaad soo geli doontaan, adiga, iyo wiilashaada, iyo naagtaada, iyo naagaha wiilashaada e kula jiraba'* (Bilowgii 6:18).

Mawduuca axdigga wuxuu ka mid yahay mawduucyada ugu waweyn e Baybalka ku jira sidaa daraaddeed waa inaan si qoto dheer uga fekernaa.

**1.** Horta aan tixgelino **fasiraad qaldan e sheyga 'axdi' loogu yeedhay.** Yaanan umaleynin inuu axdiga yahay oo keliya heshiis. 'Axdi' waxaa inta badan loo haystaa inuu yahay shey lagu gorgortami karo laakiin way habboontahay inaan fikiraddaasi ballaarino. **Axdigu waa ballan ay dhaar la socoto.**

Tusaaleh u qaado dhacdada Nexemyaah cutubka 5aad, taa oo si fiican lagu kala macneyey mawduucyada ballan iyo dhaar. Nexemyaah wuxuu ka cabanaya Yahuudda oo si xun ula dhaqmeysa Yahuudda kale e masaakiinta ah. Aad buu u xanaaqay (Nexemyaah 5:6) oo shir buu

dhigay uu iyaga kaga canaananayo waxyaalaha ay ku dhaqmayaan. Kuwa noolosha sare ku nool waxey ballan qadeen in ay cashuurta ay qadayaan ku faa'idayn doonaan walaalahooda dabarta yar. Bal haddaba eeg: ballan bey qaadayaan. Nexemyaah 5:12 waxaa qoran, *'Markaasay yidhaahdeen, waxoodii waan u celin aynaa, oo wax dambena weydiisan mayno innaba. Waxaannu yeelaynaa sidaad tidhaahdo. Markaasaan u yeedhay wadaaddadii, oo waxaan ku dhaariyey in ay ballankan siduu yahay oofiyaan'*. Laakiin Nexemyaah wax saa'id ah ayuu iyaga ka doonayey. Wuxuu u yeedhay wadaaddadii oo wuxuu amray in ay dadkii ku dhaartaan in ay yeeli doonaan waxey ballan qaadeen. Tan ayaa ah Axdi! Axdigu waa ballan lagu xoojiyey dhaar. Wuxuu iyaga ku hogaamiyey xaflad (Nexemyaah 5:13) wuxuuna iyagii ku amray in ay ballantooda oofin doonaan. Markaad dhaaraneysid waxaad geleysa heshiis.

**2.** Waa inaan ogaano in ay jiraan **saddex nooc oo Axdi ah:** Axdiga uu qof ku waajiban yahay inuu sayidkiisa addeeco, axdiga uu sayidka kuwa hoostiisa jooga la gelayo iyo axdi laba dhinac ah taa oo ay gelayaan laba siman. Erayga 'axdi' 27 jeer ayuu soo gelaya buugga Bilowgii. 22 marxaladoodba waxey aheyd Ilaah oo ummadda naxariistiisa axdi kula galay Nuux (6:18; 9:9, 11-13, 15-17); ama Ilaah oo midhtii Ibraahim ku barakeynayo Ibraahim (15:18; 17:2, 4, 7, 9, 10, 11, 13, 14, 19, 21). Shan jeer ayey dad wada

siman axdi isku galeen (14:13; 21:27, 32; 26:28; 31:44). Nooca kale e axdigana waa kan uu qofka sayidkiisa axdi kula geli doono inuu addeeci doono amarkiisa oo dhan laakiin kama heleyno buugga Bilowgii axdiga noocan ah; marka ugu horeysa e axdiga noocaas ah uu ficil galay waxey aheyd Baxniintii 19:5 (taa oo aheyd in ay dadka ballan qaadaan in ay Ilaah addeeci doonaan) iyo Baxniintii 23:32 (taa uu sharcigu ka mamnuucay in ay reer Kancaan inkaarta kaga fakadaan dhaarta ay ku dhaaranayaan in ay Israa'iil addeeci doonaan).

Axdigii Nuux wuxuu ahaa mid ay naxariis ku jirtay. Axdigii reer binu Israa'iil e Muuse buurta Siinay lagula galay wuxuu ahaa mid sharci ku lafaaqan mana hoos joogno sharcigaas.

Way jiraan sharciyo kale oo naxaaris lagu sameeyey sida kii Nuux. Waxaan Baybalka ka arki doonnaa axdiyo kale oo lala geli doono Ibraahim, Daa'uud iyo Ciise iyo dadkiisa.

**3. Haddana aan aragno waxyaalaha uu axdiga ka dhisan yahay.**

a) Axdig waa ballanqaad oofin u baahan.
b) Axdigu waa in dhaar lagu xiro
c) Waa inuu jira wax ama qof ka faa'idayo axdiga. Kan heli doono barakada dhaarta. Ama ahayn waa inuu jira qof ama marxalad lagu sharciyeyn doono inuu dhaarto.

d) Axdiga naxariista waa mid aanan wax sharuud ah ku xirnayn marba haddii la bixiyo in kastoo hadiyad ahaan loo bixin karo.
e) Axdiga mudda dheer ayuu qaadan karaya maxaa yeelay, ilaa ay dhaar ka dhacdo ficil ma galo.
f) Axdiga waxaa ku xirnaan karaya calaamad nooc kastoo ay ahaataba.
g) Axdiga waxaa la socon karaya dhiig daadis ama neef gawricid. Waa waaqdhac camal.

Waxyaalahan oo dhan waa laga heli karaa axdiga Ilaah amaba kan uu la galay nebi Nuux,
**a)** Axdigu wuxuu ahaa inuu Ilaah ku dhaartay inuusan adduunyada biyo ku baabi'in doonin mar dambe.
**b)** Madaama ay axdi aheyd Ilaah wuxuu ku dhaaranaya dhaar aan laga soo noqon Karin. Waxaa jiraan laba shey oo aan la bedeli Karin – Axdi iyo dhaar sida ay ku dhigan tahay Cibraaniyada 6:18.
**c)** Axdigaas waxaa loogu tallagay in ay ka faa'idaan, adduunyada, Nuux, carruurtiisa, xayawaanada iyo dhulkaba.
**d)** Axdiga hadduu mar baxo dib looma soo celin karo. Axdigii lagu dhaartay Bilowgii 8:22 iyo 9:11 weligeed lama baabi'in karo.
**e)** Axdigii sharuud la'aanta ahaa wuxuu ahaa mid hadiyad loo siiyey kuwa la siiyey. Waa markuu Nuux Ilaah addeecay (6:22) **kaddib** markii la bedelay.

**f)** Axdigu mudduu qaadanaya. Ilaah wuxuu horta hagaajinaya ku talagal (6:13-21) xafladdii axdigana waxey timid daadka kaddib (8:22).
**g)** Axdigii Nuux waxaa calaamad u ahaa qaansa roobbeed. Qaansa roobbeedka waxey callaamad u aheyd inuusan Ilaah dhaartiisa ka soo noqon doonin.
**h)** Axdigii Nuux lala dhigtay wuxuu ahaa mid waaqdhac iyo neef gawricid ay ku jireen (8:20).

Waxyaalahan badidood waan ku aragnaa axdiyada aan galno. Ilaah wuxuu axdi la galay Ibraahim.

a) Ilaah wuxuu ballan siiyey Ibraahim (Bilowgii 12:2-3).

b) Dabadeedna wuxuu sameeyey axdi (Bilowgii 15:1-21).

Ilaah wuxuu diyaar u ahaa inuu dhaarto.

c) Kuwa ka faa'idi lahaa axdigaasi waxey ahaayeen Ibraahim iyo farcankiisa – Yahuudda iyo kuwa isaga xiriir kula yeesha xagga rumeysadka ay Ilaah rumeysanayaan.

d) Waxaa la gaaray heer ayba dhici karin inuu axdiga dhumo (waxey aheyd Bilowgii 22 kaddib).

e) Axdiga mudduu qaatay. Ballanta waxaa la bixiyey Bilowgii 12 iyo 15; waxaa laga dhaartay Bilowgii 22.

f) Callaamadda axdigana waxey aheyd gudniin.

g) Waxey aheyd in waaqdhac la sameeyo (Bilowgii 15:9-10).

Axdiga cusebna waa isla sidaa

a) Axdiga wuxuu leeyahay ballanqaad. Ballantuna waxey aheyd barakada Ruuxa Qoduuska ah.

b) Waxaan ku lug leenahay xiriirka Ilaah kaa oo ah kan ku dhaaranaya inuu barakooyinkan na siin doono. Luuqadda Cibraaniga waxaa lagu yidhaahdaa ‘*gelidda nasashada*’.

c) Kuwa ka faa’idaya barakadan waa rumeystayaasha iyo farcankooda sharuuddaduna waa in ay badbaadaan (Faalimaha Rasuullada 2:39).

d) Dhiigga axdigaasi waa dhiigga Ciise Masiix.

e) Wakhti ayey qaadaneysa inaan nasashada galno.

f) Marba hadduu Ilaah noogu dhaartay, ballantaasi weligeed ma lumi doonto.

g) Callaamooyinka axdigaasi waa Baabtiiska iyo cashada Rabbiga.

h) Waxey uun ficilgal noqoneysaa markaan ku tiirsanno dhiigga Ciise Masiix.

Mawduucyadan waa inaan ka sii shaqeyno intaan Bilowgii wax ka sii baraneyno waayo, halkan waa uun lagu soo koobay. Bilowgii 6:18 wuxuu ku dhawaaqay uun mawduuc looga sii hadli doono qaybaha kale e Baybalka.

# Waxaa loo badbaadiyey duni cuseb

***Cutubka 30aad***

(Bilowgii 7:6-8:19)

Nooc kastoo xukumaad ah ama badbaado ah oo Ciise lagu helayo waan ka heli karnaa cutubadan.

**1. Daadka waa dhacda dhab ah oo taarikh ah.** Waxey u badan tahay inuu daadka dhacay markay taarikhda aheyd 5,000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore. Way caddahay in wax kasta la qorayey markuu daadka dhacaayey. Bilowgii 7:6 waxey sheegeysaa in Nuux uu 600 oo sannadood jiray markuu daadka dhacayey. Tan labo macna ayey yeelan kartaa,

a) Waxaa dhici kartaa in waayahaas ay dadka sannado badan noolaan jireen
b) Waxaa dhici karta in ay ka macna aheyd in qoyska Nuux soo jiray 600 oo sannadood.

Laakiin arinta halkan nooga cad waxey tahay inuu jiray qof wakhtiyada iyo taarikhda qorayey. Bilowgii 7:10 waxey sheegeysa inuu daadka yimid toddoba maalmood markay doonnida galeen kaddib. Haddana waxey u egtahay inuu jiray qof laga yaaba Nuux oo qorayey sida ay dhacddooyinka u dhacayeen. Maalinta ay biyihii daadka dhulka dedeen si taxadir leh ayaa qoraal

loo geliyey; waxaa qoran, *'Sannaddii uu Nuux lix boqol oo sannadood jiray, bisheedii labaad, maalintii toddoba iyo tobnaad oo bisha, isla maalintaas ayaa ilihii moolka weyn biyo ka buqdeen, dariishadihii samadana la furay'* (7:11). Bilowgii 8:3-4 waxaa noogala sheegaya muddada ay qaadatay in ay biyaha hoos u degaan mar kale, iyo sida maalinta toddobaad e bisha toddobaad doonnida ugu kor degtay buur Caraarat. Ku dhawaaqidda maalmaha waxey ka sii muuqata aayadaha xiga sida 8:5, 6, 10, 12, 13. Waxyaalahani waa taarikh; wakhtiyaduna aad baa loo hubsaday loona qoray. Runtii waa wax dhacay. Ma sheegi karno qaas ahaan halka ay masiibadan ka dhacday. Waxaa laga yaaba in ay aheyd agagaarka dooxada Mesobotaymiya. Laakiin sida uu Nuux sheegayba, waa uun adduun halka ay waxyaalahan ka dheceen. Shakina kuma jiro oo wax alla wixii adduunkaas ku noolaa oo dhan way baabe'een. Markuu Baybalka adduun ka hadlayo wuxuu ka hadlaya adduunka ku dhaqmayey dhaqankii la yaqaanay oo lagaga dhaqmayey agagaarka badda Mediteraniyan. Bilowgii 4-11 wuxuu arimahan ku soo qabanaya dhacddooyinkii Mesobotamiya.

**2. Daadka wuxuu ahaa uun dhedhen yar uu Ilaah adduunka dhedhensinayey xukunka daran e imaan doona.** Erayga Eebbe wuxuu leeyahay, *'Sida wakhtigii Nuux ahaa, sidaas oo kale ayaa imaatinka Wiilka Aadanahu ahaan doonaa'* (Matayos 24:37). Adduunkii hore waxaa

lagu burburiyey daad ku butaacay dad aan Alla ka cabsasho lahayn sida aan uga akhrinayno 2 Butros 2:5; eeg 3:6. Isla sidaana samada iyo dhulka aan maanta haysano waxaa loogu tallagalay in dab lagu baabi'iyo. Ilaah wuxuu Nuux iyo reerkiisa ku yidhi gudaha gala (7:1-10). Maalmo ka bacdi biyihii daadka ayaa yimid. Durduradii dhulka ku jiray oo dhan ayaa wada butaacay irdaha jannadana waa la furay (7:11-16). Biyihii aad bey wax kasta uga dulmareen (7:17-24). Halkan Bilowgii 7:11-24 waxaan arkayna Ilaah oo dib u rogaya wax alla wuxuu horay u uumay. Caasinimada aadmiga ayaa rogtay uunka oo dhan. Isla sidan ayuu Ilaah adduunka ku sameyn doonaa haddana. Adduunkeenan wuu rogi doonaa. Ilaah uma ogolaan doono in ay caasinimo weligeed waarto.

**3. In kastoo uu xukunkaas daran jiray, Ilaah weli naxariis ayaa ka buuxday.** Si kastoo uu u xanaaqo, Ilaah weligiis naxariis la'aan ma noqdo. Wuu nacayb yahay caasinimada wuuna edbinaya laakiin taasi macnaheedu ma ahan in xanaaqa uu caasinimada u qabo ay ka dul mareyso dabeecadihiisa kale sida naxariista. Wax kastoo uu Ilaah sameeyaba weligiis ma naxariis darnaado. Bilowgii 7:13 waxey leedahay, *'Isla maalintaas'* waa maalintay biyaha butaaceen – Nuux, wiilashiisa iyo naagahooduba way galeen doonnidii. Waxey heleen hab nabadgelyo in kastoo ay dhex bartanka ugu jireen xukumaadda Ilaah. Waa run oo in alla intii ku hooyan doonto

Ciise Masiix, doonnida Ilaah way badbaadayan isla sida ay ka ahayd adduunka uu Nuux ku noolaa. Waa in lagu hoyda. Ciise ayaan ku hooyaneyna isla sida ay iyagu u galeen (7:13). Rumeysad ayaa saldhig u ahaa go'aankooda.

**4. Madaama uu doonnidii galay Nuux wuu badbaaday.** Xayawaanada waxey callaamad u ahaayeen inuu Ilaah wixii hore baabi'inayo si uu wax cuseb u bilaabo laakiin ma ahayn inuu uumis kale sameen doono. Tani waa habka Ilaah. Ma uusan dayrinin adduunkii hore. Waxyaalaha ka tirsanaa adduunka hore ayuu adduunka cuseb u soo gudbiyey, si ay isbedel u lahaato oo dib bey wax kasta u bilowdeen. Uunka cuseb e Ilaah waa go'aanka uu gaaray oo ahaa inuusan cidhib tirin uunkii hore.

Nuux markuu doonnida galay ayuu Ilaah iridda xiray sida ay ku dhigan tahay 7:16. Nabadgelyada Nuux waxey ku jirtay gacanta Ilaah. Ma ahayn hawsha Nuux inuu isku nabadgeliyo doonnida. Marba hadduu doonnida galay, Ilaah ayaa kala wareegay masuuliyadda nabadgelyadiisa. Ilaah ayaa nabadgelyadeena ka dhigaya mid sugan. Ilaah iridduu xiray. Ma jirin si uu Nuux uga soo dhici lahaa doonnida waayo, wuxuu wayni lahaa adduunka cuseb uu Ilaah ugu tallagalay. Ilaah ayaa irdaha khatarta nagu soo wejahan naga xiraya.

Daadkii wuu sii daatay (7:17). Roob saxariir ah ayaa da'ay. Ma jirin hab looga badbaadi lahaa roobkaasi haddii aanay ahayn habka uu Ilaah diyaariyey. Adduunkii Nuux oo dhan waa baaba'ay. Biyihii way sii bateen ilaa ay ka dulmareen buuraha. Ma jirin qof ka fakan lahaa baaba'aas. Xukunkii sidii loogu tallagalay ayuu ku socday! Isla sidaanna markuu xukunka Ilaah yimaado sida keliya oo aan kaga badbaadi karno waa uun annagoo Ciise Masiix hoygeena ka dhigano. Habka ay dhacdooyinkan u dheceen waa uun wax na suganaya oo dhici doona. Wax alla wixii noolaa oo dhan way dhinteen. Waxaa jirtay dhimasho adduunka oo dhan saameysay. Mushaarka caasinimada waa dhimasho. Caasinimada edbin unbay noo keeneysa nooc kastoo ay ahaataba iyo markay dhici doontaba. Aayadaha Bilowgii 7:21-24 waxey noo sheegayaan sida ay wax alla wixii dhinacaas adduunka ku noolaa oo dhan loo baabi'iyey.

Inkaarta Ilaah weligeed ma socon waxey uun gudatay kutalagalkii loogu tallagalay iyo wakhtiga loogu tallagalay. Ilaah wuxuu xusuustay Nuux (8:1) oo durbaba biyihii hoosay u dheceen (8:1-5) oo dhulkii wuu engegay (8:6-14). Ilaah aamin buu u ahaa kuwa Isaga, badbaadadiisa iyo kan uu badbaadada ku keenay – Nuux talla saartay. Ilaah aamin buu noo yahay. Markaan rumeysad leenahay Ciise wuxuu naga dhigaya kuwa ka sareeya daadka xukunka. Annagoo nabad ah ayaan dhinaca kale uga soo

bixi doonnaa si aan ula qabsano dhulka cuseb e Ilaah.

5. **Badbaadada waxey nagu hogaamineysa cusboonaanta noolosha.** Durbaba waxey helayaan amar ay doonnida kaga baxaan (8:15-19). Waxey ku soo baxayaan adduun la daahiriyey oo la nadiifiyey. Ma jiraan wax calaamad ah oo lagu xusuusan karo adduunkii hore e Ilaah ku caasiyey oo daadka ka horeyey. Nuux iyo xayawaanada waa aasaaska bar tilmaameydka taarikhda cuseb. Nuux iyo kuwa badbaadada Ilaah ka qayb qaatay oo dhan waxaa u bilowday noolol hor leh. Dhacddooyinkan waxey na dhedhesinayaan waxyaalaha nagu soo food haya uu Ilaah sameen doono. Mar dambe biyo kuma sameen doono e wuxuu ku sameen doonaa dab. Waxaan ku soo bixi doonnaa sama cuseb iyo dhul cuseb, waxey ahaan doontaa adduun cuseb oo ay xaqnimo ka buuxdo.

# Qaansa roobbeedka cirka ku taala

***Cutubka 31aad***
(Bilowgii 8:20-9:18)

Axdiga waa ballan aan la jebin karin oo hadal lagu oofiyey. Ilaah wuxuu isku amray inuu ballantiisa xajiyo. Wuxuu axdi la dhigtay Nuux, Ibraahim, Daa'uud (wuxuu dadkan la galay axdi kala duwan) iyo Muuse.

**1. Saldhigga axdiga waa saddaqo bixin.** Nuux isla markuu doonnida ka soo baxayba Ilaah buu mawlac sadaqa lagu bixiyo u dhisay (8:20). Wuxuu qaaday kuwa ka mid ah xayawaanada xalaasha ahaa oo sadaqo la gubo ayuu Ilaah u bixiyey. Waxey aheyd hab uu ku tusinayey abaalka uu Ilaah u qabo iyo sida uu Ilaah u addeecsan yahay. Hase ahaatee, sida keliya uu Ilaah ku gaari lahaa waa uun isagoo neef gawraco.

Ilaah wuu asmacay saddaqadaas (8:21a) oo **saddaqadii kaddib** wuxuu qaaday ballan: mar dambe dhulka ma inkaari doono (8:22b). Cimaladii la beeran jiray iyo kuwii la beer goosan jiray caadi ayey ku soo noqdeen. Badbaadada uu Nuux daadka ka badabaaday ayaa

noqotay aasaaska barakada baniaadmiga. Mar dambe markuu roob da'ayo ma ahan in ay ka welwelaan inuu daad kii la mid ah imaan doono waayo, ficilkaas Ilaah wuu ka dhaartay ballan ayuuna ku qaaday inuusan saa sameen doonin mar dambe.

Isla sidaana Ilaah wuxuu ballan nagu siinaya Ciise. Wuu na badbaadinaya wuxuuna naga ballan qaadaya inaan dhaxli doonno barakooyinkiisa. Waa nagula awood siin doonaa si aan Isaga ugu adeegno. Waan dareemi doonnaa nabadgelyada Ilaah iyo quudiskiisa. Waxaan ka qayb qaadan doonnaa aqoonta Ilaah iyo hormarka boqortooyadiisa. **Annagoo aaminsan ballamadan iyo dhiigga uu noo daadiyey**, shaki kuma jiro inaan horey u soconeyno. Dhiigga Ciise mooyaane cafiska caasinimada suurtagal ma ahan, ma jiraan wax kaloo tilmaan ah oo aan noolosha ku aasaasi karno. Dhiigga Ciise mooye, daahirinta maalin walba ah suurtagal ma noqoneyso. Wax dambe oo aan xagga sare ka heleyno ma jiraan. Sida keliya oo axdiga lagu xajin karo waa uun annagoo rumeysanno dhiigga uu Ciise daraaddeed u daadshay.

**2. Axdiga waxaa ka buuxa ballama badan oo aan mustaqbalka heli doonno.** Ilaah wuxuu Nuux u calleemo saaray inuu adduunka dib u buuxiyo (9:1), wuxuuna siiyey dhiiranaan in ay nabadgelyadiisa tahay mid uu Ilaah sugayo (9:2), waxaana laga ballan qaaday inuusan wayni

doonin wax alla wuxuu u baahnaan doono (9:3). Sharuuddada keliya oo la siiyey waxey aheyd inuu dhiig daadiyo. Dhiigga xayawaanada waxaa loo haystay inuu daahir yahay (9:4) sida loo istecmaalaya daraaddeed markii xoolaha la gawracaya. Caasinimada qudh goyntana waxaa loo haystay in ay tahay tan ugu xun maxaa yeelay, naf ayaa baxaysa (9:5). Waxey aheyd in ay tirada dadka kordhisanto (9:6). Masuuliyadda dhulka dib loo buuxinayo waxay saarneyd Nuux (9:7).

Ballamada axdiga cuseb ku jiraan waxay ku saabsan yiyiin waxyaalaha uu Ilaah noo sameen doono intaan noolnahay. Wuxuu naga ballanqaaday inuu Ruuxiisa Qoduuska ah uu si joogta ah noola jiri doono. Wuxuu na siin doonaa qalbi cuseb. Wuxuu nagu hogaamin doonaa ilaahnimada. Wuxuu qalbiyadeena u furi doonaa aqoontiisa iyo waxa ay doonistiisa tahay.

Ballantii Nuux la siiyey waxey aheyd la xarbinta mustaqbalka iyo sida uu adduunka Ilaah u socdo. Isla sidaana ballanta Masixiinta la siiyey waxey ku saabsan tahay mustaqbalka iyo boqortooyada Ilaah e nagu jirta aanna ku dhex jirno. Dulqaad iyo rumeysad ayaan ballamadan ku heli doonaa.

**3. Ilaah wuu awood badan yahay Isaga ayaana wax kasta toosinaya.** Ilaah ayaa qaadaya tallaaba kastoo noo habboon. Ma ahayn fikiradda Nuux inuu axdigan helo. Ilaah wuxuu Nuux ku

yidhi, *'Oo Ilaah Nuux buu la hadlay, iyo wiilashisii la hoogay, isagoo ku leh, Bal eega, anigu axdigayga baan idinku adkaynayaa, idinka iyo farcankiinna idinka dambeeya…'* (9:8, 9). Tan waa arin sheygan aad xoogga u saareysa. Waxaan idinku leeyahay sidan, waxaan sameyn doonaa sida ayuu leeyahay Ilaah.

Ilaah weli Isagaa ah hogaamiyaha weligiis jiray. Wuxuu leeyahay waan ku badbaadiyey. Haddana waxaan ku siinaya ballan. Waan kuu samaynaya. Waxa keliya uu Ilaah kaaga baahan yahay ayaa waxay tahay sida uu yidhi, waa inaad I aamintid oo aad ila socotid. Waxaanna ku keeni doonaa meel cusebnaan ay ka buuxdo isla sida aan kaaga ballan qaaday.

**4. Axdiga wuxuu wada saameyey adduunka oo dhan.** Ilaah ballanta uu u dhiggay farcanka Nuux oo dhan weligiis kama rogmi doono (9:9). Xataa xayawaanada ayaa ku jiraan (9:10), iyo jiinsiga baniaadmiga oo dhan, wax kastoo nool (9:11), ballantan way u jiri doontaa farcan kasta (9:12). Mid kastoo dhashaa wuu ka badbaadi doonaa baaba'a daadka.

Axdiyada Ilaah way sii koobmayan oo tilmaan qaas ah oo adduunka ka tirsan ayey ku sii socdaan. Midka ugu horeyey wuxuu ahaa mid ku kooban wax kastoo la uumay iyo dhulka. Axdigii Ibraahim lala galay wuxuu ahaa mid ku kooban Ibraahim iyo farcankiisa. Axdigii Muusena wuu

soo koobmaya oo wuxuu ku soo koobmaya qurunta Israa'iil. Axdiga Daa'uud lala galayna wuxuu ahaanaya mid ku kooban Daa'uud iyo farcankiisa. Axdiga Ciisena waa ka sii daran yahay kuwa kale oo wuxuu ku kooban yahay oo keliya kuwa Isaga rumeystay oo badbaaday oo keliya. Ma jiro qof aanan badbaadin uu Ilaah wax axdi ah la galay. Carruurtana waxey uun axdiga kaga tirsanaan karaan haddii ay qaateen badbaadada loogu yeedhay sida Baybalka ku dhigan, *'Maxaa yeelay, ballanka waxaa leh idinka iyo carruurtiinna iyo kuwa fog oo dhan in alla intii Rabbiga Ilaaheenna ahu u yeedho'* (Faalimaha Rasuullada 2:39). Axdiga mar sida uu u kala dambeyo ayuu meel qaas ah iskuugu tilmaamaya. Axdigii Nuux wuxuu ahaa mid loogu tallagalay adduunka oo dhan. Xataa xayawaanada way ka faa'idayeen.

**5. Axdiga marba haddii la bixiyo wax sharuud ah laguma xiri jirin.** Suurtagal ma ahan in axdiga ku dhigan 8:2 dib loo rogo.

Isla sidaana Ilaah hadduu mar wax noogu dhaarto, shaki kuma jiro in ay noo ahaan doonaan. Axdiga Nuux waa mid ku yimid addeecistii uu Nuux Ilaah addeecay, si kastana ha ahaatee, marba hadii lagu dhawaaqay ma jirto si loo rogi karo. Wax kastoo uu Ilaah ku dhaartana taa unbay la mid yihiin.

**6. Axdiga wuxuu lahaan jiray dhexdhexaadiye.** Ilaah wuxuu ballamadan ku bixiyey Nuux. Wuxuu toos ula hadlaya Nuux (8:21, 22; 9:1b-7, 9-11, 12-16, 17) wuxuuna sii gudbiyey waxyaalihii lagula hadlay. Adduunkana wuxuu ka faa'iday wuxuu Ilaah Nuux siiyey.

Ilaah wuxuu Ciise u sheegay inuu siin doono qurumaha adduunka. Mid alla kii Ciise u imaan doono wuu ka qayb qaadanaya ballantaas, laakiin mid Ciise ka baxsan oo heli doonaa ma jiro.

**7. Waxaa jirtay callaamad axdiga lagu garan lahaa, qaansa roobbeedka.** Waxaa jiray wax la arki karo oo ballanta lagu soo xusuusan karo (9:12-17). Ilaah wuxuu leeyahay Markaad qaansa roobeed aragtaan ogaada waxaan leeyahay mar dambe adduunka daad kuma layni dooni. Waxey callaamad u tahay naxariisteyda, waxey callaamad u tahay sida aan ballanteyda u xajin doono.

Isla sidaana ballanta Ilaah e ku jirta callaamada uu nagu siiyey baabtiiska iyo cashada Rabbiga waa muhim. Annagay callaamado noo yihiin, taa oo aan ka baraneyno inuu Ilaah xaq naga dhigi doono si joogta ahna noo quudin doono.

# Sheem, Xaam iyo Yaafet

***Cutubka 32aad***
(Bilowgii 9:18-29)

Geesigii ugu weynaa e daadka, Nuux, aad buu iisu niyad jebiyey! Isagu waa Aadankii labaad oo isla sidii Aadan ayey masuuliyad u saaran tahay inuu dhulka ku tarmo uuna beerfale ahaado. Isla sidii Aadan ayuu isaguna gef u galay maxaa yeelay, isaguna damac ayaa galay. Damaciisa ma ahayn mid uu midhaha geedka jeclaaday laakiin wuxuu ahaa mid u jiitay xagga cabbitaanka canabka.

Qoys yar ayaa doonnidii ka soo baxay (9:18), Ilaahna wuxuu shaqadiisa ku sii watay saddexddiisa wiil iyo wiilka uu awowgga u ahaa Kancaan. Dhulkii Mesobotamiya iyo agagaarkeeda dadkii ayaa mar labaad ku batay waxeyna ku tarmeen saddexdaas ruux sida qoran, *'Saddexdanu waxey ahaayeen wiilashii Nuux; oo iyagii farcankoodii baa dhulka oo dhan ku fiday'* (9:19). Aayadda 20aad waxey leedahay sida tan, *Nuuxana wuxuu bilaabay inuu beerray noqdo, oo wuxuu beertay canab'*. Waa qalad inaan aayaddaan u tafsiirno inuu Nuux ahaa beerfalaha ugu horeyey. Khamrigii canabka ayuu wax ka cabbay. Waxaa dhici kartaa inuusan waxba ka ogeyn sida uu u dhaqmi doono hadduu xad dhaaf ku cabbo. Dhasdhaskii sakhraanimada ayaa u geysatay inuu dharkii ka dhaco oo uu teendhadisa

dhexdeeda ku qaawanaado (9:21). Xaam wuu ku farxay masiibada aabbihiis qabsatay oo isla markiiba wuxuu bilaabay inuu sheekada fidiyo (9:22). Wuu ku faraxsana wixii dhacay laakiin kuwii kale waxey ku dadaaleen in ay wax kastoo ay awoodaan sameeyaan si ay sharafta aabbahood u dhawraan oo ay ugu ceyb qariyaan (9:23).

Markay biirta maskxaddiisa ka baxday uu soo toosay (9:24), Nuux wuxuu fahmay dhacdada dhacday, Xaam iyo Kancaan ayuu ka fekeray oo Ruuxa ayaa isaga ku hogaamiyey inuu u wacyoodo. Waa dhacdada labaad oo wax Masiixa ku saabsan Baybalka looga wacyoodo.

**1. Waxaa halkan nooga caddaaneysa daacadnimada Baybalka.** Baybalka inaba ma qarinayo caasinimada ay nebiyada uu Ilaah adeegsan jiray sameyeen. Waa dhacdo calool xumo leh laakiin qoraha dhacdada inaba iskuma deyayo inuu dhabta dariiqdeeda ka leexiyo. Runtii Nuux wuu gefay. Kuwa Baybalka qoray aad bey wax u cafiyaan (ma jiro mid gefkiisa lagaga sheekeynayo Cibraaniyada 11aad) laakiin geesiyaalka rumeysadka kagama sheekeynayaan oo keliya wanaagga ay sameeyeen oo keliya. Qaladaadkooda waa la sheegay madaama ay adduunkan jarrabaadka leh ku nolayeen.

**2. Rumeystayaasha ugu caansan oo dhan nooloshooda lagama waynayo wax caasinimo ah.** Xataa geesiyaalka rumeysadka Ilaah way ku caasiyeen. Ma ahan oo keliya sakhraanimada Nuux, laakiin xataa waxaa jirtay beentii uu nebi Ibraahim ku dhaqmay, qudh goyntii iyo nolosha ku xadgudubka galmada uu Daa'uud galay, inkaaristii Butros iyo kuwa kaleba waa dhacdooyin dhab ah oo maanta sheeko ah.

Nuux waa qof caadi ah oo ku badbaaday uun nimcada Ilaah. Dadka Ilaah waxaa adduunka ku haya uun nimcada Ilaah. Haddii aan kuwaas hore wax kaga duwannahay, ma ahan awooddeena ilawse waa gargaarka aan Ilaah ka heleyno. Hadduu Ilaah na garab gelin wakhti kastaan Ilaah ku caasin karna. Sida keliya oo aan dad kale kaga duwanaan karno waa uun gargaarka aan nimcada Ilaah ka heleyno oo naga dhigayo kuwa maalin waliba ku nool sida ay doonista Ilaah tahay. Hadduu Ilaah in yar uun naga nasto si daran ayaan u turunturoneynaa. Bal yaa sheegi kara waxa nagu dhici doonno haddii aan Ilaah ka xurowno? Ilaahna xiriguu in yar noo dibcin doonaa haddii aan kibirno oo aan Isaga ku caasino.

**3. Waa nagala waaninaya khatarta ay khamrada leedahay.** Baybalka si bayaan ah noogama mamnuucaya khamriga. Ma jiraan sharciyo khamrada ku saabsan laakiin waxaa jiraan waana badan oo nogula waaninayo

khamrada. Baybalka wuxuu sheegaya inuu nin kasta wixii qalbigiisa la quman ku dhaqmo markii loo kaco xagga dabiicadda – laakiin waa inaan waano qaadano!

Ruuxa Qoduuska ah e Ilaah ayaa nebi Nuux wax sheegsiyey.

**1. Kancaan waa inkaaran yahay.** Nuux wuxuu ka fekeray inankiisa Xaam oo gefka uu aabbihiis galay ku farxay. Wuxuu haddana ka fekeray inankuu awowgga u ahaa Kancaan, wuxuuna ku wacyooday in dabiicaddan xun e Xaam ay raaci doonto Kancaan. Waxaan xusuusan karnaa in ay reer Kancaan dad Ilaah ku caasiyey oo aan sharaf lahayn ahaayeen.

Aayaddan dadka qaarkiis waxey u fasireen hab ay dadka ku midabtakooraan oo waxaa dhacday in farcanka Xaam il xun lagu eego. Laakiin qoraaga wuxuu ka hadlaya Kancaaniinta e ma ahan dadka Xaam ka soo farcamay oo dhan. Runtii Kancaaniinta waxey noqdeen kuwa aad loo yaso oo ay qurumaha kale oo hareerahooda joogay xukumeen. Quruunta Israa’iil ayaa ugu dambeysta guumeysatay. Aad bey u xuntahay in baniaadmiga la kala sareysiyo oo saa lagu caadaadiyo. Bilowgii 9:25 ma difaaceyso midabtakoor, oo weliba midabtakoor heerkaas gaadhay adduunka kama jiro maanta.

Injiilka Ciise Masiix ayaa ka guuleystay kala duwanaanshaha noocaas ah. Ma jiraan qabiilo,

jiinsiya, isbaheysi, luuqada, kala duwan oo laysku midabtakooro markii la raaco wax baridda Ciise. Ma jiro Griig ama Yahuud, mid gudan ama mid aan gudneyn iyo wax alla wixii aan sheegi karnaba ma jiraan wax uu baniaadmiga ku kala sareeyo oo maanta laysku midabtakoori karo. Ma jiro addoon ama mid xor ah. Masiixa wuu u wada siman yahay dhamaantood.

**3. Waxey aheyd inuu Yaafet dhulkiisa balaarsado.** Farcankiisa ma geli doono kan uu Masiixa ka dhallan doono ilawse baraka ayaa ugu jirta Masiixa. Nuux ayuu difaacay isna waa la difaaci doonaa. Habka halkan wax looga sheegayo waa hab sawir sheeko ah. Yaafet wuxuu ku noolaa teendooyinka Sheem. Waxaa noo muuqata inuu qof mid kale hoy siiyey. Waxaa taarikhda adduunka nooga muuqata inuu Masiixa ku imaan doono Yahuudda. Dabadeedna kuwa badan oo aan horey Ilaah aqoonin ayaa badbaadada Ilaah Yahuudda ku heli doonaan. Dadkii Yaafet way sii bateen oo dhulkoodina waa sii balaaratay laakiin sheekadu way ka weyntahay dhulkooda balaartay – waxyaala kale ayaa jiraan. Injiilka wuxuu ku imaan doonaa badbaadiye farcanka Yahuudda ah, markuu yimaadana badbaadada waxey gaadhi doontaa dadka adduunka ku nool oo dhan. Kuwa badan oo dadka Yaafet ka tirsan ayaa hoy ka heli doona badbaadada ku imaaneysa badbaadiyaha Yahuudda ka dhashay.

Sawirka badbaadada si tartiib ah ayuu u sii balaaranaya. Badbaadiyaha wuxuu ka dhallan doonaa naag (Bilowgii 3:15), wuxuuna ahaan doonaa Yahuud (9:26). Waxaa naloo sheegi doonaa inuu ahaan doono mid ka dhallan doono qaas ahaan qabiilka Yuda, wiilka Daa'uud, kaa oo Beytilexem kaga dhallan doono bikrad. Sawirka cutubka 3aad iyo 9aad dhexdooda ayuu qumaati nooga muuqanaya laakiin waxyaala kaloo dheeraad ah ayaa noo muuqan doonaan.

Haddaba fursadda labaad e baniaadmiga la siiyey kuma aysan idlaanin ku caasinta uu Ilaah mar labaad ku caasiyey. Nuux ma aheyn nin dembi oo dhan ka nadiif ah. Ugu dambeystina Nuux wuu dhintay. Bilowgii 9:29 ayaa noo idleyneysa waxyaalihii ugu dabaroona oo ku jiray cutubka 5aad. Caasinimadii iyo dhimashadii weli way jiraan, laakiin badbaadiyaha waddaduu ku soo jira.

# Liiska quruumaha

***Cutubka 33aad***
(Bilowgii 10:1-32)

Daadkii kaddib, baniaadmigu wuxuu helay fursad kale uu adduunka ku noolaado. Ilaah wuxuu badbaadiyey qoyskii Nuux oo wuxuu istecmaalay qoyskaas si uu dib u bilowbo jiinsiga baniaadmiga. Farcankii Nuux ayaa tarmay oo waxey ku fideen agagaarka bariga iyo meela ka fog.

Nuux wuxuu lahaa saddex wiil, Sheem, Xaam iyo Yaafet sida ku dhigan Bilowgii 10:1. Jiinsiga baniaadmiga ku noolaa Mesabotamiya wuu tarmay oo qabiilo iyo quruuma ayaa askunmeen. Cutubkan wuxuu noo sheegaya sida uu qoyskan u fiday iyo waxyaalaha u dhexeeyey si aan u fahamno sida ay quruuma badan ugu fideen agagaarka bariga kuwaa oo ka soo farcameen Nuux. Waxey u egtahay inuu daadka qayb adduunka ka tirsan oo keliya dhib u geystay maxaa yeelay, dad ayaa ka jireen qaybbaha kale e adduunka. Bilowgii cutubka tobnaad wuxuu ka sheekeynaya oo keliya adduunka Mesabotamiya, laakiin sannadka 5,000 – 2,000 dhallashada Ciise ka hore dad fara badan ayaa ka jireen qaybaha kale adduunka dadkaasi oo aan laga sheegin Bilowgii cutubka 10aad.

Dhacdada waa wax u dhexeyey wakhtigii Nuux (laga yaaba sanadka markuu ahaa 5,000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore) iyo Ibraahim (2,000 sannadood dhallashada Ciise ka hore), iyo wixii ka dambeyey maxaa yeelay, quruumaha qaarkood waxaa looga hadlaya in ay jireen baartamaha qarnigii labaad – Ibraahim kaddib. Waan ka war hayna dhulkii laga soo gaadhay Yaafet (10:2-5), iyo kii Xaam (10:6-20), iyo kii Sheem (10:21-31).

Quruuma badan ayaa Yaafet kaga soo farcameen xagga woqooyi. Quruuma badan ayaa kaga soo farcameen Xaam xagga dhexaadka Koofurta iyo galbeedka oo ay ku jiraan, Masar, Kuush iyo qabiiladii Kancaan. Dhexaadka Koofur iyo barigana waxaa ka soo butaacay qabiiladii farcanka Sheem. Farcanka Sheem waxaa lagu tilmaamaya in ay jireen ilaa lix fac, kuwa Xaamna waxey soo jireen ilaa afar fac, kuwa Yaafetna waxey soo jireen ilaa saddex fac. Qaybtan waxaa ka tirsan kuwii horseedka u ahaa Israa'iil. Qabiilka Yahuudda waa magac laga soo xigtay magaca Sheem.

Waxey u egtahay in liiska quruumaha la qoray qarnigii 2aad dhallashada Ciise ka hore intaanan lagu darin qoraalka Bilowgii. Waxey u egtahay in taarikhda nimrod ay aheyd mid jirtay baartamaha qarniga labaad.

**1. Sheekadan yar e taarikhda ah waxey sawir naga siineysa sida uu guumeysiga ku bilowday.** Waxba saa looguma sheegin farcanka Yaafet (10:2-5), laakiin waxaa farcanka Sheem ka soo baxay Kuush. Kuushna waxaa ka soo farcamay Nimrod kaa oo laga yaaba inuu la mid ahaa Sergonkii Akkad oo noolaa 2,300 sannadood dhallashada Ciise ka hore.Nimrod qofkuu ahaaba, wuxuu ahaa qofka aasaasay boqortooya weyn taa oo ugu horeyntii ay ka tirsanayeen Babilon, Erek, Akad iyo Kalneh oo ku yaalay dhulka Shincaar (sida Sumeriya iyo Mesobotamiya).

Nimrod wuxuu ahaa mid boqortooya dhisa geesina ah. Wuxuu jeclaa ugaarsi. Dadka reer Babilon iyo Asiriya boqoradooda waxaa sawiradooda laga helaya derbiyada ka soo haray dhismooyinkii horay u jiri jiray oo burburay iyagoo libax la xarbinaya taa oo noo caddeneysa hawlaha ay boqortooyada ku mushquulsanaan jireen. Wuxuu boqortooyadiisa u sii balariyey Asiriya (10:11) wuxuuna dhisay Nineweh, Kaalah iyo kuwa kale (10:12).

Kani wuxuu ka mid yahay nimanki ugu darnaa oo caanka ahaa. Weligoodba waxey jacayl yihiin in ay awooddooda balaariyaan ama ay dhul weyn xukumaan. Nimrod wuxuu jeclaa inuu dadka guumeysto, inuu boqortooyo dhiso oo weliba wuxuu jeclaa inuu boqortooyadiisa balaariyo.

Macnaha magaciisa waa ‘waan caasin ay’ ama ‘aan caasino’.

Fursad labaad ma ahan wax baniaadmiga faa’ido u ah. Waxaad u maleyn karta in daadkii kaddib ay dadka cashar waaya aragnimo ah lahaan doonnaan oo ay Alla ku caasin doonin mar dambe. Dadka qaarkiis wuxuu odhan karaya, ‘runtii masiibada dhacday daraaddeed dumar iyo ragba mar dambe Ilaah kuma caasin doonaan. Waa run oo baniaadmiga si joogta ah Ilaah uguma caasiyo. Laakiin dadka isla qaladkii ayey marar badan sameynayaan.

Waa maxay sababta ay boqorada, hogaamiinta iyo madaxda militariga ay ugu hunguri weyn yihiin in ay wax weyn xukumaan? Intee buu ka yimid qalbiga noocan ah oo dadka ku jira? Waa maxay sababta ay quruunba quruun kale ula dagaaleyso? Waxyaalahan oo dhan waxey ka mid yihiin hunguri weynida baniaadmiga. Baniaadmigu weligiis ma qanco. Dumar iyo ragba waxey doonayan in ay noloshooda wax qabad u yeelaan. Waxey doonayan in ay wax hormar ku gaaraan oo ay magac yeeshaan.

**2. Sheekadan waxey na siinaysa sawirka buruburka horay u dhacay naguna soo food haya.** Magacyo ayaa noo soo baxayaan oo aan ku tilmaami karno dhacddooyin aan naqano. Tusaaleh, Misrayim waa magaca kale oo loogu yeedhi jiray Masar; waxeyna u dhigmeysa dad

Israa'iliinta cadaadin doono oo xabsiga gelin doono. Kancaan, Siidoon, Xeet iyo kuwa kale (10:15-18) waxey na xusuusinayaan Kancaaniintii, iyo reer Siidoon, iyo dad kaloo badan oo xukunka Ilaah hor imaan doonaan madama ay gaari wayeen heerka uu Ilaah uga baahnaa in ay noolohooda ka gaaraan. Sodom, Gomora iyo quruumaha ku dhaw oo dhan (10:19) waxey caan ku noqdeen caasinimadooda.

**3. Sheekadan waxey tilmaameysa inuu Sheem yahay kan uu farcankiisa badbaadiyaha ku imaan doono** (10:22-31). Farcanka Yaafet waxaa dib loo abtirin karaya saddex fac, Xaamna afar laakiin Sheem waa ilaa iyo lix fac! Sababta waxey tahay sheekadu waxey u leexaneysa xagga nebi Ibraahim farcankii Sheem.

Kuwaa ayaa ah quruumaha ku fiday dhinacan adduunkii hore. Waxey aheyd meel u dhaw adduunka bariga meesha ay dhacdada badbaadada ku dhici doonto. Liiska quruumaha wuxuu noo tilmaamaya nebi Ibraahim, nebi Ibraahimna wuxuu noo tilmaamaya midhta nebi Ibraahim, Ciise kaa oo ah badbaadiyaheena. Toddobaatan quruun ayaa laga sheegaya Bilowgii cutubka 10aad. Waa nooc tidho kaamilan markii loo kaco xagga macnaynta tidhada sida ay dadkii hore u haysteen. Toddobaatan quruun waxey metelayan adduunka oo dhan in kastoo ay jireen dad kale oo ka baxsanaa toddobaatankan. Hase yeeshee, adduunka ay toddobaatankan

metelayeen wuxuu dan ka lahaa oo keliya meelaha ay ka jireen wareerka, isla weynida iyo hunguri weynida xukumaadda.

Haddana maalintii uu Ruuxa Qoduuska ah dadka ku soo degayna quruumaha oo dhan ayaa samada hoosteeda iskuugu yimid (Faalimaha Rasuullada 2:5). Boqortooyada xaqnimada ma ahan mid awoodda militariga lagu helayo laakiin maalin unbaa imaan doonta oo wax alla wixii lagu heli wayay awoodda militariga la heli doono. Lagumana heli doono awoodda ugaarsadaha ugu weyn e geesiga ah laakiin waxaa lagu heli doonaa awoodda badbaadiyaha. Umana ahaan doonto oo keliya quruumaha iskuugu yimid in ay caasinimo ku heshiiyaan laakiin wuxuu u imaan doonaa kuwa metelayo qurumaha iskuugu yimid in ay boqortooyo cuseb aasaasaan iyagoo ku shaqaynayo awooda sare e ka imaaneysa Ruuxa Qoduuska ah e Ilaah.

# Dabaqii Baabel

***Cutubka 34aad***
(Bilowgii 11:1-9)

Daadkii kaddib qabilooyin kala duwan ayaa dhulkii beerta ku habboonaa ku bilaabay dhaqama qaas ah oo kala duwan (10:1). Ilaah quruuma badan ayuu aasaasayey laakiin qurumahaasi waxaa kaloo ay aheyd in lala aasaaso luuqada kala duwan. Qabiilooyinkii dhulka quruumaha ku noqdeen waxey bilabeen luuqada kala duwan laakiin durbaba way ku wada xiriiri wayeen luuqadahaasi. Dhacdada Bilowgii 11:1-9 waxey ka sheekeyneysa wakhtigii faca Bilowgii 11:10-32 taa oo aheyd mid socotay muddo dhan 3,000 oo sannadood. Waxaa dhici karta inuu isbedelkaasi muddo gaaban gudaheeda ku dhicin.

**Waxaan fiirsaneyna sida ay 'quruun' ku aasaasantay taa oo aheyd mid uu Ilaah caleemo saaray.** Quruuma kala duwan ayaa aasaasmay waxeyna ku hadlayeen luuqado kala duwan. Waxaan aragnay sida uu **guurka** u ahaa wax uunka ka tirsan. Waxaa laga yaaba inaan fahamnay sida uu Ilaah qoysaska ula macaamiloodo. **Reerkii** Nuux waxey ku badbaadeen Nuux. Qoraaga dhacdadan wuxuu bayaan noogu sheegaya sida ay Enook iyo Nuux ku aasaaseen reerkooda. Waxyaalahan waa habka uu Ilaah qoysaska u istecmaalo. Hadda waxaan

haysana mid kale oo la mid ah oo ah habka uu Ilaah ku shaqeyo; Ilaah ayaa quruumahana caleemo saara. Bilowgii cutubka 10aad wuxuu ka hadlay quruuma yar yar; hadda Bilowgii 11:1-9 waxey u sii guda geleysa dhinaca luuqadaha ay quruumahan istecmaalayeen.

**Ilaah wuxuu caasinimada ay dadka sameyn lahaayen kaga hor tegay burburka uu burburiyey midnimada jiinsiga baniaadmiga.** Bilowgii 11:1-4 waxey sii caddeyneysa sawir kaloo dheeraad ah oo na tusinayo sida daran uu baniaadmiga Ilaah ugu caasinayo. Marar badan ayaan horey u soo aragnay. Lab iyo dhaddigba waxey doonayeen in ay sida Ilaah noqdaan (3:5) laakiin inkaar ayaa baniaadmiga ka qabsatay doonistaasi. Haddana waxaa jirtay heer kale uu baniaadmiga isku tijaabiyey inuu ka baxo doonista Eebbe uuna ku dhaqmo waxa la quman. Waxey xataa dhib geliyeen malaa'igihii ku adkaan wayey doonista Rabbiga (Yuudas aayadda 6aad). Haddana taasi waxey sababtay inuu Ilaah inkaar kale iyaga ku soo dejiyo oo daadkii ayaa iyagii dhulka ka baabi'iyey qaybtaasi ay adduunka ka joogeen. Hadda mid taas la mid ah ayaa dhacaysa. Laakiin Hadda Ilaah muxuu ku inkaari doona baniaadmiga?

Daadkii kaddib dadkii Sheem hal luuqad ayey ku hadlayeen (11:1). Midnimada waa awoodda ugu weyn e wax badan lagu taro. Xataa Ilaah la'aantiis dadka midoobay waxey lahaayeen

awood ay ku sameyaan wax alla waxey damacsanayen, laakiin waxyaalaha ay dadkan ku midoobeen oo ay rajeynayen in ay sameyan waxey aheyd caasinimo. Waxey aadeen dhinaca bariga e Araarat oo waxey gaareen banaan weyn oo dooxada Mesobotamiya ku taala oo u dhexeysa webiga Yufraad iyo Xiddeqel. Shincaar (11:2) waxey ku taala (ama ay u egtahay) agagaarka Sumeriya ama Mesobotamiya

Durbaba waxaa haddana bilowday ilbaxnimo aad u xoog badan waa marka saddexaad oo aan buugga Bilowgii ka arkeyno in ay doonayeen in ay samada aadaan oo ay fadhiistaan jannada Ilaah. Nooc cuseb e bulukeeti iyo dhacaan qaas ah oo laga heli karo oo keliya Sumeeriya ayey fikirad cuseb ku bilabeen (11:3). Waxey bilabeen in ay dabaq dhisaan. Haddana waxaan arkeyna inuu jiinsiga baniaadmiga yahay mid aad farsamada ku dheereya laakiin waa nasiib darro oo farsamada uu jiinsiga baniaadmiga qabo waa mid uu isku deyayo inuu Ilaah kula tartamo si uu iskuugu ekeysiyo Ilaah si uu damacyadiisa u qanciyo. Waxey doonayeen in ay midnimadooda xoojiyaan laakiin ujeeddadooda waxey aheyd in ay ka soo horjeestaan firdhiska uu Ilaah doonayo in ay baniaadmiga adduunka oo dhan ku fidaan waayo, waxey aheyd baniaadmigu inuu tarmo oo uu adduunka buuxiyo sida ku dhigan Bilowgii 1:28 iyo 9:1. Dadkaas farsama yaqaanka ahaa oo ilbaxa ayaa erayga ‘Baabel’ waxey ku macneynayeen ‘iridda Ilaah’. Laakiin qofka

Cibraaniga ku hadlayo waxey la aheyd inuu eraygaasi yahay ‘wareer’. Dadku waxey doonayeen irid ay toos Ilaah ugu tegi karaan; qoraageena wuxuu sheegaya in natiijada ay heleen ay aheyd luuqado wareersan iyo quruuma wareersan!

Farcankii Sheem fursad kale ayaa la siiyey laakiin ‘fursadda labaad’ e la siiyey wax isbedel ah oo ay nooloshooda ku dartay ma jirin. Iyagu ma rabbin in ay adduunka ku fidaan. Waxey rabeen in ay samada habkooda ku galaan, aad bayna ugu dadaaleen in ay sharaf iyo magac yeeshaan iyagoo ku midoobay ku caasinta Ilaah.

**Ilaah si joogta ah ayuu u ilaalinaya caasinimada ay baniaadmiga sameynayaan** (11:5). Ilaah wuu soo degay si uu u baaro sida ay wax u dhacayeen. Waxey isku deyayeen in ay meesha ugu fog e Ilaah tagaan laakiin niyad xumadooda Ilaahba ma aanay gaarin e Rabbiga ayaa u soo degay oo arkay waxey sameynayeen!

**Ilaah wuu ka soo hor jeedaa hab kastoo uu baniaadmiga isku deyayo inuu jannada ku galo haddii uu habkaasi ahayn rumeysad Isaga la rumeysto oo doonistiisa lagu socdo.** Ilaah ma ogolo in meeshiisa qoduucsan uu soo galo qof aanan ku imaanin Ciise, midhta Ibraahim. Si uu u kala daadiyo fikiradda qaldan uu baniaadmiga iskuugu yimid, Ilaah wuxuu aasaasay quruuma quruumihiina wuxuu siiyey

luuqada kala duwan. Weligeedba suurtagal ma noqon doonto in ay adduunka oo dhan midoobaan. Mar kastaba isgaarsin xumada ayaa hor taagan midnimada adduunka. Luuqada ayaa qofka ka hor istaagta inuu qofka kale ula midoobo sida uu jeclaan lahaa. Waxaa kaloo ay tan ka caawineysa inuusan adduunka oo dhan ku heshiinin inuu noqdo midooba oo Ilaah ku caasiya. Luuqadahan kala duwan iyo kala duwanaanshaha quruumahan faraha badan waxey ragga iyo dumarka ka hor istaagayaan in ay ku guuleystan in ay ku caasinta Ilaah ku midoobaan. Laga yaaba in ay saa ahaan doonto ilaa uu adduunka ka dhamaado.

Caasinimadii ugu horeysay uu baniaadmiga Ilaah ku caasiyey (Bilowgii 3aad), Ilaah wuxuu iyaga ka bixiyey beertii Ceeden. Caasinimadii labaadna (Bilowgii 6aad), Ilaah wuxuu iyaga ku baabi'iyey daadkii. Haddaba caasinimada saddexaad Ilaah muxuu natiijadeeda ka dhigi doonaa? Qaybaha kale e Baybalka ayaa jawaabtan na siinaya. Dib ayuu wax u cusbooneysin doonaa oo Ibraahim ayuu istecmaali doonaa. Ibraahim ayuu ku soo diri doonaa Ciise. Adduunka oo dhan wuxuu ku midoobi doonaa laguna barakayn doonaa Ciise. Ibraahim ayuu Ilaah adduunka ku siin doona wuxuu baniaadmiga weligiis jacleysan jiray oo aheyd inuu magac yeesho. Ilaah wuxuu sheegay inuu magaca weyneyn doono, oo magaca inuu buugga noolosha ku jiri doonana waa hadiyad laga ballan qaaday Masixiinta

Maalinta uu Ruuxa Qoduuska ah e Ilaah Masixiinta ku soo degayna waa dib u roggidda dhacddadii Baabel ka dhacday. Waxaan arkeyna in mar labaad kuwa quruumaha adduunka metelayo ay hal meel ku wada kulmeen (Faalimaha Rasuullada 2:5); waxaan barbardhigi karnaa Bilowgii cutubka 11aa). Markii hore luuqadaha waxaa loo aasaasay in ay dadka kala fogadaan laakiin hadda luuqadda dabka carabka u eg loo bixinayo in ay dadka ku hadlaan luuqado ama ‘carabbo’ si fikiraddii Baabel loo rogo!

Markii hore luuqadaha kala duwan dadka ayaa lagu kala dirayey laakiin hadda waxaan arkaynaa iyagoo leh, *‘Sidee baa midkeen waluba u maqlaa iyagoo ku hadlaya afkeenna aynu ku dhalannay?’* (Faalimaha Rasuullada 2:8). Haddii ay waagii Baabel aheyd muucjiso dadka lagu kala dirayo, hadda waagan Bentekostega waa muucjiso kale oo dadka lagu mideynayo – waa isla wixii ay dadkii hore damacsanayeen! Laakiin midnimadan uu adduunka oo dhan midoobayo waa mid nimcada Ilaah ku timid e ma ahan mid caadi ah. Waa Ilaah oo noo naxariistay oo noo soo degay e ma ahan ibniaadanka oo habka la quman Ilaah ku doonayo oo dabaqyo dhisanayo! Markay wax kasta dhamadaan oo ay caasinimada, dhimashada, gef jecaylka iyo naarta lagu tuuro badda dabka, Yeerusaalemta cuseb ayaa soo degi doonta (Muujintii 21:2) jannada dib ayaa noogula soo celin doonaa.

# Agtagga Ibraahim

***Cutubka 35aad***
(Bilowgii 11:10-32)

Qaybtan Bilowgii e aan hadda geleyno waxey aad xoogga sareysa Ibraahim kaa oo ahaan doono ninka aad looga warami doono hal meel oo saddex meeloodka Baybalka oo dhan. Waxyaala aan halkan kaga warameyno ayaa jiraan oo ay ka mid yihiin,

**1. Kumaan kun oo sannadood ayaa ka soo wareegatay intii jiinsiga baniaadmiga fursad labaad la siiyey uu caasinimadiisa qumaati uga soo noqday laakiin waxba isma bedelin.** Bilowgii 11:10-26 waxaa lagaga hadlaya rekoorka farcamada sida ay Sheem uga soo farcameen oo ay Ibraahim u soo gadheen. Dhacdadan waxey ka warameysa sheeko ku saabsan waxyaala dhacayey kumaan kun oo sannadood oo la soo dhaafay ayey aheyd fursad labaad oo ay jiinsiga baniaadmiga caasinimadooda qumaati kaga soo noqdaan dhacdadii daadka ka bacdi. Waxey aheyd in ay xaqnimo ku dhaqmaan. Laakiin furaddii labaad wax badaado ah oo ay keentay ma jirin. Jiinsiga baniaadmiga wuu kari wayey inuu ka guuleysto caasinimada. Facba fac kale ayuu ku sii xirmay laakiin wax badabaado ah oo ay heleen ma jirin. Cutubkan dhamaadkiisa waxaan arkeyna magac

cuseb: Ibraahim (11:27)! Ibraahim waa jawaabta uu Ilaah ku xalinayo xaqdarrada baniaadmiga.

**2. Ibraahim wuxuu ka soo farcamay qoys aan xaqnimada ku dhaqmeynin; habka cuseb uu Ilaah ku shaqeynayo waa mid saldhigiisa uu yahay naxariis.** Faca Ibraahim waa sida kan aan cutubka 5aad ku aragnay, waxeyna leedahay tobban qaybbood, waxeyna leedahay tobban magac. Magacdaasna waa kuwan, Sheem, Arfaksad, Salah, Ceeber, Feleg, Recu, Seruug, Naaxoor, Terax iyo Ibraahim. Waxey u egtahay in ay magacda inta badan tiir u ahaayeen qayb faca ka tirsan. Magacdan ma jirto meel ay ku noqnoqosho ka jirto wax aanan ka ahayn meel ay arin tixraac ku sameynayan. Taa uu macnaheedu yahay in qayb faca ka tirsan ay sidan ku dhawaaqi karto: **Hebel 1aad** wuxuu noolaa **intaas oo sanadood** wuxuuna farcankiisa ku tarmay **hebel 2aad**. Liiska qoyska wuxuu na tusinaya in ay hebelka kowaad iyo hebelka labaad u dhexeyeen sannado badan oo aan la garaneynin. Tan waxey u egtahay sheekada Bilowgii 11:14 uu ku jiray la odhan jiray Salah. Markuu soddon jir ahaana wuxuu dhallay wiil. Faca wiilkaasna wuxuu noqday Ceeber. Bilowgii 11:14 waxaan ku macnayn karnaa inuu faca Salah jiray 403 sannadood. Ceeber ayaa noqday midka ku xigay facaasi oo tiir u ahaa faciisa.

Hadduu habkani yahay hab sax ah oo facyada lagu fasiro, waxey u ekaaneysa in dhacdada

facyada oo dhan ay qaadatay mudda gaareyso 3,000 oo sannadood. Haddii aan dhallashada Ibraahim ku cabirno in ay aheyd 2,000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore, isdabajoogga facyada wuxuu ka bilaabanaya 5,000 dhallashada Ciise ka hore ilaa ku dhawaan 2000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore.

Sidaa daraaddeed ma jiraan waxyaala badan oo muhim ah oo aan la tixgelinin markii facyada laga war bixinayey. Haddii uu wax wareer ah ku jiro, taarikhda daadka ayaa aad dib loo dhigi lahaa. Haddii taarikhda daadka dib loo celiyana aad bey dib ugu noqoneysaa ilaa 10,000 oo sannadood dhallashada Ciise ka hore. Laakiin way adagtahay in ay farcamada intaas oo sannadood kala fogayeen, sidaa daraaddeed taarikh dambe ayaa kaga habboon mid la soo dhaafay. Daadka aad bey uga hadlayeen reer Mesobotamiya waxeyna u dhigantahay inuu daadka dhacay wakhti aan aad uga fogeyn facyada ay ku abtirsanayeen. Waxyaalaha ay ka waramayen daad caadi ah ayuu ahaa laakiin wuxuu ahaa mid dhibaata weyn ku geystay. Dhulka lagaga sheekeynayo Bilowgii cutubka 6aad ilaa 9aad wuxuu u egyahay mid ku yaalay dooxada Mesobotamiya oo wax alla wixii ku noolaa oo dhan laga baabi'iyey oo qaabka dhulkana aad buu iisu bedelay.


Abtirsigan wuxuu ugu horeynta ina tusaya xiriirka u dhexeya Sheem iyo Ibraahim; ballantii

Bilowgii 9:26, 27 ayaa la xajinaya. Waxaa kaloo muuqata inuu jiinsiga baniaadmiga haystay wakhti ku filan uu isku badbaadiyo hadduu awooday inuu is badbaadiyo. Laakiin wuu iska badbaadin wayey xaqdarrada uu ku dhaqmayey iyo addoonsiga dhimashada. Waxey aheyd inuu Ilaah ficilqaado – wuxuuna ku bilowbay Ibraahim.

Terax wuxuu guursaday ugu yaraan laba naagood (Bilowgii 20:12). Waxey u egtahay inuu dhashay 135 sannadood intuusan Ibraahim dhallanin ka hore. (Inta da' oo ay jireen way adagtay si lagu fahmo. Waxaa laga yaabaa in sannadaha facyada kale soo jireen oo dhan la soo xisaabayey oo ay isku darsamayen. Haddii aan qumaati u fahanno habka da'da loo xisaabay waxey u egtahay in hal shey ka badan tixgelin looga baahan yahay markii la macneynayo. Hadda macnaynta da'da waxaan u qaadaneyna sida noo muuqata oo ma ahan inaan isku wareerino waxyaalaha aanan la fahmi karin.)

Waxey u egtahay in Haaraan iyo Naaxoor ay ahaayeen walaala Ibraahim ka da' weynaa. Waxaa jirtay in markuu Ibraahim 75 jir ahaa ay Terax aadday Uur. Haaraan wuxuu ku guursaday Uur wuxuuna lahaa laba gabdhood, laakiin wuxuu dhintay intuu reerka Uur deganaa. Naaxoor wuxuu guursaday mid ka mid ah gabdhaha uu abtiga u ahaa. Ibraahimna wuxuu

guursaday gabadh uu ilma adeer ugu qumanaa, Saaray.




Intuusan Ibraahim toddobaatan iyo shan jir gaarin ayuu qoyska u guuray dhulkii la odhan jiray Haaraan. Terax waxey dhimatay iyadoo 205 jir ah. Ibraahimna wuxuu ahaa ku dhawaan 75 jir (Bilowgii 12:4). Ibraahim waxaa lagu amray inuu Uur ka tago (eeg Faalimaha Rasuullada 7:4; Bilowgii 15:6), laakiin waa uun markay Terax dhimatay kaddib markuu addeecay amarka Ilaah. Ibraahim waxaa lagu amray inuu noqdo mid safra. Wuxuu israaciyey Saaray iyo luut.

Haddii uu Ibraahim dhashay abaaraha markuu sannadka ahaa 2,000 dhallashada Ciise ka hore, waxey noqoneysa Terax in ay nooleyd wixii u dhexeyey 2135-1925 dhallashada Ciise ka hore, oo Ibraahimna wuxuu noolaa wixii u dhexeyey sannadaha 2,000-1850 dhallashada Ciise ka hore. Waxey u egtahay in da’dooda si muucjiso leh loo dhereyey.

Muhimadda keliya oo halkan ku jirta ayaa waxey tahay inaan ogaano uun inuu Ibraahim ka soo farcamay qoys aan xaqnimada Ilaah ku dhaqmeynin. Uur iyo Haaraan waxey ahaayeen xarooyin caan ku ahaa caabudidda bisha (sanam). Reerka Ibraahim iyo weliba Ibraahim naftiisa intuu da'da yara wuu caabuday ilaahya kale oo aan ahayn Ilaaha samada iyo dhulka uummay (Yaashuca 24:2).

Ibraahim aad buu muhim u yahay markii la eego sheekooyinka Baybalka Ciise ka sokow. Masixiinta waa carruurta Ibraahim (Galatiya 3:29), Ibraahimna waa aabbaha kuwa Ilaaha samada iyo dhulka uummay rumeystay oo dhan, Yahuudda iyo kuwa aan Yahuudda ahaynba.

Ibraahim waa muhim maxaa yeelay wuxuu lahaa rumeysad ku deyasho leh, wuxuu ku dhaqmayey noolosha uu Ilaah nooga baahan yahay inaan ku noolaano. Masixiinta waxey Ilaah u aaminsan yihiin isla sida uu Ibraahim Ilaah u aaminsanaa.

Ibraahim waa xalka uu Ilaah na siiyey oo xaqdarrada looga hortegayo. Baniaadmiga waa laga fiijiyey jannada waxaana u timid cadaabtii daadka. Laakiin mar dambe isla cadaabtaas ma dhici doonto. Laakiin baniaadmiga weli caasinimadii uu horey Ilaah ku caasiyey ayuu ilaa maanta ku dhaqmayey. Ilaah miyuu na siin karaya xal kale oo xaqdarrada lagu xaliyo? Haah, wuxuu soo diri doonaa Badbaadiye,

badbaadiyahaasna wuxuu ahaan doonaa midhta Ibraahim.

Xalka xaqdarada uu Ilaah na siiyey waa Ciise! Ciise ayaa xal u noqon doona caasinimadan adduunka ka buuxsantay. Ciise ayaa Nimrod xal u noqon doonaa, xalka nacaybka uu baniaadmiga Ilaah u qabo. Ciise ayaa ahaan doona kan adduunka oo dhan mideyn doono waana xalka keliya oo loo hayo Alla ku caasinta adduunka dedday. Ciise wuxuu keeni doonaa cafinta caasinimada, suurtagal ayuuna ka dhigi doonaa in ay lab iyo dhaddigba ay qalbiyadooda Ilaah u furan. Waa Ciise kan rag iyo dumarba isku keeni doono. Dhimashadiisa iyo sara kiciisa ayuu ilaa maanta ku yahay xalka keliya oo caasinimada baniaadmiga ay Ilaah ku caasiyeen kuna caasinayan lagu xalin karo.

Caasinimadii hore e ay Aadan iyo Xaawa galeen waxey keentay Alla ka fogaasho, iyo nacayb soo galay ragga iyo dumarka dhexdooda. Durbaba waxaa dhacday inuu Ibliiska addoonsado baniaadmiga. Daadkii ayaa baabi’iyey dhaqan dhan iyo ummad dhan oo fursad labaad ayey u noqotay midhta Nuux laakiin rumeysadkii ku deyashada lahaa e ay ku dhaqmeen Enook iyo Nuux iyo natiijadii daadkii darna wax xal joogta ah oo laga helay ma jiraan. Sidaa daraaddeed Ilaah wuxuu soo diray Ibraahim kan ku dhaqmay rumaysad iyo addeecid ku deyasho leh. Ilaah ayaa isaga istecmalay si uu baniaadmiga kale

tusaala kaga dhigo waxa ay tahay nolaanshaha rumeysadka badbaadada. Aad buu rumeysadka u xoojiyey ilaa uu ka helay wuxuu Ilaah ka ballan qaaday isaga. Rabbiga ayuu addeecayey xataa sharciga muuse la'aantiis ama sharci kale la'aantiisba oo Ilaah buu toos ula xiriirayey oo codka Ilaah ayuu maqli jiray.

Ugu dambeysta Ilaah wuu dhaartay oo wuxuu Ibraahim ku yidhi, 'madaama aan arkay inaad iga cabsaneysid; runtii waan ku barakeyn doonaa'. Wixii ballantaas ka dambeyeyna Ilaah wuu xusuusan doonaa axdigiisa xaqa ah, dhaartii uu ku dhaartay Ibraahim. Ilaa ay midhta Ibraahim ka timaaddo oo ay naga badbaadineyso gacanta cadawyadeena, oo aan ka ahaan doonno kuwa Ilaah cabsi la'aan ugu adeega, uguna adeego xaqnimo iyo qoduusnima jirta (Luukos 1:72-75) kama hari doonno inaan Eebbe addecno rumeysadkiisana ku dhaqanno.

Haddii aad u bogtay akhriska buuggan oo aad nagu caawin rabtid inaan akhristayaal fara badan faa'ideyno, fadlan waxaad si dheraad ah noogala xidhiidhi karta cinwaankan:

**Sovereign World Trust**
**Sanduuqa Boostada 777, Tonbridge**
**Kent TN11 0ZS**
**United Kingdom**

**Ama ahayn waxaad kala xidhiidhi karta kuwa waddankaaga ka qaybiyaan buugagta Sovereign World Trust sida Codka Wadada Nabada oo laga helayo cinwaankooda ah, www.codkanabada.org**